لبسم الرحيم الرحمن

# MAS'UULIYADA CULIMADA & MUSTAQBALKA UMADA

Waxaa diyaariyay:Warsame Naalleeye Xassan
cirsankayeer@hotmail.com

---------------------------------------------------------------------------

Mahad dhammaanteed Alle ayaa iska leh, nebigeennii Maxamedna naxariis iyo nabadgelyo Allaha siiyo.

## HORDHAC

Maqaalkeennii hore ee {Dhagarta Gaalada} waxaynu ku soo falanqaynay sida gaalo aan kala hadhin ay dagaal dhan walba leh umadeenna ugu soo qaaday,ilaa geedkay la rabeen ay ku xidheen .Waxaa kale oo aynu soo cadaynay in dayicidii aynu ku samaynay diinteenii macaanayd ee roone nagu mannaystay ay sabab u ahayd in umaadu u nuglaato shirqoolladii loo maleegay, sidoo kale waxaan ku soo tilmaannay in maqaal dambe aan kaga hadli doonno qaabka dhibka taagan looga bixi karo,kaasoo ah maqaalkankada, aanna ugu magaca daray {Mas'uuliyada Culimada iyo Mustaqbalka Umada}.

Sida cinwaanka ka muuqatana mustaqbalka iyo aayaha ummada wuxuu noqonayaa oo ku xidhan yahay hadba siday culimadu u dedaalaan oo isu dareensiyaan mas'uuliyada saaran ,oo haday baylihiyaanna ummaadii way dayacmi,haday isxilqaammaanna ummadii way bedbaadi,Laakiin,qaabkee wax u sabato bixin karaa baa imanaysa?.

maqaalkana su'aashaa ayuu jawaab u yahay, isagoo ka kooban cutubyada soo socda ee kala ah:

1) Hordhac. (2 ) Gogol-dhig (3) Yaa sharci-u-dejinta nolosha u xaq leh ?
4) Yaa ehel u ah hoggaaminta nolosha ummada? (5) Xukunka gaalada iyo waxa sharcigu ka qabo.(6) Xukunka cilmaaniyiinta iyo waxa sharcigu ka qabo.
(7) Culimada iyo hoggaaminta ummada.(8) Sida culimada hoggaanka looga fogeeyay.
9) Sidee culimadu doorkooda u gudan karaan?
10) Talooyin culimada ku wajahan,ahna:
1) In la helo midnimo iyo wadajir.
2) In la yeesho aqoon diineed oo qoto dheer.
3) In aqoon loo yeesho waaqaca .
4) In ummadu hesho cilmi iyo tarbiyo .
5 ) In la yeesho bisayl siyaasadeed

6)  In go'aannada loo  madax bannaanaado
7)  In dhulkii iyo ummadiiba la soo dhiciyo
8)  In la fahmo qiimaha cunsurka soomaliga ah.
9) Jihaadka nololi noogama sokayso
10) In nasriga Alle kalsooni lagu qabo.  (8) & Gebo-gebadii qoraalka

Alle ayaana ka tuugayaa in uu markasta na solonsiiyo sida uu jecel yahay ee raalliga ka yahay, wixii dembi iyo meel ka dhac ahna noo dhaafo oo naga cafiyo.

## GOGOLDHIG

W Waxaynu maanta ku jirnaa xilli aad u adag oo dhib iyo rafaad badan. Waxaynu ku jirraa waqti innaga iyo walaalaheennii muslimiinta ahaa lagu hayo colaado ba'an  iyo cidhib tir aad halis u ah,ammin gaalo oo dhan siday nooga cad goosan lahayd u mindinyo lisanayso.Marka la eego waxa muslimiin silac iyo halaag ah ee nala baday ee Somali,Reer-Ciraaq,Reer-Afqaan,Reer-Bakistaan,Reer-Falasdhiin iyo kuwo kaleba la mariyay ilaa maantana lagu hayo, qofka muslimka ah ee damqasho iimaaneed leh waxaa ka hor muuqanaysa sawiro aad  looga argagaxo,kuna bixinaysa amakaag iyo yaab,isagoo iswaydiinaya:Maxay umadani cadaawada heerkaa  gaadhsan  ku mudatay?! Kuwa sidaa bahalnimada leh shucuubtan u cunaya soo isla kuwa gumaysta ee khayraadka dalalkooda  booba ee ku faajo-faajooda ma aha?!!Weliba isugu muujiya inay yihiin dad xadaarad leh,xuquuqda insaankana aad u qiimeeya?!Dunida dhanna ku baahshay ururro ay leeyihiin waxay u doodaan danaha dadyawga taagta daran iyo kuwa dulman?!!

Runtii waxa socda waa wax qofkast oo garasho iyo xilmi lahaa  la wareeray, hurdana la ledi waayay.Waana xaaladii abwaan Nabadoon ka hadlayey markuu lahaa:

1) Adduunkaan ka gees iyo gees-----------gaalku ku adkaaday
2) Gardarrada caddaankaa khalqiga--------lagu gumaadaayo
3) Guud-cirroole waayeel harkii------------gawrac lagu jiiday
4) Gabdhihii xijaabnaa maryaha -----------gacanta loo qaaday
5) Guryihii cibaadada madfaca -------------lala gawaan raacshay
6 )  Geeskastoo aad eegtaba muslimka------laga gol roonaaday
7)  Gogol dhaca ujeeddada hadaan ---------gees yar ka iftiinsho
8)  Garnaqsiga xanuunka leh hadaan-------idin garwaaqsiiyo
9)  Gunnimada intaas le'eg maxaa -------- wada guddoonsiiyay?!!

Bal adba garo maxaa gunnimada wada guddoonsiiyay?!!
Hadana Alle xakiim weeye,waxan oo dhib ahna kolley khayr bay dabada ku

wataan

Kolkaan dhibka Somaliya ka taagan hoos ugu daadegno,waxaan hadal ka taagnayn in maanta culimo iyo caamaba indhaha lagu wada hayo sida silloon ee wax yihiin, dadweynihiina markuu dhibkaa dhacay waxay noqdeen:

a) Qaybo murtadnimo cadaystay oo inna cadawgii umada soo horkacday, inna gacmo furan ku soo dhowaysay oo si kasta u garab istaagtay.

b) Qayb isku qancisay inaysan beladan ka hortegi karin dabeedna iyagoo dushooda lagu hardamayo quud raadsi mooyee himmi kale yeelan waayay, oo dullinimo iska qaayibay .

c) In badanna – waa siduu cadawgu la rabaye- inta ubadkoodii gacmaha qabsadeen bay dalalka deriska iyo meelo kale oo looga gacan haadinayay u huleeleen,iyagoo hankoodu dhaafsanayn aduunyo raacdaysi, dan iyo muraadna aan ka galayn aayo xumada dambee lala maaggan yahay iyo belada dhulkooda ka taagan.

d) Kuwo kale oo u badan dadka aqoon yahanka loo yaqaannana-kuwooda gudaha ku jira, inta dalalka deriska joogta iyo kuwa debedaha ku maqanba- way la socdaan in badan oo ka mid ah shirqoollada dadkoodii loo maleegay iyo cida dabada ka wada iyo weliba waxa lala maaggan yahay.Laakiin,badankood inta wareereen oo si wax loo qabto garan waayeen, ama cadawguba la weynaaday ayuu arrinkoodu dhaafi waayay dhabanno hays iyo allow ur u bixi. Intooda dareenku ku dambeeyona ma hayaan tabar dhaafsan muujinta hubka nin tabar waayay ee ah mudaaharadyo iyo cambaarayn .

Sida ninkii inta geela laga dhacay colkii u badheedhi waayay,dabeedna inta geed fuulay caytamay,markuu faro madhanaan reerkii yimid ee wuxuu qabtay la waydiiyayna yidhi: Intaan geed u fuulay baan cay ugu dhaadhaamiyay,iyagiina geelii kaxaysteen.

Kuwa debedaha mudaharaadyada ku samayna ma mooggan yihiin in kuwa ay xafiisyadooda ku hor mudaaharaadayaan ee Maraykan iyo waxa la ollogga ahi yihiin waxa dhibkan noo gaystay?! Kana midaysan yihiin waxyeellaynta nalala beegsaday**?!!**

e) Qolana inta guntiga giijisatay oo maryaha xaydatay bay qaadatay go'aan ah inay gaalo qurunley meel ku soo kala hadhaan, kuwaas oo si buuxda uga dheregsan inay maanta kalkoodii tahay aanayna jirin cid kale oo umadda u maqan ama gurmad laga sugayo, warkooduna ku soo ururayay macnaha ay na tusayaan tixdan ay gabadh Somaliyed tirisay ee ay ku cabbiraysay sidaysan ula gudboonayn in la isdhiibo:

1) Inaan gorodda laalaadinnaa------------geeskan kamay dhicine
2) Inaan go’o inuu gaal i dhoc----------- oo is garab yaalla
3) Geeridaan ka doortaa ---------------- - rabbina waygu garab siine
4) Somalidoo gam tidhi baa------------ - runtii gaalku ledayaaye

5) Adduunyada geesi baan ---------------u nahay gebi ahaanteede
6) Gaalada axsaan uma galloo------------waynan na garan hayne
7) Gu'yaal soo socda dagaal in-----------aan gelayo go'aha yaw sheega
8) Inaan cadaw na guulguuli -------------karin go'aha yaw sheega
9) Geerida inaynnaan ka baqin ----------go'aha yaw sheega
10) Gunnimada inaannan qaadan----------go'aha yaw sheega
11) Guullaha inaan garansannahay--------go'aha yaw sheega.

Sideedabana marka dhib iyo belaayo dhacaan bay ragga iyo rahu kala baxaan,halyeyga iyo habacsanaha kala miirmaan, nin karmeedka iyo wax ma taruhuna kala hadhaan.

Maanta oo umadu xaalad aad u qallafsan maraysana waxaa baahi daran loo qabaa rag doorkoodii ragannimo la soo baxa oo umada badbaadiya,xaaladuna waxay taagan tahay tu la mid ah tii uu ka tiiraan yaysnaa hal-abuurkii Dhoodaan markuu lahaa:

1) Tafantoof dadkeennuba------- -sidii loo tafaafulaye
2) Tahan toobe oo waa ----------- tabtay u tawali yeene
3) Rag bay weli tebaysaa ----------haday soo tircinayaane

Waa in la helo rag u qum sabato bixinta ummadda, kana hortaga aayaha madow ee ku soo wajahan iyo isir-suulinta lala damac san yahay.Maqaalkeenii hore ee:{dhagarta Gaalada}

baynuna ku soo sheegnay arrimo ku saabsan waxa maanta socda,iyo dantii laga lahaa. Waxaase su'aal ah:Sidee belaayada taagan looga dabbaashaa oo looga baxaa?

Yaase raggeedii ah oo wax ka qaban kara.?

Qaabka keliya ee dhibkan looga bixi karayo waa in ugu horrayntaba si dhab ah loo fahmo waxa belada keenay,iyo waxa cadawgu noogu daw galay?
.

Waxa dhibka dhan gundhigga u ah waa baylihinta aan diinta Alle ku samaynnay.

Daawaduna waxay ku jirtaa inaan xadhiga Alle si buuxda u qabsano..

Si buuxdana markaan leeyahay,waxaan u jeedaa diintii aan sheeganaynay ayaan kaga camal fallay cibaadooyinka khaaska iyo qaybo ka mid ah axkaamta qoyska.

Dayicidaana waxaa ka ratibmay ciqaab laxaw badan oo aan is leeyahay show tanoo kale hore Somali uma soo qabsan.

Dadbadanna markay gorfaynayaan dhibka dhacay waxay taxaan sababo badan laakiiin,sabab kasta oo la sheego taasay ka soo farcantay oo hoos imanaysaa.

Allena markuu inooga warramayay aafooyinkii noocan oo kale ahaa ee qabsan jiray dadyawgii hore ee kirishtaanka ahaa, wuxuu inoo sheegay inay taa ugu wacnayd iyagoo diintoodii qaybshay, cibaadooyinka khaaska ahaana kaga

dhaqmay,intii kalena derbiga gadaashiisa ka xooreen.Allena waa kii lahaa:{Kuwii yidhi nasaaro ayaan nahay ballankii baanu ka qaadnay markaa bay in badan oo ka mid ah xaqii lagu waanshay inay raacaan isaga tageen,kolkaas baanu dhex dhignay cadaawad iyo collaytan ilaa qiyaamo taagan} Maa-ida (14)Ballanka aayadu sheegaysana wuxuu ahaa inay diinta si buuxda ugu dhaqmaan,se ballankii bay ka baxeen oo axkaamtii nolosha kala hagaysay bay dayaceen oo daaqadda ka tureen, iyagoo naftooda ugu qalbi qaboojiyay inaysan waxba ku jabnayn dayicida axkaamtaa,mar haday cibaadooyinka khaaska ah la yimaadaan. .

Allena isagoo falkaa ku ciqaabaya ayuu dhex dhigay belaayo iyo colaado aan dhamaanayn,wuxuuna inoo sheegay in taasi aysan ahayn ciqaab qoladaa ku kooban, se ay tahay sunno joogto ah oo uu nolosha u dejiyay, cidkasta oo diinteeda sidaa qaabka daran u dayacdana isla ciqaabtaas la marinayo.Marka, innooma bannaana daw aan ahayn in aan dib isu saxno,xadhiga Alle si buuxda u qabsanno,habeen iyo maalinna ka shaqaynno sidii arrinkaa loo xaqiijin lahaa. Waa in aynnu u hawl galno sidaan Alle ugu noqon lahayn,hadaynu arrinkaa ka libkeenno oo ka dhabaynnona,waxaa hubaal ah in la bedbaadayo, mu'aamarooyin badan oo gaalo maleegeenna ay hal bacaad lagu lisay noqonayaan.iyaguna bayuur u dambaynayso.Hadiise dedaalkii la iska rabay ee diinta lagu hirgelin lahaana lala iman waayo, aan oganno in gaalada la is-hayo aan laga sugayn turaal iyo ixsaantoona, waxyeellayntooda aynnaan ka soo waaqsanayn,waana in aan kolkaa innaga is eedno, oo cid kale eedin.Inkasta oo taasi gaalada ka beri' yeelaynnin godobta ay naga galeen..Sababta aynu eeda u yaalanaynona waxay tahay iyadoo qofka diintiisa gacan bidixeeya ee iimaankiisu daciifo,uu waxyeellooyinka cadawgiisa si kasta ugu nuglaanayo,sida qofka aydhiska qaba uu cudur kasta ugu jilicsan yahay.Sidoo kale,jeermisyada cudurrada gudbiya hawada ayay ka buuxaan, laakiin waxay qaadsiiyaan qofka jidhkiisu tabar yareeyo ee aan cudur iska caabbin karin.

Waxaa kale oo imanaysa,yaa umada inta dinnta barta ku hagto sabato bixin karaysa ? . Jawaabtuna,waa culimada,maxaa wacay,waxa dhacay waa ciqaab Alle, dariiqa ciqaabtaa looga bixi karona waa iyadoo nolosha umada sharciga Allelagu soo dabbaalo.

Shaqadaana cid aan culimada ahayn meel ugama bannaana mana qaban karto, waxaana taa marag u ah,iyadoo markasta oo dadyawgii hore ay dariiqa Alle ka baydhaan loo soo diri jiray rusul,si noloshooda loo sabato baxsho oo diinta loogu soo dabbaalo.

Maantana shaqadii rususha culimada ayay guudka ka saaran tahay,maxaa yeelay, iyagaa dhaxalkii rususha nasiib u yeeshay,kaas oo dhanna sharfid iyo xulasho ka ah, dhanna xil iyo mas'uuliyad ka ah.Xilkaasoo ah inay umada diinta baraan,ku dhaqaan oo ku hagaan.

Way jirtaa in duruufo hore u  jiray dartood aanay culimadu xukun u soo qaban amaba ula kac looga dhaariyay,laakiin,taasi waxba kama bedelayso xaqiiqada ah in hawsha sabato bixinta umada ay tahay mid culimada u rahman,oo kaalintooda aanay cid kale buuxin karin. Sidoo kale mar hadaysan culimadu hore maamul u soo qaban,waa jirtaa in aysan khibrad u lahayn sida  bulsho loo unko oo loo bar-baariyo,ama aysan lahayn  waayo aragnimo dawlad lagu maareeyo,laakiin, taasi waa wax u baahan oo keliya inay helaan taba-bar ehel uga dhiga inay xambaaraan oo si hufan u gutaan ammaanada Alle. d

Culimaduna kolkay u qumayaan  gudashada xilkaas,waxay ka duulayaan  diin iyo mabaadii',saa darteed waxaan qoraalkan ugu soo bandhigay,weliba ugu faah-faahshay  siday u kala muhiimsan yihiin qodobbo badan oo ka mid ah asaasyada diinta,oo aan sinaba looga maarmin inay sida qorraxda oo aan caad saarrayn  u caddaadaan.

Qoraalkanna wuxuu ku wajahan yahay qofkasta oo dareen islaamnimo iyo danqasho iimaaneed leh,wuxuu weliba si gaar ah ula hadlayaa dadka rabbi u go'ay ee diintu dhab ka tahay,weliba dareensan oo uu gubayo culayska uu leeyahay  waajibka dacwo ee saaran guud ahaan muslimiinta gaar ahaanna culimada,kuna baraarugsan in iyaga laga dhawrayo gurmadka umada lagu bedbaadinayo.Dadkaas oo ah kuwa Alle jannada ka iibsaday, siday diintiisa u kor noqon lahaydna ballanna kula galay inay hurayaan wax walba oo qaali ah. Si ay xilkaa u gutaanna ku s ifoobay  tilmaamaha nasriga Alle lagu muto,ee ah:

1) Aqoon ballaadhan oo qoto dheer oo ay diinta u leeyihiin
2) Fiqi xeel dheer oo ay u leeyihiin waaqaca lala dhaqmayo..
3) Go'aan aday iyo niyad bir ah oo duruufaha taagan lagu wajaho.
4) Saahidnimo iyo iyadoo diinta Alle daacadnimo loo khidmeeyo

Dadkaas iyaga ah oo jiif iyo hurdoba ledi waayay markay arkeen halka ay ku biyo shubatay mu'aamarooyinkii ummadooda loo qoolay ee ah silaca maanta taagan iyo haadaanta iyo qawraarinta sii salalka madow ee lagu tuuray.Isla markaa ogson in mustaqbalka ummada ay ku xidhan tahay siday ka yeelaan,oo haday u hawl galaanna ummadu bedbaadayso haday dayacaanna ummadu dayacmayso.Dabeedna Alle wacad ugu maray in inta ay nool yihiin hororka dadkooda silaca baday ka hortagayaan ilaa ay sutida u qabtaan oo mudankiisa mariyaan, umadana inta la bedbaadiyo cisi iyo sharaf ku noolaato,ama siday halgankaa iyo jihaadkaa ugu jiraan Alle shahaado ku galladaysto.

Dadkaa iyaga ayuu qoraalkan si gaar ula hadlayaa.

Nin ragay dardaaran u tahaye------doqon ha moogaado.

## YAA SHARCI- U- DEJINTA NOLOSHA U XAQ LEH ?

Marka shareecada iyo xukunka islaamka la soo hadal qaado,waxaa maanka dad badan ku soo degdega qaadi maxkamad fadhiya oo xukun saaraya dadka xuduudda islaamka ku tuntay, oo kii dhagarooba qisaasaya ama diyo ka qaadaya, kii khamri lagu helana karbaash ku xukuma,ka gogoldhaaf lagu caddeeyana jeedlaya ama rajminaya.iwm. Iyadoo waxaas oo idil ay xukunka shareecada soo hoos gelayaan,hadana macnaha xukunku intaa waa ka mugweyn yahay, kuwaasina waa uun qayb ka mid ah garsoorka loogu talo galay in shareecada inteeda kale lagu waardiyeeyo.

Laakiin xukunka waxaa hoos imanaya dhamaan qaybaha kala duduwan ee nolosha oo ay ugu muhiimsan tahay qiyamta ay shareecadu u dejisay nolosha bulshada.

Qiyamtaas oo xaddida qaabka iyo midabka ay nolosha umaddu yeelanayso.

Masalan innaga aadenaha ah maxaan nahay ? Yaa uunka ina keenay? Maxaa nolosha aduunka loo jooga ? Xagee laga yimid halkeese loo socdaa ? Maxaa la rabaa in la rumeeyo, sideese loo rumayn ? Maxaan la oggolayn in la ictiqaadsho ? Maxaa nolosha waxtar u leh, maxaanse qiimo lahayn, yaase qiimayntaas samaynaya? Maxaa xaq iyo wanaag ah oo la qaataa, maxaase baadhil iyo xumaan ah oo laga tagaa? Maxaa khayr ah, maxaase shar ah ? Yaa sokeeye ah oo la tolaystaa,yaase nacab ah oo la collaystaa ? Waa maxay akhlaaqda fiican, maxaase anshax xumo ah ? .

Jawaabaha su’aalahaana waxay xaddidayaan hadafka ay umaddu leedahay,iyo qiyamta ay nolosheeda ku asasho,waxaanna jawaabahaa helaynaa markaan ka jawaabno su’aasha ah : Yaa jawaabaha saxda ah ka bixin kara su’aalahaas ?

Marka diinta Alle loo noqdo, cidda keliya ee su'aalahaas sida saxda ah uga jawaabi karta,runta ma dhaafaanka ahna inooga sheegi karta waa Allaha weyn ee aduunka abuurtay, wax walba oo uunka ka jirana u cilmi leh.

Hadafka uu Alle aadanaha hordhigay ee uu u cadeeyay baana ah midka keliya ee xaqa ah,ee la doonayo in xaqiijintiisa wax kasta loo huro

Hadafka Alle aadenaha u xaddidayna waa in mudada yar ee nolosha aduunka la joogo rillaha Alle la kasbado,si marka aakhiro la tago looga nabadgalo cadaabtiisa, jannadiisana loo helo, taasoo ku imanaysa in isaga keligii loo hogaansamo oo si buuxda la isugu dhiibo. hogaansamidaas oo lagu xaqiijinayo in qiyamta nolosha isaga laga gudoomo, waxkastana sida waxyiga Alle loogu bayaanshay loo qaato.waxa waxyiga lagu sheegona waa labo nooc,qayb ah khabar iyo wax la yidhaahdo arrintaa waa sidaa ama caynkaas ma aha, taana waxay waajib ka dhigaysaa in sida waxyigu u sheegay loo rumeeyo.

Qaybna waa xukun la rido oo la leeyahay sidaa ha la yelo ama caynkaas yaan la samayn,iyaduna waxay keensan in waxa la yidhi ha la sameeyo lala yimaado,wixii la iska reebayna laga fogaado. maxaa yeelay,dhammaan waxa

waxyiga Alle ku soo arooray wixii khabar ahna waa run biyo kama dhibcaana,wixii xukun ahna waa cadaalad dhamayst iran sida Alle qur'aankiisa ugu yidhi = { kalimooyinka rabbigaa waxay ku taam noqdeen runnimo iyo cadaalad }Al- ancaam(15).

Kalimooyinka waxaa loo jeedaa waxyiga Alle ee qur'aan iyo sunnoba leh.

Marka sidaa buuxda nolosha Alle loogu dhiibo,waxaa imanaysa in wax walba isaga laga gudoomo.oo waxaa uun xaq ah wuxuu Alle sheego. wixii khilaafsanna baadhil,wixii uu wanaag iyo khayr ku tilmaamo uun baa wanaag iyo khayr ah, wixii ka soo hadhana waa xumaan iyo shar soocan,wixii uu qiimo u yeelo baa qiimo leh, wixii kalena haba yaraatee qiimo iyo waxtar toona ma leh .Anshaxa iyo akhlaaqda uu ammaano ayaa qurux iyo wanaagba leh,wixii ka horjeedana waa qudhun la doonayo in laga fogaado.Ciddii Alle raalli gelisa ee dariiqiisa raacda ayuun baa sokeeye ah oo tol laga dhiganayaa, ciddii kalese waa cadaw la rabo in lala colloobo.

Arrimahaas oo idil waxay tusayaan sida loo doonayo wax kasta oo nolosha la xidhiidha in Alle looga qaato,ileen warkiisa iyo xukunkiisa uun baa run iyo caddalad ahe ,taas baana ah qaabka xukunka Alle loo qaadanayo ee rillihiisa lagu gaadhayo.

Marka islaam la yidhaahdona macnahaas ayaa loo jeedaa,qofka muslimka ahna waa midka noloshiisa Alle gacanta u geliyay ee yidhaahda: Allahayow waatan noloshaydii adiga ayaan kuu dhiibay ee sidaad doonto ugu tasho,si kasta baan kuugu hoggaansamiye, waxaad doontona i far,waxaad rabtona iga reeb,ee rabbiyow naartaada iga nabad geli, jannadaadana igu mannayso oo iigu deeq.

Marka arrinta qaabkaa loo eego waxaa muuqanaysa sida macnaha xukunku uga ballaadhan yahay maxkamadaha iyo garsoorka ee ay u soo wada hoos gelayaan gebi ahaanba arrimaha nolosha ee leh ictiqaadka,dhaqanka,qiimaynta iyo qiyamta,iyo wax walba oo ka mid ah nolosha fardiga,tan bulshada,iyo maamulka dawladaba,taasoo la rabo in taladooda Alle keligii laga qaato,oo aan weliba cid kale loo oggolaan oo lala siinnin. Markaynu xukunka ka hadlaynona macnahaas ballaadhan baynnu u jeednaa.waana xaq Alle u gaar ah oo aanay cid kale la wadaagin la lana siin Karin.

Caddaynta xaqiiqadaasna waa arrinta uu faah-faahinteeda iyo falan qaynteeda qur'aanku ku faro yaraystay oo ku dheeraaday,balse waa arrinta ugu badan ee qur'aanku ka hadlay.

Hadaba,mar hadii nolosha aadenaha ay ka mid tahay aduunka balaadhan ee Alle abuurtay, taladiisa iyo daryeelkiisana aanay cidi la wadaagin,sinaba suurtogal uma aha in xukunka adoomadiisa cid kale wax ku yeelato ama lala wadaago.

Allena arrintaa aayado badan ayuu ku bayaanshay,ayna ka mid yihiin;

1) {Miyaadan ogayn in Alle keliya leeyahay boqortooyad cirarka iyo arlada}Albqra(107)

2) {Mana jirto cid Alle boqortooyada la wadaagta}Al- furqaan(2)
3) {…Adduun iyo aakhiroba Alle ayaa mahad leh, xukunkana keligii baa u xaq leh.isaga xaggiisa uun baana la idiin celin}Al-qasas-(70}….
4){ Xukunka cid aan Alle ahayn ma lahan.}.Yuusuf(40)
5) { Boqortooyada samooyinka iyo arladaba Alle keligii yay u sugnaatay,taladoo dhanna isagaa loo celiyaa} Al- xadiid (5)

Sida aayadahaas iyo kuwo kale oo badanba tilmaamayaan,boqortooyada iyo talada adduunka oo ay nolosha insaanku ka mid tahay Alle keliya baa leh.
Culimaduna markay arrinta xukunka falanqaynayaan marnaba iskuma khilaafin in xukunka iyo talada nolosha Alle keligii leeyahay oo cid kale aysan faraha la gelin karin.
Sheekh Cali Xasballah {aun} isagoo arrintaa ka hadlayana wuxuu yidhi: [Muslimiintu iskuma khilaafsana in Alle –cassa-wajalla-uu isagu adoomadiisa u talinayo, dabeedna inta xukun u dejiyo ayuu wuxuu doono amri oo ka reebi.iyagana waxaa waajib ku ah inay u hoggaansamaan,iyagoo adheecidaa lagu abaal marinayo,haday caasiyaanna lagu ciqaabayo} Usuul-tashriic-alislaami (979) .

Ilaahnimada iyo rabinimada oo Alle loo waxidona macnahedu waxaa weeye in keligii loo daayo xaq u lahanshaha sharci-u-dejinta nolosha.Sheekh Maxamed Al-shanqidhi {aun} isagoo fasiraya aayada (26)aad ee Kahaf wuxuu yidhi: {Alle xukunka cidi lama wadaagto, taladana isagoo qudha ayaa leh, wuxuu xalaaleeyo uun baa xalaal ah,wuxuu xarrimo uun baana reebban,dhaqan iyo xeerna waa wuxuu isagu jideeyo,xukunna waa kuu isagu rido,macnahaasna aayado badan buu Alle ku caddeeyay ayna ka mid yihiin;
1) {Xukunka Alle keliyaa iska leh wuxuuna amar ku bixiyay inaad keligii u hoggaansant-aan, sharcigiisana raacdaan} Yuusuf (40)
2) {Cid aan Alle ahayn xukunka xaq uma leh anna isagaan talo saartay}.yuusuf (67)
3) (Waxkasta oo aad isku qabataan taladiisa Alle uun baa loo celin oo leh }A-shuura (10)
4) {Hadaba waxaa xukunka iska leh Allaha cid kasta ka sarreeya ee weyn} qaafir (12)
5){Talada iyo xukunka isaga keliya ayaa leh xaggiisa ayuun baa la idiin celin} Qasas (88)
6){War ma xukun jaahiliyo ayay rabaan oo yaa Alle ka xukun wanaagsan }Maa-ida (50)
7) { Warma cid aan Alle ahayn baan xaakin ka dhiganayaa isagoo ah ka soo dejiya kitaabka si kasta loo cad-caddeeyay. } Al-ancaam (114} eeg:{adwaa-ulbayaan 10/292}

Sideedana dawladda islaamka ah ee tawxiidka ku qotonta waxaa gundhig iyo

asaas u ah in talada,xukunka iyo sharci dejintaba Alle keligii la siiyo, cid kalena lala wadaajin .
Sheekh Abul-acla Al-mawduudina {aun} isagoo macnahaas qeexaya wuxuu leeyahay:
{ Asaaska ay aragtida siyaasadeed ee islaamku ku qotonto waxaa weeye in aadanaha wadar iyo waaxidba laga faro-maroojiyo, gacantoodana laga bixiyo dhammaan awoodaha talada iyo sharci dejinta,cid aadane ahna aan marnaba loo oggolaan in talo tood ah inta dad kale lagu dhaqo lagu adheeco,ama intay qaynuun dejiyaan dadku ku adheecaan oo lagu raaco, maxaa wacay sharci dejintu waa xaq Alle u gaar ah,cidnana aysan lalahayn.
Allena qur'aankuu arrintaa ku cadeeyay oo wuxuu yidhi:
1){Waxay odhanayaan talada wax uun ma ku leenahay? waxaad u sheegtaa in talada Alle keligii leeyahay} Aala-cimraan (154)
2){Marnaba ha ku hadlina beenta carrabkiinnu sifaynayo ee ah kan baa xalaal ah iyo kan baa xaaraan ah oo aad Alle ku been abuurataan…} Anaxli(116)
3) {Ciddaan kitaabka Alle soo dejiyay wax ku xukumin kuwaasi gaalo uun weeye}Maa-ida(44)….Aayadahaas waxay si buuxda u cadaynayaan,in Alle keligii uu xukunka leeyahay,sharci dejintana gacantiisa uun loo oggol yahay aadanahana-nebina ha noqdee-aanu gar u lahayn in uu wax amro ama reebo,iyadoo aanu Alle fasax ka haysan .
Nebiguna waxaa uu raacayaa uun xaqa loo wax yoo day:{Waxaan uun ku soconayaa wixii la ii waxyooday} yuunis (15)
Sababta Alle noogu faradyeelay raacida nebigana waa isagoo xukunkii Alle inoo keenay:{Rasuulka waxaan uun idiinku soo dirnay in amarka Alle lagu adheeco}al-nisa(64). Sida aayadahaa ku cadna, tilmaamaha dawladda islaamka ah u gaarka ahi waa :
1) In qof ,qoys,dabaqad,xisbi iyo cid kale aysan xaq u lahayn xukun u dejinta nolosha iyo taladeeda toona, taliyaha dhabta ahna Alle yahay, awoodda kama dambaysta ahna isaga u gaar tahay.cidii isaga ka soo hadhana ay yihiin raaciyad awooddiisa weyn hoos tagta, aanayna u bannaana daw aan ahayn raacidda amarradiisa .
2) Aarrinta sharci-u-dejinta nolosha cid aan Alle ahayn faraha lama geli karto, muslimiintuna gebi ahaantooda uma bannaana inay qaynuun dejiyaan amaba sharciga Alle wax ka bedelaan
3) Sharciga islaamka oo keliya ayaa dawladda islaamka ah gundhig iyo asaas u ah ,si kastoo duruufaha noloshu isu bedelaanna xukuumadaha talada haya xaq uma laha in la adheeco, ilaa ay ka fuliyaan oo dhaqan geliyaan kitaabka Alle,markaas uun buuna xukunkoodu sharci noqon } nadariyatul-islam asiyasiya

Waa arrin si kasta u fudud oo aanay cidi dafiri karin xaqnimada ah in Alle u sharci dejiyo nolosha bulshada iyo tan dawladaba,siduu ugu sharci dejiyo tan

fardiga.
In Alle u xaq leeyahay awooda u sarreysa ee talada iyo sharci dejintuna waa arrin salka ku haysa rumaynta qofka muslimka ahi Alle rumaysan yahay.Sababtoo ah,rumaynta Alle looma jeedo in jiritaankiisa la aqoonsado,ama la iska ogaado inuu samooyinka iyo arlada unkay,ama uunka dhan isagu irsaaqo oo daryeelo. Taasi waa arrin fidhri ah oo aadenaha ku wada abuuran,umana ay baahna in laga dhaadhiciyo,Nebiyadiina -naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-marnaba looma soo diri jirin inay dadka ka raaridaan jiritaankii Alle.
Waxaana qur'aanka ku cad umadihii hore ee baadida ahaa inay wada aqoon sanaayeen jiritaanka Eebe, aayado wadar ahna wuxuu Alle ku sheegay in Carabtii jaahiliga ahayd ay arrinkaa qirsanaayeen,waxaana aayadahaas ka mid ah:
1){Wallee hadaad waydiiso cida iyaga abuurtay waxay odhan Alle uun} sukhruf (87) 2){Walle hadad waraysato cida abuurtay cirarka iyo arlada waxay odhan Alle}Zumar(38) 3){Walle hadaad su'aasho yaa samada biyo idiinka soo dejiyay markay arlada dhimatay
nooleeyay waxay odhan Alle} Cankabut (63 )

Marka waxa doodu ka taaganayd ee inta laga lumay rususha loo soo diri jiray ma ahayn jiritaanka Alle,se arrinka muranku ka taagnaa wuxuu ahaa ilaahnimada Alle ,xataa gaaladu ilaahnimadiisa ma diidanayane waa oggolaayeen , waxayse ka hor jeedeen in ilaahnimada keligii yeesho,oo waxay qabeen in inkasta oo uu ka wada weyn yahay, hadana ay ilaahyo kale ilaahnimada la wadaagaan, intaa waxaa sii dheeraa iyagoo qabay in danta ay ilaahyada kale u caabudaan ay ahayd inay isaga u dhoweeyaan,sida Alle u yidhi :{kuwii Alle sokadiisa ay awliyo –gargaarayaal-ka dhigteen iyagoo leh inay Alle noo dhoweeyaan maahee dan kale uma caabudaynno….}zumar (3) .
Rususha Allena –naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-waxaa loo soo dhiibay farriin ah in Alle qudha yahay ilaaha xaqa ah,iyadoo ilaahnimada cid kale lala wadaajiyana macneheedu yahay inaan Alle ilaahnimada loo aqoonsanayn,taasayna ahayd arrinta ay iyaga iyo madaxda gaalada isku mari la'aayeen,weligeed la isku diidanaa.
Ilaahnimaduna waxay kulansataa afar macnood oo erayga {ilaah} luqada carabiga ku leeyahay kuwaasoo ah= 1) Jeclaan taam ah. 2) Cabsi kaamil ah.
3)Rajayn iyo magan gelid. 4) hoggaansan iyo xukun qaadasho
Afartaa macnoodna way isku xidhan yihiin, waxaana isu haya oo midkasta uu ku xidhan yahay awood,oo ciddii awood leh uun baa khalqiga wax u tari karta oo la jeclaadaa.
Sidoo kale,ciddii awood leh uun baa wax ku dhibi karta oo lag cabsadaa.
Ciddaa awoodda haysata uun baana la magansan waxna laga rajayn.

Isla cidda awoodda leh uun baa xooggeeda loogu hogaansami.
Taa soo macneheedu yahay,Ciddii awood iyo itaal leh ayuun baa ilaah noqon karta.
Xoog iyo awoodlna Alle keliya ayay gacantiisa ku urursan yihiin, ,saa darteed, keligii ayaa ah ilaaha xaqa ah.Cid kasta oo ka soo hadhana,mar hadaysan tabar iyo awoodtoona lahayn, sinabaxaq uma laha hal macne oo ka mid ah macneyaalka ilaahnimada .
Marka macneyaalka ilaahnimada iyagoo wada jira Alle keliya la siiyo ayaa Alle ilaahnimadiisa xaqa ah loo aqoonsaday.Hadiise inta la qaybiyo midkood cid kale la siiyo, waa xaq darro aan sinaba loo aqbali karin.
Gaaladuna intay qaybiyaan bay saddexda macno ee hore asnaamtooda siiyaan, kuwaas oo dadweynaha makastada ah loo tuso inay awood leeyihiin oo wax tari karaan,ayna mudan yihiin in la jeclaado, ama dhib gaysan karaan ayna tahay in laga cabsado,ama musiibada faydi karaan oo ay gar tahay in la magansado.
Samaynta asnaamta iyo beenta ah inay awoodahaas leeyihiin waxaa ka dambeeya oo hindisa madaxda gaalada (mala'a),Sida Alle markuu madaxdaa ka warramayay u lahaa: {..Wuxuuna u sameeya Andaad si uu dadka jidka Alle uga baadiyeeyo..}Zumar (8). Andaadana waxaa loo jeedaa waxa Alle asaag looga dhigo ee lala caabudo.
Sidoo kale,dadweynaha iyo madaxda markay naarta isku dhex eedaynayaan waxa madaxda lagu haysto waxaa ka mid ah,in makrigii ay habeen iyo maalin u dhigayeen ee ay ku amrayeen inay Alle ku kufriyaan oo asaagyo(Andaad) lala caabudo u sameeyaan ay manta meeshan xun dhigtay.sida Alle u yidhi:{Waxay kuwii la gumaystay kuwii islaweyna ku yidhaahdeen balse waxaa na amrayseen baadiyeeyay makrigii aad habeen iyo maalin noo dhigayseen markaad na inaan Alle ku gaalowno oo aan Andaad u yeello…}Saba(32) . Danta ay samaynta asnaamta ka leeyihiinna waxaa weeye inay dareenka dadka ka jeediyaan,oo aanay u arag xaq darrada iyo dulmiga ay ku kacaan, ayna ugu weyn tahay ilaahnimada macneheeda afraad ee ay isa siiyeen.
Marka asnaamta madaxdu sameeyaan qaabkaa loo eego,waxay ula mid yihiin tuubbooyin ay dhiigga dadka ku jaqaan,sidaa darted,waa iyaga cidda ugu dhibka badan ee had iyo goor u taagan difaaca asnaamta been-beenta ah.Ileen waxay dareensan yihiin in hadii saddexda macnee hore inta asnaamta laga qaado Alle la siiyo,inay khasab noqonayso in macnaha afraadna Alle keliya la siinayo,iyaguna meesha ka baxayaan,taasoo macneheedu yahay,inay isku xidhan yihiin jiritaanka asnaamta iyo xukunka nolosha oo ay haystaan.
Isla madaxdaa gaalada ee Alle {mala'a} ku magacaabay ayay ahaayeen kuwii diiday ee hortaagnaa in macnahaa afraad ee ilaahnimada Alle xaq u leeyahay oo keligii la siiyo.

Weliba rusushii Alle-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-dagaal iyo colaadin kala hortegi jiray,si aysan u hirgelinnin oo ugu fulin farriintii loo soo dhiibay ee ahayd in ilaahnimada Alle keligii xaq u leeyahay,oo aan cid kale lala wadaajin karin.

Saa darteed,cidda sheegata inay xukunka iyo sharci-u- dejinta nolosha iyadu u xaq leedahay waa cid ilaahnimo iyo rabinimo sheegatay,qofkii madaxdaas arrinkaa u aqoonsadana waa cid ilaahyo iyo rabiyo ka dhigatay,xaq aysan lahaynna iisay.

In waxa raggaas loo aqoonsaday rabinimo iyo ilaahnimo tahayna waxaa marag u ah:

1) Alle oo inoo sheegay in sababahay u gaaloobeen dadyawgii yuhuuda iyo kirishtaanka ahaa ay ka mid ahayd inay culimadooda iyo baaderiyadoodii rabbiyo ka dhigteen,waana kii yidhii: {Culimadadoodii iyo ruhbaantoodii ayay rabiyaal ka dhigteen} Atawba (31) Rabbinimada lagu eedeeyay inays raggaas siiyeena waa inay ku raaceen sharciyaday u dejiyeen,ee waxyigii Alle khilaafsanaa.Waxaana macnaha aayadan sii caddeeyay xadiiskii Cadiyi Ibn Xaatim –Allaha ka raalli noqdee-markuu lahaa,waxaan u galay rasuulkii Alle-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee – isagoo aayadan akhrinaya, markaa baa waxaan ku idhi:rasuul Allow,waa sidee maannan caabudi jirine?! Kolkaa ayuu igu yidhi:haa waad caabudi jirteen,soo wixii Alle idinka xarrimay idiinma xalaalayn, wuxuu idiin xalaaleeyayna idinkama xarrimin oo kuma aydan raacin? Waana taas caabudista aad caabudeen.Taasoo loo jeedo in rabbinimada la siiyay ay tahay qaynuunka ay u dejiyeen ee dadku ku raaceen.

2) Wuxuu Alle aayad kale ku yidhi:{Balse waxay leeyihiin kuwo ay Alle ilaahnimada la wadaajiyeen kuwaasoo u dejiyay xeer iyo hab-nololeed uusan Alle idmin } Shuura(21).

Erayga (diin) ee aayada ku soo aroorayna waxaa loo jeedaa xukunka iyo qaynuunka umad lagu dhaqo,sida isla macnahaas ugu yimid aayada suurada Yuusuf ku jirta ee (76) markuu Alle lahaa :{Uma habboonayn mana yeeleen – yacni nebi yuusuf-in walaalkii uu ku ciqaabo diintii boqorka} oo loo jeedo qaynuunkii boqorka.Sheekh Maxamed Amiin Al-shinqiidhina(aun), mar uu macnaha aayadan ka hadlaya wuxuu yidhi:{Qofkasta oo raaca sharci aan ahayn kuu Alle soo dejiyay qofkaasi cidda qaynuunkaa dejisay ayuu rabbi ka dhigtay oo Alle ayuu rabbinimada la wadaajiyay} Adwaa (169/7).

Dulucda hadalkuna waa in Alle keliya uu xaq leeyahay xukunka iyo talada nolosha,saa darteed keligii la siiyo,cid kalena aysan faraha la soo geli karin, taasoo la macne ah in ilaahnimada isaga u gaar tahay oo cid kale aanay waxba ku lahayn. .

Xaqiiqadaana in badan baa qur'aanka Alle lagaga warramay,iyadoo qaabka looga hadlay tahayd in aad loogu dheeraaday ka hadlida tilmaamaha

Alle,magacyadiisa wanaagsan iyo afcaashiisa quruxda badan,si kastana loo faah faahiyay,lana caddeeyay in awoodda keligii gacanta ugu jirto,aduunka dhanna maamulkiisa iyo tasarufkiisa hoos yimaadaan,taa soo keenaysa in dhamman macneyaalka ilaahnimada aanay cid kale wax ku lahayn.

## YAA EHEL U AH HOGGAAMINTA NOLOSHA UMMADA?

Qaabka aadenuhu u nool yahay waa uu ka duwan yahay siyaabaha ay xayewaannada u nool yihiin, wuxuuna u dhaqmaa hab bulshoinimo. Saa darteed, waxaa la yidhaahdaa insaanku waa- madaniy u-dhabci- loona jeedo in uusan keli-keli u noolaan karin ee uu bulshaawi yahay. Bulshaduna waxay ka kooban tahay afraad isu tagtay, xidhiidhyo khaas ah ka dhexeeyaan,oo dano isweydaarsaday.Si aanay isugu xad gudbinan dantu ku khasab -tay inay yeeshaan nidaamyo iyo xeerar dadka kala haga nin walbana dawgiisa mariya. Nidaamyadaasuna waxay keensanayaan in qof walba uu bulshada ku yeesho xuquuq ay khasab tahay in loo gudo, isna inuu u doodo xaq u leeyahay.
Isagana waxaa waajib ku noqonaya xuquuq ay dadyawga kala duwan ee bulshadu ku yeelanayaan, lagana doonayo inuu ka soo dhalaalo.

Waxaana umadkasta aan laga waayaynin qaar aan xaqooda ku qancayn,se waxa dadka kale u hanqal taaga,iskuna daya inay sir iyo caadba ku helaan.Waxaanna la waayaynnin oo kale qaar aan oggolayn inay gutaan xuquuqda bulshadu ku leehay.
Taasina waxay bulsho kasta ku laasiminaysaa inay samaysato dad khaas ah oo inta awood gaar ah la siiyo,loo xil saaro ilaalinta iyo hirgelinta nidaam nololeedka bulshadu isku waafaqday in lagu dhaqo. Dadkaas oo ah madaxda bulshada hoggaanka u haysa. Iyaguna waxay ummada ku yeelanayaan xuquuq ay ka mid tahay in la ixtiraamo lana adheeco,waxaana fuulaya waajib ah in awoodda xukun ee loo dhiibtay u adeegsadaan in ay ku fuliyaan nidaamka bulshada u yaalla.Halkaana waxaa ka cad in bulshooyinka aduunka muslimiin iyo gaaloba aysan ka maarmin nidaam kala haga iyo madax leh awood ay nidaamkaas ku fuliso oo ku ilaaliso.
Waxaase bulshooyinka kala sooca,oo muslimiin iyo gaalo u kala saara waa nidaamka nololshay kala aaminsan yihiin ee ay ku kala dhaqmaan.
Nidaamkasta oo umadi ku dhaqantana wuxuu ka turjumayaa oo soo bandhigayaa mabaa--di’da iyo qiyamta ay ummaddaasi rumaysan tahay.
Masalan, gaaladu nolosha aduunka way iska joogaan,mana garanayaan muraadka iyo danta ay u nool yihiin, halkay ka yimaadeen iyo meeshay u socdaantoona uma cadda. waxayna la mid yihiin dad inta indhaha laga xidh-xidhay meel mugdi ah la dhigay looga tegay,aanna aqoon qaabkii saxda ahaa ee loo noolaan lahaa,waxa keliya ee indhahoodu qabteenna waa macmacaanka

aduun ee naftu jeceshahay,ee hadii la helo la raaxaysanayo
Markaa ayuu hadafkooda noqday sidii loo taabi lahaa wax kasta oo naftu jeceshay oo lagu raaxaysto,sida Alle inoogu sheegay markuu lahaa :
{kuwa gaaloobay way iska raaxaysanayaan oo iska cunayaan sida xooluhu wax u cunaan,naarta ayaana hooy u ah.} Maxamed (12).

Qofka ayaanka leh ee bulshadaas ugu qiimaha badanna waa midka ugu badsada helidda waxyaalahaas naftu jeceshahay ee lagu raaxaysto, qofkii raaxadaa waayana wuxuu isu arkaa dadka kalena ugu muuqdaa ruux hoogay oo ayaan darsaday,sida waaqaca nolosha laga arko kuna cad aayadaha Alle kaga warramayay sida gaaladu nolosha u aragto,sida markuu lahaa:{Marka Alle isagoo insaanka ibtilaynaya karaameeyo una nicmeeyowuxuu odhan rabbigay baa i karaameeyay,markase isagoo ibtilaynaya uu risqiga ku cidhiidhiyo wuxuu odhanayaa rabbigay baa i dulleeyay} Alfajri (15,16).

Nidaamka bulshada u yaallana waa mid ku salaysan xaqiijinta hadafkaas,oo wixii raaxo aduun lagu helayo waxaa loo arkaa xalaal dadka u bannaan iyadoon dan iyo muraad laga lahayn cidda ku dhibboonaysa,wixii raaxadaa horjoogsanayana wuxuu agtooda ka yahay xaaraan aan sinaba u bannaanayn,si walboo qurux iyo wanaag u leeyahay.

Allena waa kii yidhi:{Kuwa Alle ku kufriyay nolosha aduunyada ayaa loo qurxiyay} Al-baqra(212) .Si kale hadaan u nidhaahno,nidaamka bulshada gaalada u yaalla waa hawo iyo wax dad indho la’ iska jeclaysteen oo inta la qodobeeyay xeer iyo qaynuun lagu magacaabay,waana nidaam nolosha aadanaha hallaynaya oo holcinaya,si kasta kuwa dejistay ha u sheegtaan inay ka baaraan degeen oo dejiyeen aqoon yahanno iyo indheer garad,waa hawo xeerkeedu yahay la jiifiyaana bannaan.

Waxa keliya ee noloshaa ka jirayana waa nolosha duur-joogta(jungle life),ee ka xoogga badani ka tabarta yar cunayo,cidkale oo ka sarraysa inta loo dacwoodo kala xaq soorina aanu jirin,sida sheekadii libaaxii,dhurwaagii iyo dawacadii inta ugaadhsi tageen helay biciid,cawl iyo sagaaro,kolkaas uu libaaxii yidhi: Dhurwaa ugaadha qaybi,dhurwaagiina yidhi:Biciidka boqorkaa leh,cawshana aniga sagaaradana dawacada. Dabeed, dhurwaagii dharbaaxo labada indhood la gooyay lana dhul dhacay,weliba ili soo dhacday,kolkaasuu dawacadii ku yidhi:Dayooy adigu qaybi.Say te, biciidku waa qadada boqorka,cawshuna waa cashadiisa,sagaaradun inta u dhaxaysa ha ku faakahaysto. Saa libaaxii inta dhaka
faaray buu yidhi: Naa hoogto yaa sidan caddaalada kuu baray?! say te,sayidii waxa isha waraabe ku dhacay baa caddaalada sidan u wanaagsan i bartay.

Waxa maanta dulmi iyo xaqdarro ay gaalo aduunka ka wadaan waxay ula muuqataa wanaag iyo cadaalad tii ugu qiimaha badnayd.Heer waxa Maraykan ku hayo Somaliya, Ciraaq,Afqaanistaan,iyo Falasdhiin uu u arko inay maslaxada

iyo cadaalad ugu muuqato.
Taana wax lala yaabo ma aha,ileen nolosha dhan waa wax lagu hagayo hawo iyo naf jeclaysi,oo innaba caqli iyo cilmi xag Alle ka yimid aan lagu hagayne.
Allena suurada Ancaam aayadaha(135-150) wuxuu kaga warramay xeerarkii ay Carabtii gaalada ahayd isku dhaqi jireen,isagoo ku sheegay inay ahaayeen hawo raacid si kasta caqliga iyo cilmigaba uga fog,taasoo ah tusaale nalugu tusayo in hab-nololeed kasta oo aadanuhu dejisto uu sidaas oo kale hawo ugu dhisan yahay oo u kharriban yahay,
Hadaba,mar hadii nidaamka bulshada gaalada yahay mid ku socda hawadaa tilmaanteeda ugu muhiimsani tahay jaahilnimo iyo dulmi badni,wax lala yaabo ma aha in la isku tunto oo la iscuno, qolo walbana tay ka itaal roon tahay siday doonto ka yeesho oo u dulmiso.
Waxaana laga yaabaa dad badan oo ku indho sarcaaday xadaarada wathaniga ah ee Reer-galbeedka iyo teklinolojiyada ay ku hormareen inay la dhaka faaraan sawirka aan ka bixiyay nolosha jaahiliyada ah ee gaaladoodu ku nool yihiin ee tan xayawaanka koley ka liidata. Meesha wax lala yaabo ma jiraan,se sidaa baa dhab ah,maxaa yeelay,haday teknolojiyada ku hor mareen,xoolihii ay dunida kale ka biliqaysteenna dadkooda ugu raaxeeyeen,maxay tahay nolosha ay maanta dadkoodu ku nool yihiin?!.
Waa nolol ka luntay hadafkii insaankan Alle karaameeyay ee aduunka ballaadhan loo sakhiray loogu talo galay inuu u jihaysto oo gasad iyo yool ka dhigto,kaas oo ah in muddada gaaban ee aadanuhu arlada joogo uu dedaalkiisu u jeediyo siduu rillaha Alle u kasban lahaa, si marka uu aakhiro rabbi hor tago cadaab uga bedbaado ,jannanna u helo.
Taa beddelkeeda,waxaay gaaladu hadaf ka dhigteen siday raaxo adduun iyo mataaceeda uga haqab beeli lahayeen,iyagoo nolosha aakhiro ee abadiga ah aan dan iyo muraadtoona ka lahayn, markaas ayuu qiimo beelay oo xoolaha kolay ka hoos maray.
Allena wuxuu yidhi:{Khalqiga waxaa Alle agtiisa ugu qiimo daran kuwa kufriyay ee aan xaqa rumaynayn}Al-anfaal(55). waxaa kale oo uu yidhi:{Kuwa kufriyay ee ehlu-kitaabka iyo mushrikiinta ah waxay gelayaan naarta jahannamo kuna waaryaan.kuwaasna waa khalqiga kuwa ugu qiimaha daran}Al-bayina(6).
Marka hadalk Alle war kama dambeeyo,kuwaasna sidaa bay Alle agtiisa uga dhinteen ugana qiimo beeleen, xoolahana uga liitaan, mar haday hadafkii loo abuuray seegeen oo ka lumeen,noloshana macne la'aan u joogaan.
Taa caksigeeda,bulshada muslimka ah hadafka ay aduunka u joogto waa u cad yahay, qorshaheeduna wuxuu ku jihaysan yahay marka nolosha aakhiro la tago inay ku guulaysato helista rillaha Alle,si ay cadaabtiisa uga bedbaado, jannadiisana u hesho.
Rillahaasna wuxuu ku imanaya in mudada gaaban ee nolosha aduunka lagu

nagyahay isaga keligii talada gacanta laga saaro, noloshana loo cabiidiyo,isla markaana wuxuu xaq noogu sheego oo keliya xaqnimo loo qaato,wuxuu baadhil ku tilmaamona la wada tuuro,wuxuu xukmiyana hawraarsan la yidhaahdo oo si buuxda loo aqbalo, iyadoo weliba lagu talo gelayo in hawada nafta gebi ahaanteedaba laga xoroobo,talo iyada ka soo fushayna aan dheg loo dhigin.oo la qaadan.

Halkaana waxaa ka cadaanaya farqiga u dhexeeya nolosha bulshada muslimka ah iyo tan kufaarta,oo muslimiintu waxay hoggaanka noloshooda oo dhan u dhiibeen Alle,talada iyo wilahana isagay siiyeen,halka gaaladu ay qabto in nolosheeda ay xor u tahay,sida la qumanaata oo hawadoodu jeclaysatana ay ku soconayaan,Allena wax xukun iyo talo ah oo ay u aqoonsan yihiinna aanay jirin.

Mar hadii muslimiintu hadafkoodu yahay raalli gelinta Alle, dan kalena aysan nolosha ka lahayn,camalksata oo qofka muslimka ahi samaynayo waa mid laga doonayo inuu Alle ugu dhowaado,kana dhigo mid dhanna sharcigiisa lagu salaynayo,dhanna inuu nagu jeclaado looga dan leeyahay.Camalkaasi ganacsi ha noqdo,ama qur'aan akhris,jihad,soon, taakulayn dad dhibban, xaq dhawr waalid, salad, booqasho walaal muslim ah oo buka , ka hortegida fasaadka,farida iyo faafinta wanaagga iwm.

Dadka muslimiinta ahna,maa daama ay rumaysan yihiin oo ku qanacsan yihiin in Alle keligii uu xukunka iyo sharci-u-dejinta nolosha u xaq leeyahay,isla markaana hab-nololeedka uu dejiyay oo keliya rillahiisa lagu gaadhayo,mabda' kasta oo kalena cadaab iyo cadho Alle lagu mudanayo,waxay isku waafaqsan yihiin inay shareecadaa keligeed

raacaan oo ku dhaqmaan.Madaxda muslimiinta ah ee ay talada u dhiibtaanna waxay shaqadoodu ku kooban tahay in awoodda xukun ee loo dhiibay u adeegsadaan hirgelinta sharciga Alle,umadana ku saacidaan inay diinteeda ku dhaqanto oo rabigeed raalli geliso , kana horjoogsadaan u dhowaanshaha waxa cadhada Alle iyo ciqaabtiisa u keenaya.
Maxaa yeelay raggaa muslimiinta madaxda u ah,siiba Amiirka ama Imaamka ee loo yaqaan {khaliifka} muslimiinta,wuxuu wakiil ka yahay rasuulkii Alle-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-,wuxuuna kaga wakiil yahay shaqadiisii ahayd ilaalinta diinta iyo in shareecada nolosha lagu dhaqo oo lagu maamulo.

Madaxda keliya maaha ee bulshada muslimka ahi waa mid iyada dhan ay shareecadu xakamaynayso,markay tillaabo nolosheeda ka mid ah qaadaysana dhawraysa sharciga Alle,waana dhici kartaa in shakhsiyaad ay hawadooda ka xoog badiso oo axkaamta wax ka mid ah khilaafaan,taasina dhal aadane ayaa loo yahay oo dad gefa la waayi mahayo,laakiin, waxaa jira sadex arrimood oo bulshada iyo afraadeedaba u ah xayn-daab xumaanta ka horjoogsada,shareecaduna fartay in la xoojiyo,kuwaasoo ah:

1) Rumaynta Alle iyo maalinta aakhiro,rumayntaasina ma aha oo keliya in caqliyan loogu qanco in Alle sifooyin qur-qurux badan iyo magacyo wan-wanaagsan leeyahay,iyo in aakhiro la isa soo bixinayo,ee waa rumayn qancidaas caqliyeed ay u dheer tahay dareen maanka dadka camira,kana dheregsan:

a) Weynanka Alle,awood badnidiisa,inuu adoonkiisa daalacanayo

b) Waxa abaal ah ee rabi u galay,ee leh abuuris,irsaaqid iyo in khalqiga kale uu ka fadilay c) Xikmad badnidiisa cilmigiisa ballaadhan,iyo shareecadan uu ugu naxariistay si isaga loogu dhahiro,loogu sharfo oo loogaga ilaaliyo in cidhiidhi iyo ayaan darro qabsato.

Arrimahaas oo qofka muslimka ah iyo bulshadaba ku dhalinaya dareen ah : Camalkastoo qofka muslimka ahi sameeyo kana soo maaxa iimaanka inuu yahay maslaxadiisa aduun iyo tiisa aakhiroba.

Sidoo kale,rumaynta aakhiro,wuxuu qofku mu'minka had iyo goor is-hordhigayaa isa soo bixinta,banka xisaabta, quruxda jannada iyo waxa raaxo dhex taalla,cadaabta iyo ayaan darrida dadkeeda haysata, waxaas oo ku dhalinaya cabsi noloshiisa gilgisha una diidda inuu waajibaad dayaco ama shay xaaraan ah ku dhoco,haduu dembi ka dhacana markiiba Alle u noqonaya oo toobad keenaya, isagoo weliba rajo iyo hunguri ka qaba inuu jannadaa qaaliga ah ku guulaysto.Marka iimaanka ammaanan ee la doonayo waa ka qofkiisa ku bixinaya inuu xuduuda sharciga ilaaliyo.

2) Bulshada muslimka ah:Maa daama bulshadu rumaysan tahay in khayrka dhani ku jiro raacida diinta, khilaafidiisana halaag yahay,waxaa xeer u ah inay hor istaagto cidkasta oo hollisa ama isku dayda inay xuduuda shareecada ku tomato,iyadoo adeegsanaysa nidaamyada u yaalla ee xasbada iyo farida wanaaga iyo reebida xumaanta,dadkana xaqa iyo khayrka jeclaysiinaysa,wacdinaysa,tusaysa fool xumada baadhilka.

Waxaas oo dhanna waxay keenayaan qofkasta oo iimaankiisu yara daciifo inuusan ku dhiirran bulshada dhexdeeda inuu xumaan iyo wax Alle ka cadhoodo ku sameeyo,haday dhacdo inuu wax sameeyana uu dhuudhuumasho iyo allow ceeb astur ku sameeyo.

3) Dawladda muslimada ah:Mar haday diintu dawlad la’aan dayacmayso,waxaa muslimiinta waajib looga dhigay inay dawladaa dhisaan,taasoo nolosha ummada sharciga Alle ku maamulaysa, khayrka iyo wanaagana faafinaysa,irridkasta oo lagu gaadhi karana umada u furaysa una fuduaynaysa.Xumaanta iyo sharkana ka hor tegaysa dariiq kasta oo dadka u horseedayana awdaysa,ciddii fal xun ku dhaqaaqdana abaalkeeda marinaysa.

Taasina waxay keenaysa in ummadu khayrka iyo rillaha Alle u kala berataanto,noloshana laga waayo cid xumaan la ban baxda,ama ku dhiirrata inay meel fagaaro ah ku samayso.

Saddexdaa arrimood waxay bulshada muslimka ah ka dhigayayaan mid nadiif

ah,oo qudhunka kufriga ka dhahiran, wasakhda macassidana ka hufan.

Sidaa darteed,marka la isu eego labadaa bulsho ee dunida ka jirta, mida ay shareecadu oggoshay inay talada aduunka qabato waa ta muslimka ah,looguna talo galay inay aduunka hagaajiyaan oo ku islaaxiyaan diinta, taana waxaa ugu wacan iyadoo diinta Alle tahay nidaam caalami ah oo aadenahoo dhan loogu talo galay inay ku hoos noolaadaan , hadhkiisana sacaado iyo liibaanna ku helaan.

Iyadoo hadafkaa laga duulayo nebiga-naxariius iyo nabad gelyo Allaha siiye-markay dawladiisii xididaysatay waa kii madaxdii dunida ee xilligiisii inta warqado u qoray ugu baaqay inay diinta soo galaan oo islaamaan.

Sidaa si la mid ah, waa tii khulafadii ka dambaysa isla farriimahaas oo kale u diri jiray boqorradii sebenkooda,ilaa ugu dambayntii khilaafadii Cusmaaniyada ay islaamka ku fidisay dalal badan oo dunida ka tirsan,muslimiintuna si raaxo leh diintooda loogu dhaqayay gaalada maganta ahna(ahli-dimah) nabad iyo naruuro ku qabeen .

Laakiin maalinkii calankii khilaafadu dhacay hoggaankii dunidana gaalo gacanta u galay ayay bulshooyinkii aduunka isla hoogeen,oo gaal iyo islaamba silac iyo saxariir la mutay. Iyadoo fasaadka akhlaaqeed,burburka iyo kala firxadka qoysaska,dulmiga iyo xaq duudsiga bulshada ka dhextaagan,daroogooyinka iyo maandooriyeyaasha baahsan iyo aafooyin badan ay jiraan waxaa hadana, dunida lagu aafeeyay dagaallo aan tiro lahayn.

Bal ka warraan waxa qarnigii labaatanaad dagaal dunida laga shiday .?!!! Ka soo qaad labadii dagaal ee dunida kii 1aad iyo kii 2aad,imisaa naf ku qudh baxday, imisaase ku dhaawacantay.?! Imisaa hanti lagu burburshay ?! Waxaas oo dhibaato aadane la marshay waxaa uun dano maan la'aan ku dhisan ku watay kooxo faro ku tiris ah oo hawo aduun oo aan laga dhergayn hor ordayso.

Imisaa dagaallo kuwaa ka dambeeyay arlada lagu gubay?! Meeqaa dadyaw iska deggan oo nabad qaba hunguri xumo darteed dab loogu shiday?! Waxaas oo belaayo ah waxaa sabab u ah iyadoo ay hoggaanka qabatay umad cawaan ah oo xadaaradadeedu jaahiliya heerkeedii ugu hooseeyay ka gaadhay,ahna Reer-Yurubka dunida ka amar ku taagleeya.

Gaaladaa damaca waalan dulmigooda ugu badanna dadyawga muslimiinta ah ayuu ku dhacaa,siiba markay daciifto ama aysanba jirin khilaafo islaam oo dadkeeda difaacda.

Oo taniyo dhamaadkii qarnigii 19aad,ahaana waqtigii ay daciiftay khilaafadii islaamka ee Cusmaaniyada iyo markii la burburiyayba,dhibabka iyo dulmiyada aduunka ugu badan muslimiinta ayaa lala beegsanayay oo ku dhacayeen,waxaanna tusaale kuugu filan waxa maanta ka taagan Somaliya, Ciraaq, Afqaanistaa, Shiishaaan, Falasdhiin iyo meelo kale oo aan tiro lahayn,se dhiiga qofka muslimka ah maanta waa looma ooyaan,aan bisad bakhtiday qiimo

dhaamin,waana iyaga waxa dacallada dunida la xasuuqo ee la gumaado.
Sidaa awgeed,si nolosha aadenaha loo bedbaadiyo waa in muslimiinta oo cida keliya ee shareecadu tilmaantay inay aammin yihiin,ehelna u yihiin inay hoggaanka bashariyada qabtaan,iyadoo culimadoodu yihiin cidda sida gaarka ah kalsoonida loogu qabo ee la doonayo inay muslimiinta hoggaanshaan.

## XUKUNKA GAALADA IYO WAXA SHARCIGU KA QABO

Gaaladu ama kufaartu waa dadka aan diinta islaamka rumaysnayn ee kitaabka uu Alle nebi Maxamed-naxariis iyo nabadgelyo Allaha siiyee -u soo dhiibay oggolayn,ha noqdeen Yuhuuda,Kirishtaanka ama cawaanta kale ee aduunka ka jira.
Shareecada Allena way xarrintay,sinabana uma oggola in dadyawgaas gaalada ah talada muslimiinta iyo xukunkoodaba qabtaan, taasina waxaa u sabab ah arrimaha soo socda:
1) Dadka xukunka iyo awoodda talada ay gacanta ugu jirtaayi waxay hirgeliyaan oo nolosha ku xukumaan mabda'a ay rumaysan oo keliya,marka hadii muslimiintu xukunka gaalada hoos tagaan,sinaba kufaartaa loogama sugayo inay muslimiinta diintooda ku maamulaan,se waxay ku khasbayaan ku dhaqmida xukunkooda kufriga ah, inta ay diintooda uga oggolaadaana waa inta ay u arkaan inaysan kufrigooda ah halis ku ahayn.
(2) Muslimiinta oo gaalada u oggolaata inay hawadooda iyo qawaaniintooda kufriga ah ku xukumaan waxay la macno tahay iyagoo cid aan Alle ahayn u aqoonsada ilaahnimo iyo rabinnimo,taasina waxay si toos ah u burburinaysaa tiirka ugu weyn ee diintooda, kaasoo ah inaysan ilaahnimada cid aan Alle ahayn siin Karin..
3) Nolosha bulshadu waxay la mid tahay gaadhi rakaab lagu wado, ragga caynaanka u hayana waxay joogaan halkii wadaha gaadhiga.Allena qur'ankiisa sharafta badan wuxuu ku sheegay in gaaladu yihiin duul aan dhug iyo dhaayo toona lahayn,xoolahana aan waxba dhaamin,weliba ka sii liita . Hadaba,wax iyaguba dhimirka naafo ka ah oo weliba dhimaad ah, iyaga laftoodana in la hago u baahan, sidee loogu aammini karaa in dad Alle jecelyahay ay hoggaan u qabtaan?! Soo haadaan ka tuuri mahayaan oo halagi mahayaan?!
( 4) Sida qur'aanka Alle ku cad,mar walba oo ay umadi hilinka toosan ee Alle jideeyay ka weecato,waxaa loo soo bixin jiray rasuul, si dadka qoomkaas talada u haya inta xilka looga qaado loo wada badbaadsho iyaga madaxda ah iyo qoomkaba, rasuulkaana wuxuu dadkiisa ku odhan jiray: Tolkayow ciqaabta Alle iska jira oo aniga i adheeca, madaxda tolkana wuxuu uga digi jiray inay umada halaag u horkicin ee isaga soo raacaan, dadwey- -nahana wuxuu kula dardaarmi

jiray inaysan adheecinkuwa cadhada Alle u horkacaya .
(5) Marka nusuusta qur'aanka loo kuur galo waxaa ku cad in arrinta madaxda gaalada uu aad u falanqeeyay oo u lafo guray,isagoo ku sifeeyay oo siiyay magacyo badan oo ka turjumaya dhaqan xumadooda,iyagoo lagu magacaabay inay yihiin mujrimiin dhagar qabeyaal ah,hoggaanka kufriga,mufsidiin nolosha xididdoa siiba,daalimiin xaqdarro ku taagan,wuxuuna ku magacaabay "dhaaquutyo" macnihiisu yahay "kuwo xadgudubkoodu xad dhaafay",maxaa yeelay,iyagoo loo uumay inay Alle adoomo u noqdaan oo u hogaansamaan ayay amarkiisii ku gacan sayreen, inay ka talo qaataanna diideen, intaa kuma ekaane addoomadii kale ayay ka horjoogsadeen inay rabigood caabudaan oo ka talo qaataan, kuna amreen inay iyaga laftooda ilaahyo iyo rabiyo ka dhigtaan oo caabudaan,taa soo ah inay iyaga ka sharci qaataan,oo hawadooda ugu taliyaan.
Allena wuxuu inoo sheegay sababta arrimahooda sidaa ballaadhan loogu faahfaashay inay tahay iyadoo la doonayo inay dadka u caddaato dariiqada iyo tubta ay ku socdaan dadkaas mujrimiinta ah, maxaa yeelay, belaayo iyaga ka daran adduunka kama jirto. Allena waa kii lahaa:{Sidaas oo kale ayaan aayadaha u kala dhig-dhignaa si ay u cadaato dariiqada mujirimiinta} ancaam (55).
Waxaa kaloo Alle sheegay inay iyagaas laftooda yihiin kuwa ugu daran ee diinta Alle hortaagan,rusuhiisiina ka horjoogsaday inay dhambaalkii loo soo dhiibay adoomada Alle gaadhsiiyaan.Waana iyagaa waxa arlada ka wada fasaad,fisqi,gumaysi, ka madax taagida xaqa,yasida mu'miniinta,dacaayadaynta diinta iyo dadka raacay,iyo iyagoo tabo iyo xeelado badan oo kala duduwan dadka diinta ugala dirira,sidaa darteed,buu Alle waajib ka dhigay in mujrimiintaa nolosha gubaya aan loo oggolaan inay talo qabtaan,oo muslimiinta dhaafe, xataa bulshooyinka kale inay hoggaaka u qabtaan Alle waa xarrimay
(6) Hadii nin dal madax ka ahi guddoomiye gobol cayimo, oo inta nin kale ku gedoodo gobolkii qabsado,si buuxdana u caddaysto in madaxweynaha,dawladiisa iyo qaynuunkiisa uusan aqoonsanayn,maxaa ninkaa madaxda ah la gudboon.? Soo inta baarlamaanka kulmiyo la soo saari maayo baaq ah in ninkaasi budhcad yahay, xukunkiisu sharci darro yahay.? Dadweynaha gobolkana soo lagu amri mahayo inaysan ninkaa raacin.?!
Sidaas waxaan ka duwanayn, kase foolxun dhaaquutyada xaqa Alle inkiray ee iyagoon isaga rusqo iyo fasax ka haysan khalqigiisa cabiidsaday, weliba iyagoo u adeegsaday awood iyo qori caaradiis iyo khiyaamooyin kala duduwan, dadka u diiday inay rabbigood caabudaan oo sharcigiisa dhib la'aan ugu dhaqmaan,se inta siday rabaan ugu tashadaan ayay sharciyo u dejistaan oo hawadooda ku xukumaan.
sidaa darteed,madaxda gaaladu waxay Alle agtiisa ka yihiin budhcad, xukunkoodana waa mid sharci darro ku dhisan, cidii xukunkooda sharcinimo u

aqoonsatana ciqaab aad u daran bay Alle agtiisa ka mudanaysaa..
(7) Alle aayado badan ayuu ku bayaanshay in madaxda gaalada ee dhaaquutyada ah ay dadkweynaha raaca ee ka xukun qaata u horseedayaan silac adduun iyo saxariir aakhiro, waxaana aayadahaas ka mid ah : a) {Bal la yaab kuwa nimcadii Alle gaalnimo ka doortay dadkoodiina daarta halaagga dejiyay taasoo ah jahannama oo ay geli doonaan,meel la degana iyadaa ugu xun}Ibra(28)
Nimcada Alle ee aayadu sheegaysana waxaa loo jeedaa iimaanka.
b) {Fircoonna tolkii wuu lumiyay,mana uus hanuuninnin} Dhaha (79)
c) { Taladii Fircoon ayay raaceen iyadoo amarkii Fircoon uusan ahayn mid hagaagsan, maalinta qiyaamana tolkii ayuu horkacayaa uuna naarta ku arooriyay}Huud (97,98) Fircoonka arrinkiisa qur’aanka looga hadlana wuxuu uun tusaale u yahay dhaaquutyada adduunka waqti kasta ha joogeen, meeshay doonaanna ha ku noolaadeene.
d) {Maalinta qiyaamo dadku siday u dhan yihiin Alle ayay horjoogsanayaan oo kuwii la gumaysan jiray ay kuwii islaweynaa ku yidhaahdaan annagu idinka ayaannu raaciyad idiin ahayn,ee maanta cadaabta Alle wax uun ma nagaga qaybaysaan.? waxay ku yidhaahdeen haduu Alle na hanuunin lahaa waan idin hanuunin lahayn arrinkeennuna hadaan argagaxno iyo hadaan adkaysannoba waa isku mid.meel aynnu u baxsanno ma jirto} Ibrahi (21).Qolada la gumaysan jiray iyo kuwa islaweyn ee aayadu sheegayso waa kuwii raaciyadda ahaa iyo madaxdoodii kufriga ku xukumi jiray.
e) {Dadka uga warran marka gaaladu naarta ku dhex doodayaan,oo kuwii ducafada ahaa ay kuwii islawaynaaday ku odhanayaan :Annagu idinkaan raaciyad idiin ahayne wax yarna kolay tahay naarta ma nagaga qaybaysaan ? Waxayse ku odhanayaan waynnuba ku wada jirnaaye !!Alle ayaana adoomadiisa kala xukmiyay}.Qaafir (48).Dacfiga aayadu sheegtayna ma aha in dadweynaha la xukumay ay madaxdooda ka jirmi yaraayeen, se waxaa loo jeedaa inta hawadoodu cabiidisay oo xakamasay ayaa waxaa adoonsaday oo dullaystay kuwii xukumay,dullaysigaa iyo gumaysigaa oo ku yimid in madaxdu ay dadweynaha hawadooda sharci uga dhigaan,iyagoona u diiday inay sharciga Alle raacaan
f) {Maalinta wejiyada gaalada naarta lagu rog-rogayo iyagoo odhanaya:shallaytadaannee maxaan Alle u adheeci waynay oo rasuulkiisa u raaci waynay, waxayna yidhaadeen rabigayaw waxaan adheecnay oo ka talo qaadannay ugaasyadannadii iyo madaxdaannadii markaas bay na marin habaabsheen ee rabbiyow cadaabta u laalaab…}Axzaab (67,68). Aayadahaas iyo kuwo kale oo badanba waxay ina tusayaan waxa aakhiro kala haysta madaxdii gaalada iyo kuwii raaciyada u ahaa ee inta caqliga ka xadeen ay gumaysan jireen, ileen waa la guumaystay oo la dullaysta,mar hadii rag

qayrkood ah oo aan dheef u hayn dhibna ka haynay inta hawadooda sharci uga dhigeen sida xoolaha maamusheen.
(8) Sababta ugu weyn ee calanka jihaadka loo taagay waa in la burburiyo,aduunkana laga tirtiro madaxda kufriga ee inta dadweynaha qafaashay inay rabbigood caabudaan oo sharcigiisa raacaan xoogga kaga hortaan.Wuxuuna Alle mu'miniinta amar buuxa ku siiyay inay madaxda gaalada la dagaallamaan, ilaa carro edeg dhamideed dhaaquut lagaga diimo,oo la waayo cid ku dhiirrata inay adoomada Alle diinta ka hallayso,jihaadkana lagu wado jeer xukunka oo dhan Alle la siiyo,si xarrago leh oo cabsi la'aan ahna loo caabudo oo loo raalli gelyo, {anfaal-39}. Marka nusuustaa iyo kuwo kale oo badan la eego waxaa cad in shareecada Alle aysan muslimiinta u oggolanyn inay xukun gaalo aqbalaan

## XUKUNKA CILMAANIYIINTA IYO WAXA SHARCIGU KA QABO

Waxaan soo caddaynnay in aanay diinta Alle oggolayn in muslimiintu xukun gaalo ku hoos noolaadaan,halkanna waxaan ku lafo guraynnaa waxa sharcigu ka qabo in cilmaaniyiintu ama diin-laaweyaashu talada muslimiinta qabtaan. .
Sideedaba halbeega lagu qiimeeyo in xukun jira uu islaam yahay iyo inuu kufri yahay waa hadba sida qolada xukunka haysaayi u dhaqan geliyaan sharciga Alle,oo hadii taliskaasi isagoo rumaysan uu diinta islaamka keliya nolosha ku maamulo,xukunkaasi waa islaam,dadkiisuna Alle agtiisa sharaf iyo ammaan bay ku leeyihiin, hadii kalese waa xukun kufri ah,si kasta dadka hoggaanka haya ha ula baxeen magacyada muslimiinta ee Cali,Axmed iwm. Haday dastuurka ku qurxistaan qodob qoraya in diinta dalku islaam yahayna waxba kama beddelayso xaqiiqada ah in xukunku kufri yahay,kuwa xukumana gaaloo yihiin. Sababtoo ah,diinta ay meesha ku qorteen ma aha tii Alle soo dejiyay ee uu adoomadiisa uga raalli noqday,se waa diin la macne ah kirishtaanka Reer-Yurubka.

Mar hadii xukunka nolosha aan Alle waxba looga oggolayn, axkaamta shareecadana aan maamuulka dawladda la dhex keeni karin,afbuuxana lagu leeyahay:[ Annagaa hawadeenna isku xukumaynna,qofkii masjidka iska tegaya,oo halkaa Alle ku tuugayana waxba loo raacan mayo,laakiin diinta intaa ka badan inay nolosha soo faro geliso waa ka mamnuuc].Taana macneheedu waa in islaamkii Alle soo dejiyay aan la aqoonsana.

Kol hadaysan,gaalada iyo daba-dhilifyadu sinaba oggolayn in  diinta rabbi nolosha lagu dhaqo,waxba macne kuma fadhido qodobka ay dastuurka ku qorteen,ujeeddada laga leeyahayn ay tahay uun in ma kasta caqliga looga xado.

Allena ma oggola mana aqbalayo wax aan ahayn islaamkii uu soo dejiyay ee addoomada

uga raali noqday,mana aqooonsana nidaamka kufriga ah ee inta gaaladu magac islaam siisay loogu talo galay in dadka lagu siro.Saa awgeed, cilmaaniyiinta iyo gaalada soo wakiilatay xagga kufriga ma kala sokeeyaan. Balse iyagaa ka xun oo waa murtadiin shareecadu u dejisay axkaam ka qallafsan kuwa la marsho gaalada kufrigoodu cad yahay.

Si ay hadaba innoogu caddaato dhabnimada hadalkaana,aynu is-hordhigno siday raggaas ku soo baxeen oo talada ku qabteen,amaba umada loo dul keenay.

Waa la wada  soconnaa in gaalada Reer-galbeedka ahi  horraantii qarnigii tegey ay dunida muslimka wada qabsadeen welina haystaan,oo gumaystaan.wax la sugina ma aha jnay ka

dulqaadaan gumaysiga,jeer la helo quwad islaam oo gaalada qori caaraddii ku kicisa.

Sababaha ugu waaweyn ee gaaladaasi sida gaarka ah ahmiyada ugu siinayaan dunida muslimka ah,una doonayaan inay u sii gumaystaan, waa sadeex arrimood oo kala ah:

1) Iyadoo Alle dhulalkooda dhex dhigay kheyraadka ugu badan ee dunidu ku tiirsan tahay,siiba wershedaha iyo teknolojiyada casriga ah oo tamarta ah.

2) Iyadoo dhulalka muslimiintu u yihiin suuqyada ugu muhiimsan ee ay gaaladu ku khaarijiyaan badeecooyinka ay wershedahooda  soo saaraan.

3) Iyagoo ka dheregsan  in dunida ay xoogga ku  gumaystaan  aysan dhambaal khayreed u haynin,se waxayba la socdaan in xadaaradoodu tahay mid gumaysi,dulmi iyo xaqdarro ku dhisan, shucuubta caalamkuna karahsadeen.

Taa caksigeedana waxaa u muuqata in muslimiintu yihiin dad xambaarsan dhambaal (risaalo) aadenaha sacaado iyo liibaan u horseedaysa.Waxay hubaan hadii ay soo baxdo quwad islaamka si dhab ah u matalaysa inay waayayaan amar ku taaglaynta ay adduunka ku hayaan,khayraad badan oo ay dunida ka boobi jireen,suuqyadii ay badeecooyinkooda ku soo harqin jireen,iyo weliba iyagoo dareensan inuu halis gelayo jiritaankooda dulmiga ku dhisan,iyo iyagoo ka dheregsan in la laali doono xadaaradooda wathaniga ah.

Sidaad arteed,waxaa ka  go'an inaysan muslimiintu sinaba madaxa kor ugula kicin,weliba ku talo galeen inay heymanadoodaa u daa-imto,haday ciidamadooda dalalka muslimiinta kala baxaanna, in dxukunkoodu daaha gedaashiisa  ka sii socdo.

Taasina waxay ku suurto gelaysaa inay dhulka muslimiimnta  ka baxaan oo keliya kolkay hubsadaan inay dhisteen rag ay ku kalsoon yihiin oo inta xukunka

u dhiibtaan si buuxda  wakiil ugu  noqda, kuwaas oo ah dadka loo yaqaan cilmaaniyiinta. .

 Erayga [cilmaaniya]na asalkiisu waa carabi macnihiisu yahay nolol cilmi ku dhisan, laakiin,marka dib loogu noqdo erayga laatiiniga ah ee laga soo turjumay oo ah:{secular}, waxaa muuqanaysa inaysan wax xidhiidh ahba ka dhexaynin macnihiisii hore iyo ka dambe ee loo adeegsaday.Oo erayga {secular} macnihiisu waa diin  la’aan.

Maa daama ay gaaladu ku talo galeen in muslimiinta looga dhaarto inay diintooda isku xukumaan,lana rabay in la dul dhigo xukunka kufriga ah ee ay dalalkooda ka soo waarideen, loona yaqaanno nidaamka diin la'aanta (secular),nuxurkiisuna yahay:[ in

aadenuhu keligii iska leeyahay xukunk arlada, Allena aan waba loogaaqoonsanayn]..

waxay gaaladu ka cabsadeen in  muslimiintu ka biyo diidaan oo ay liqi waayaan magaca:

(diin la'aan),hadaba si aysan u didin oo caqliga looga xado ayaa diin la'aantii loo qurxiyay

looguna beddelay erayga cilmaaniya.Kaas oo  dadka  diintooda ugu fasaxaya gudashada wixii aan khatarta ku ahayn nidaamkooda kufriga ah.

  Nimanka nidaamka diin la'aanta nolosha ku xukumaya ee loo yaqaan (cilmaaniyiin)ta  weeye nimaka gaaladu muslimiinta dul dhigeen. Habka xukunka loogu dhiibayna wuxuu ahaa sidatan soo socota:

Maa daama gaaladu burburiyeen khilaafadii islaamka,ayna si buuxda u taabeen dunidii muslimka ahayd,waxay qaadeen tillaabooyin ay ugu talo galeen in xukun islaam oo dambe aanu dhulka muslimiinta ka hirgelin, tillaabooyinkaas oo ahaa:

1) Ugu horrayntiiba waxay baabi’iyeen oo xididdada u siibeen quwadihii hubaysnaa ee jihaadka kala hortagay.

2) Waxay irdaha u laabeen maxkamadihii sharciga ahaa ee nolosha ummada ilaalinaysay.

3) Waxay si toos ah iyo si dadbanba u xidheen xaruumihii diinta lagu baran jiray.

4) Taa beddelkeeda, waxay fureen dugsiyo lagu barto dhaqammadoodii wathaniga ahaa, luqooyinkoodii, xeerarkoodii iyo taariikhahoodii.Dugsiyadaas oo soo saaray jiilal cusub oo innaba aanay diintoodii waxba uga baxsanayn.

Intaa waxaa dheeraa iyadoo tiro aan yarayn loo diray dhulalka kufaarta,si dhaqanka gaalada loogu soo ababiyo,loona soo celiyo iyagoo diintoodii ka jaahil ah,wax qiimayn iyo qadarin  ahna aan u haynnnin,dadkoodiina iskala weyn.

 Kromer oo ka mid ahaa gumeystayaashii ugu khayrka darraa, uguna khayaano badnaa ee Masar dhalan rogay,mar uu ka hadlayay ragga la rabo in xukunka

dalkaas loo diyaarsho wuxuu yidhi:{Waayadan muslimka aan dhaqanka iyo akhlaaqda Reer-Yurubka qaadan ma awoodo inuu Masar xukumo,sidaa darted,wasiirrada mustaqbalka waa inay noqdaan Masaarida lagu soo barbaarshay tarbiyada Reer Yurubka}. eeg (the modern egybtp.229/3)

Sidoo kale, mar 1906dii ay hey'adaha dhulalka muslimiinta kirishtaanka ku faafiya shir ku qabteen Qudus, ayaa waxaa si buuxda loogu soo bandhigay hawlihii iyo dedaalladii ay soo qabteen baadariyadii shaqooyinkaa waday. Wararkoodiina wuxuu isugu soo biyo shubtay calaacal ah inaysan jirin amaba ay yar tahay wax u soo xero galay oo ay kirishta--ameeyaan,waxaase shirkii gunaanaday oo hambalyo iyo bogaadin ka soo jeediyay shir guddomiyihii oo ahaa baadari asalkiisu yuhuudi ahaa lana odhan jiray Zuweymar. Wuxuuna wufuudii kaga farxiyay oo ugu bogaadiyay in shaqadii wadamada Masiixiyiinta ahi u soo dirsadeen ay sidii ugu haboonayd uga soo dhalaaleen.Isagoo u sheegay in danta

. Isagoo u sheegay in dadka calaacalaya aysan fahmin dantii loo soo diray,wuxuuna u loo soo diray aysan ahayn inay muslimiinta islaamka ka saaraan oo kirishtaan ka dhigaan, taasi wuxuu ku sheegay inayba sharfid tahay,ee waxaa la doonayaa buu yidhi in islaamkana laga bixiyo kirishtaana aan la gelin,se ay noqdaan dad meel dhexe heehaabanaya,aanna Alle wax xidhiidh ah la lahayn,hankooduna dhaafsanayn calool la buuxsho iyo shahwo la baadi goobo oo laga haqab beelo.

Dhabtiina gaaladu dadkay rabeen way soo saareen oo tarbiyeeysteen,iyagaas ay sidaas kalsoonida buuxda ugu qabeen bayna umadii talada ugu dhiibeen.

Iyagoo weliba u diyaarshay dhaqaalihi ay ku hawl geli lahaayeen,dastuurkii kufriga ahaa ee ay dalalka ku dhaqi lahaayeen,ciidankii ku ilaalin lahaa iyo la taliyeyaal haga intaba. Waxaana si qayaxan loogu sheegay inay ragga xukunka u dhiibtay wakiillo u yihiin,taana waxaa marag cad u sii ah in dalkasta maamulkiisa loo dhiibay isla raggii xilligay dhulalkaa gumaysanayeen iyaga ka hoos shaqaynayay,intii ka dambaysayna rag aan u shaabbadaysnayn xukun kama soo ag-dhowaan.

Markii talada lagu wareejiyayna waxaa amar buuxa lagu siiyay, in iyadoo tabo kala duduwan oo dahsoon la adeegsanayo nolosha ummada si kasta looga fogeeyo oo loogala diriro diinta islaamka,dadka dacwada ku hawllanna si naxariis darro ah loo cidhib tiro.

Waxaana la faray in dadweynaha dhegweynta ah riwaayad loo dhigo, laguna maaweeliyo inay xoroobeen,gaaladii gumeysan jirtayna, kadib markii halgan qaxar leh lala galayay baxeen,weliba aysan soo noqon doonin,iyadoo loo sameeyay maalmo la dabbaal dego, laguna magacaabay maalmintii xorriyada,maalintii gumaysiga laga madax bannaanaaday.

Hadaba diin la'aanta qawsaarrada gaalada waxaa caddaynaya aaydo

badan,sida:
1) {Cidaan kitaabka Alle soo dejiyay wax ku xukumin,kuwaasi iyaga uun baa gaalo ah } (
2) {Cidii aan kitaabka Alle soo dejiyay wax ku xukumin kuwaasi iyaga uun baa daalimiin
3) {Cidii aan kitaabka Alle soo dejiyay wax ku xukumin kuwaas iyaga uun baa faasiqiinah}.Al-maa-ida aayadah(44,45,47). Erayga (faasiqiin)na waxaa loo jeedaa inay xuduuda Alle ka baxeen,wuxuu ku amray iyo wuxuu ka reebayna ay ku gacan sayreen.Erayga (daalimiin)na wuxuu muujinayaa in ka bixidii dhaacada Alle ay u dheer tahay iyagoo xaqii Alle ku tuntay,naftooda cadho Alle u horseeday iyo adoomadii Alle oo ay cadadho Alle iyo ciqaabba u horkeceen.kullina ah dulmi.
Erayga (kaafiriin)na wuxuu tusayaa in markay xukunka Alle diideen ay awoodiisa,xaqiisa iyo jiritaankiisaba duugeen, ulana dhaqmeen sidii isagoon jirin. saddexdubana waxay wada tilmaamayaan hal camal oo ragga xukunka haya ku kaceen, ahna inay kitaabka Alle daaqadada ka xooreen oo aysan nolosha ku xukumin.Ciddii sidaa yeeshana xukunnadaas faasiqnima,daalimnima iyo kaafirnimad ayaa qoorta u suran oo dusha ka saaran.
4) { Kuwa markuu hanuunku u cadaaday kadib gaalnimada ku noqday, kuwaas shaydaan baa falkaa u qurxiyay oo hididiilo geliyay,sabatoo ah gaaladii xaqa necbayd bay ku yidhaahdeen talada qaar baan idinku adheecaynaa oo idinku raacaynaa Allena waa ogyahay waxyaalaha u qarsoon} Maxamed (25,26). Sheekh Maxamed Amiin Al- shanqiidhina (aun) isagoo aayadan ka hadlaya wuxuu yidhi: {Ogow qofkasta oo muslim ah oo sebenka maanta ah jooga inay waajib ku tahay inuu ka fekero oo dhuuxo macnaha aayadaha suurada Maxamed.iyo inuu si buuxda uga taxadaro goodiga culus ee ay xambaarsan tahay,maxaa wacay, in badan oo ka mid ah dadka muslimiinta ku abtirsada shaki la'aan waxay soo gelayaan dadka aayadani sida ba'an ugu hanjabayso,sababtoo ah,dhammaan gaalada Reer-glbeed iyo Reer-bariba way neceb yihiin xaqa uu Alle rasuulkiisa-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- ku soo dejiyay oo qur'aanka ah,iyo waxa rasuulku-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- ku bayaanshay. marka qofkasta oo gaalada diinta Alle neceb ku yidhaahda;taladiina qaar baan idinku raacaynaa,wuxuu soo gelayaa dadka aayadu u goodinayso,waxaana ka sii daran kuwa ku yidhaahda waxksta waan idinku raacaynaa,sida kuwa ku dhaqma qawaaniinta gaaladu dejisay,iyagoo ku adheecaya kuwa diinta Alle neceb, waana hubaal in kuwaasi ay mala-iktu nafta ka qaadayso iyagoo wejiga iyo dabada ka gaaracaya, ayna raaceen wax Alle cadho geliyay oo rillihiisa naceen, uuna acmaashooda wax kama jiraan ka dhigayo.}adwaa-ul bayaan.( Nimankaa gaalada wakiilka u ahna si buuxday u raacsan yihiin kuwaa xukunka dhiibtay..

5):{War hoy dadka xaqa rumeeyow Yuhuuda iyo Nasaarada ha ka dhigannina tol iyo xigto,iyaga ayaa isxiga oo qaarba qaarka kale sokeeye u yihiine,kiinna weli iyo tol ka dhigtana iyaga ayuun buu ka mid yahay}.Maa-ida (51).Macnaha aayaduna waa cad yahay

6):{war hoy kuwa xaqa rumeeyay kuwa diintiinna jees-jees iyo ciyaar ka dhigtay ee ah kuwii kitaabka la siiyay marna ha ka dhigannina sokeeye iyo xigto,Allena ciqqabtiisa iska jira hadaad mu’miniin tihiin}.Maa-ida (57).

7):{War hoy dadka xaqa rumeeyow marna iyadoo mu'miniinta idiin joogaan gaalada xigto iyo sokeeye ha ka dhigannina…}Al-nisa(144).

Sida nusuustaa faraha badan iyo kuwo kaleba ku cad ciddii kitaabka Alle wax aan ahayn wax ku xukunta,ama gaalada yuhuuda iyo kirishtada ah tolaysata,oo inta kalsoonidiisa siiya,la dagaallanka mu'miniinta ku garabsada,ama kalgacalo iyo niyad wanaag siiya,kuwaasi waa kufaar cad oo innaba arrinkoodu aanu mugdi ku jirin.

Cilmaaniyiinta nala dul dhigayna waxay si aan kala hambaysi lahayn tol,sokeeye iyo xigto isugu yihiin gaalada Yuhuuda iyo Kirishtaanka ee xukunka u dhiibtay.

Waana iyaga dadka ay nusuustaa badan ka hadlayso oo xukunkeedu fuulayo.

Laakiin,si gaalada Yurubka iyo adoontooduba u qariyaan xaqiiqooyinkaas, waxay adeeg--sadaan wadaado u adeega ama ay ku shaqaystaan,ha noqdeen kuwo qafladu inta badatay aan dareensanayn inay gaalada u khidmaynayaan,ama ha noqdeen qaar ka dheregsan inay lunsan yihiin,se mansab iyo aduunyo jacayl ay ka indho tireen foolxumooyinka ay ku kacayaan.Kuwaas oo u taagan difaacidda nidaamyadaa kufriga ah,luqunta nusuustana laalaaba oo leeleexiya, si ay ugu daliilsadaan macneyaal baadhil ah oo aanay nusuustaasi tusaynnin,aanna laga fahmaynnin,iyagoo sidaa u yeelaya inay xujo iyo qiil u helaan dhaqannadaa kufriga ah ee raggaas ku kaceen,dadka caamada ahna u hoosaasiyaan, oo uga dhaadhacshaan in aanay belo jirin,ragga xukunka u hayana aysan diinta ka saaraynin inay shareecada nolosha ka fogeeyeen,kol haday dadka la dhasheen, dalkana u dhasheen,diintana nala sheegtaan.

Laakiin, haday raggani iyagoo raalli ah,si calool fayoobi ku jirtana gaalada xigto,sokeeye iyo awliyoba uga dhigteen,iyagoo amarka gaaladaas fulinayana diintii Alle tuureen, noloshana ka fogeeyeen, culimadii diinta faafinaysayna si kastoo qaab daran ula dagaaleen, maxay tahay waxa diinta Alle loogu nanabayo oo inay haystaan oo dadkeedii yihiin qiil iyo xujo loogu raadinayo.?!!! Garannay, oo kuwa madaxda ah ma doonayaan in bulshadu u aragto inay la mid yihiin ragga soo wakiishay,waxayna jecel yihiin in muslimiin saafi ah loo arko.Ee maxaa kuwa magaca culimo huwan ku bixinaya inay kufri cad sifo islaam siiyaan?!!!

Waxaa uun lagu fasiri karaa inay yihiin dad diintoodii adduunyo ku

gatay.aakhirona aan dan ka lahayn.Waana sifo ay ka simman yihiin kuwa loo yaqaan:[culimada dawladaha] .

Wadaaddadaasna markay mujrimiinta Alle ka goostay difaacayaan waxay markasta daliil ka dhigtaan hadalkii C/lahi Ibnu Cabbaas-Allaha labadaba ka raalli noqdee-ee uu ku yidhi: {Waxaa loo jeedaa kufri ka sokeeya midka diintaka saarayay}.

Hadaba,si ay innoogu cadaato in murtadiinta maanta joogta aanu hadalkaas qiil u noqonayn aynu is-hordhigno duruuftii iyo sababtii uu hadalka Ibnu Cabaas ku yimid.

Xilligii C/lahi Ibnu Cabaas-labadaba Allaha ka raalli noqdee-ayay khawaarijtu gaalnimo ku xukumeen khulafadii sebenkaas,iyagoo sabab ka dhigaya inay jawr falaan, axkaamta qaarkeedna khilaafaan oo hawadooda ka raacaan, eexasho iyo xadgudubna ku kaca. markaas buu Ibnu Cabaas arrinka ka jawaabay,shubhadaana dadka ka saaray.una cadeeyay in falkaasi inkasta oo meel ka dhac yahay,hadana aanu gaarsanayn heer dadkaasi ay diinta kaga baxaan oo ku gaaloobaan. Marka,in hadalkaasi ku jeeday khulafadii nusuusta qaarkeed khilaafay,hase yeeshee,lahaa sifooyinka ah:

a) Inay diinta Alle si kasta u oggolaayeen,

b) Inta yar ee ay khilaafeen maahee inay sharciga Alle ku dhaqmayeen,

c) Inay faafinta diinta Alle u jihaadi jireen.

d) Inaysan sharci kale sinaba u aqoonsanayn una oggolayn

e) In wilahooda iyo tolaysigoodu Alle iyo mu'minnta keliya ku xidhnaa, oo aysan sinaba u dhici jirin inay gaalo is walaalaystaan.

f) Haday dhacdo inay sharciga khilaafaanna dareensana inay Alle dembi ka galeen.

Hadaba in hadalka Ibn Cabbaas ee duruuftaa ku yimid lagu difaaco ragga maanta ee :

a) Sida cad diinta Alle u tuuray,bedelkeedana nolosha qawaaniin kufri ah ku dhaqaya b) Gaalada tol iyo sokeeye ka dhigtay oo wilaagooda si buuxda u siiyay,isuna arka in I iyaga io gaaladu isku doon saaran yihiin.

c) Dadka dacwada islaamka wada u arka inay yihiin cadawgooda ugu khatarsan, sidaa darteed,iyagoo kaashanaya madaxdooda Reer-yurubka ah si kasta ula dagaalay kana dhigay in ay laayaan,qayb ay xabsiyada ku abaadiyaan,iyo qaar darfaha aduunka lagu ugaadhsado.Iyagoo weliba dadkaa ducaadda ah ku shaabbadeeya sifo kasta oo fool xun,kuna sheega inay yihiin macangag,argagixiso,khawarij,takfiir.fidmoleyaal,dad diintu wareerisay iwm..

In hadalkaa Ibnu-Cabbaas dhagar-qabeyaashaa lagu difaaco waa arrin yaab leh oo aan ka daadegi karin maanka qof diin gashay oo iimaan leh,waxayna la mid tahay iyadoo la yidhaahdo ,Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi ::Marka nusuuta

diinta la fiiriyo waxaa isku xukun ah boqor C/lle, Buutin,Buush,Mubarak ,Zeyn-ulcabidiin iyo khulafadii xilligiisa.!!!
Xaasha !! Ibnu Cabaas hadal caynkaa ah ma odhan,xataa weedhiisa macnahaas lagama fahmi karo, se waa lagu been abuurtay,difaacaasna mujrimiintantada waxba uma tarayso.

Sidaa darted,dhammaan waxa maanta dunida muslimka talada loogu dhiibay way ka simman yihiin murtadnimada iyo inay qawsaarro gaalo yihiin,ha noqdeen kuwa xukunka afgembi milleteri ku qabsaday,kuwa ku helay dhaxaltooyo iyo kuwa ku yimidriwaayadda
dimoqradiyadda,hankooduna ma dhaafsana gaalo loo khidmeeyo iyo calool la la ciyaaro
Bal u fiirso warkan:Nin heer wasiir gaashaandhig ka gaadhay mid ka mid ah dalalka Carbeed ee saliidda hodanka ku ah ayaa madaxweynahii dalkiisa weydiiyay su'aal ah:
War dadka aan xukuno waa dadkeenii,dalkana innagaa iska leh xoolahan baytimaalka ahna waa hantideenii,maxaa hadaa keenay in ummadeenna daaha shishadiisa laga maamulo?!Madaweynihii wuxuu ugu jawaabay:Adeer kuwa daaha shishediisa fadhiya haday adna wasiir-gaashaandhig kaa dhigeen anna madaxweyne,maxaa kaa maqan oo doonaysaa!!.Siday u dhan yihiinna waxa muslimiinta la dul dhigay waa wax sidaa maanka looga adoonsaday,oo caqligaas ku wada fekeraya,dadnimo ay wax ku diidaanna lahayn, marka la amrayo inay diinta ummada la diriraan,culimadeedana shaqo ka qabtaan,halkay diidi lahaayeen ee odhan lahaayeen,war sidee dadkayaga,dhulkayaga iyo diintayada noogu faro gelinaysaan?! Warkoodu wuxuu dhaafi waayay:,hawraarsan iyo
warkiinnaa jira.!! Ileen waa dad isu arka in abaal loo galay oo kuraas lagu fadhiisiyaye.
Hadayba dhacdo inay gor-gortamaan ama shuruudo xidhaanna waxay ku baryootamaan oo keliya in hadii sida la rabo wax u hirgeli waayaan,xaaladuna kuxumaato,in dalalka gaalada looga diyaarsho degganaansho iyo meelo ay ku indho qarsadaan .
Runtiina raggaasi shaqadii loo dirsaday sidii loogu talo gayay ayay u fuliyeen, gaaladii soo korsatayna way u abaal gudeen oo baarriyaal u noqdeen,
Maantana dalkasta waxa la gumaadayo,ama xabsiyadiisa ka buuxa, ama arlada ilaahay lagu er-eryanayo waa dadkii dalkasta ugu khayrka badnaa ee hirgelinta diinta Alle habeen iyo maalinba u taagnaa ,si calankeeda loo taagana wax kasta oo qaali ah huray.
Wakiilladaasna awoodda dawladeed ee gacanta loo geliyay waxay u adeegsadaan oo keliya dhaqan gelinta iyo ilaalinta qawaaniinta kufriga ah ee fulinteeda loo xil saaray,iyo inay kula diriraan diinta Alle iyo culimadaku hawshoon u khidmadaynteeda

Maalinkay dhacdo meel dhulalka muslimiinta ka tirsan inay ka hano qaado quwad islaam,wakiilladuna u tabar waayaan, waxaa heegan gelayaa, dagaalkana toos isugu soo shubaya ciidammada gaaladaa wakiilka loo yahay.

Tusaale hadaan soo qaadanno,markay islamiyiintii Aljeeriya ku dagmeen huuhaadii demoqradiyadda ee dalkaas, ayna ka qayb galeen doorashadii 1992kii,weliba ku dhowaadeen inay doorashadaa ku guulaystaan,waa tii ciidankii dalkaas oo markii horeba Baariis laga xukumay,laakiin dadka loogu sheekayn jiray inay dalkaa difaacayaan, waa tii amarka lagu siiyay inay shaqadooda qabsadaan,oo xukunka raggaasna ka hortagaan,natii-
Jadana dariishadda ka tuuraan.

Waxaase madaxdii Yurub ka wer-wer ku beeray war bixin ay sirdoonkooda ka heleen, tilmaamaysayna inay dalkaasi ka buuxaan islaamiyiin aad u tababaran oo ka soo qalin jebiyay jihaadki Afqaanistaan,taasoo ku keentay shaki ah in ciidanka Aljeeriya uu u babac dhigi karo raggaas iyaga ah, waxayn dani dhaafin wayday inay Tuunisya ku diyaarshaan ciidan soddon kun gaadhaya,si hadii ciidanka Aljeriya xaaladu ku cakiranto ay ugu hiiliyaan dagaalkana ula galaan, islaamiyiintana inta cagta mariyaan, xukunkana
raggaa lagu kalsoon yahay gacanta loo geliyo.

Taasoo ah isla falkii lagula kacay dhaq-dhaqaaqii Dhaalibaan ee Afqaan, ilaa maantana lagu hayo,jeer Naato iyo Maraykan ku goobteen,iyo weliba wixii lagula kacay maxaakimtii islaamiga ee Somaliya,dhibkii loo gaystayna ilaa maanta uu socdo.

Xaqiiqada biyo kama dhibcaanka ahina waxaa weeye; war sidii horraantii qarnigii tegay gaalo dunida muslimka u qabsatay baa ilaa maanta naloo haystaa oo naloo guumaystaa.

Waxa magaca islaam la huwiyay ee xukumana waa qawsaarro iyaga wakiillo u ah,oo ah murtaddiin xadhiga Alle gooyay. Marka sharciga Alle wax lagu qiimeeyona, dhaaquut waa dhaaquut,jinsi iyo midabkuu doono hayeesho, waana isku mid ka Masar iyo ka Yuhuuda,ka Somaliya iyo ka Itoobiya,ka Qadar iyo ka Ruushka.

Diidista iyo iska indho tirida xaqiiqadaasna waxay la mid tahay iyadoo la yidhaado khamrada Somaliya ama Masar lagu sameeyo waa xalaal,se ta Talyaaniga ama Ingriiska mar hadii dal gaalo lagu farsameeyay waa xaaraan, ama la yidhaahdo ninka Somaliga ahi haduu gabadh Somaliyeed fara xumeeyo waxba kuma jabna,hadiise uu gaal Talyaani ah ama Jarmal ah la galmoodo waa sino.!!!.Waxaas ma jiraan, khamro waa khamro waana xaaraan meeshay ka timaadaba,sinana waa sino cidii doonta ha samaysee.

Sidoo kale mar hadii sharcigii Alle nolosha laga dhaariyay,cida falkaa samaysa waa dhaaquut,ciduu rabo ha u dhashee.Allena waa kii tilmaamayay in gaaladu isku xukun yhiin mar haday dhaqanka xun ka midoobaan,wuxuuna yidhi::{War

ma gaaladiinna ayaa ka wanaagsan kuwiinna hore,mise kutubtaa la idiinku sheegay inaad nabad gelaysaan.}Al-qamar(43)..Maya,waa isku jise,mar haday isku camal noqdeen..

Sidoo kale,haday gaaladan xukunka dhabta ah ee ay leeyihiin ka nabad gelinayso in isku wadan la yahay ama isku jinsi la yahay,waxaa la wada ogyahay in qur'aanka Alle aad loogaga warramay arrinta Fircoon,iyadoo macnuhu yahay in madaxdii Quraysh ay nebiga-naxariis iyo Allaha siiyee-ka istaageen mawqifkii Fircoon iyo raggiisii nebi Muuse-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-ka istaageen.

Kolka mar hadii xadhiga Alle la gooyo qowmiyo iyo wadaniyotoona waxba ma tarayaan.

Culimada ay diintu daacada ka tahay ee doonaya inay si lillaahi ah sharciga ugu khidmeeyaan waa inay runta abbaaraan,dadkana bannaanka u soo dhigaan xaqiiqada xukunnada gaaladu dul dhigeen,loona tuso in dhaaquutyadii iyo Fircoonkii Alle uga digayay ay kuwan laftooda yihin,waana in umada loo qeexo dadka baadiyoobay iyo kuwa loo cadhooday ee habeen iyo maalinba ay salaada dhexdeeda Alle kaga tuugaan inuu dariiqyadooda marinnin inay ka mid yihiin nidaamyada magaca islaam loo huwiyay ee maanta gaaladu dul dhigeen,se lagu fulinayo gacanta kuwo iyaga ka dhashay .

Allena markuu nebiga – naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- - arrimaha dacwada kala dardaarmayay waa kii ku lahaa:{Adkayso,ballankii rabbi kuu qaaday waa hubaale oo yaysan ku fududaysan kuwa aan waxba yaqiininaynnin.} ruum (60).

Nebiga –naxariis iyo nabadgelyo Allaha siiyee-waxaa aayadan lagu farayaa inuu sabro oo ku kalsoonaado ballankii loo qaaday ee ahaa in loo gargaarayo,waxaana looga digay in wax iyaguba liita oo doqommo ahi aysan sirin oo caqliga ka xadin, ahdaafta iyo qorsheyaalka dacwo ee u xididanna aanay ka jeedin oo ka marin habaabinnin.

Sidaa oo kale culimadu iyagoo waanadaa Alle ee aayadaas ku cad ka ambaqaadaya waa inay ka mustewa sarreeyaan inay daba dhilifyada gaalada ee iyaguba sufaho ah caqliga ka xadaan,hadafkooda dhabta ahna ka marin habaabiyaan.oo iyadoo kufriga iyo fasaadka nolosha umada lagu hayo ay si kasta u muuqato,in wax ka qabashadeeda laga mashquuliyo laguna jeediyo ka hadalka iyo cambaaraynta dhibabka lagu hayo muslimiin-- ta kale,sida Shiishan, Falasdhiin,iyo Kashmir,sida iyadoo dhulkooda aanay belo ka jirin

Masalan,maxaa lagu fasiri karaa marka dad ka tirsan dhaqdhaqaaqyada islaamka oo kontomeeyo kun ka badan xabsiyada Masar ka buuxaan, iyagoo dembi looga dhigayo inay dacwo wadeen oo diinta Alle koryeeli rabeen,isla markaana culimadii dalkaa iyo xarakooyinkiiba ay ka mudaaharadayaan dad gaalo meel kale ku laysay.?!!

Maxaa iyadana lagu ay macnayn karaa xukuumada Sacuudiga oo qaynuun kufri ah wax ku dhaqaysa, iyadoo gaalada wakiilka u tahay ku raalli gelinaysana ducaadii dalkaa ka dhigay wax la dilay,in xabsiyada ka buuxa,qaar la caydh-caydhsanayo iyo kuwo inta afka laga xidhay loo hanjabay lagu yidhi:hadaad xaqa sheegtaan idinkaa cirka roob ku og!!. Hadana culimadoodii lagu mashquuliyay caydh-caydhsiga suufiyada iyo soo faaqida reddinta firqooyinkii hore,laguna jeediyay dagaal aan cadaw lala hardamo lahayn?! Haday dhaafi weydana ah kooxo aan maanta wax awood ah lahayn.

Waxaana culimada iyo xarakooyinka Masar iyo Sacuudiga tusaale ugu soo qaatay iyadoo labadaasba ay xarakooyinka Somalida saamayn weyn ku leeyihiin, kana shidaal qaataan.

Marka arrimahaas lagu jeedinayose,maxay tahay belaayada ka weyn in umada diinteeda lagala diriro oo inay sharciga Alle raacdo, rabigeedna raalli geliso loo diido?!

Iyadoo si kastana loogu fududaynayo inay samayso waxyaalaha Alle ka cadhoodo?!! Maxaase musiibo ah oo ka daran in bulshada naar Alle loo horkaco?!!.

Soo qur'aanka Alle ee sharafta badan laguma caddayn in dadkoo diintooda laga halleeyo ay ka xun tahay oo ka khatarsan tahay in la laayo oo la gumaado.

Runtuna waxay tahay in aan gaalada laga xoroobayn,diinta Allena si sharaf leh oo xarrago ku jirto loogu dhaqmayn inta la kala soocayo dadka uu sharciga Alle isku xukunka saaray ee ah gaalada iyo murtadiinta ay ummada dul dhiigeen .

Culimada raggaa asal iyo midab islaam oo aan waxba ka jirin ku aslayana Alle ha ka baqeen oo dadka caamada ah yaanay cadowga u hoosaasinnin,hana ogaadeen in markay waxaas ku kacayaan ay ku dhex jiraan xumaantii Alle reebay markuu culimada Yuhuuda la hadlayay ee uu ku lahaa: {;Xaqana ha ku dheehina baadhilka,taana ay keento in aad xaqa qarisaan idinkoo weliba ogsoon foolxumada waxa aad ku kacaysaan } Albaqra(42).

Culimadii Yuhuudana mar hore ayay dhamaadeen,ee cidda lala hadlayo ee aayadu u digayso waa culimada muslimiinta.

Sidoo kale, ha xusuustaan inay Alle ballan kula galeen inay diinta caddaynayaan oo aysan qarinayn, kaas oo ay galeen markii iimaanka iyo cilmiga diinta lagugalladaystay.

Sida Alle u leeyahay:{Dadka uga sheekee markuu Alle kuwii kitaabka la siiyay ballanka kaga qaaday inaad dadka diinta u caddaynaysaan oo aydan qarinaynninayna dhabarkooda
gadaashiisa ka tuureen,oo dheef yar ku gateen.waxa ay gadanayaan baana xumaan badan}

Aal-cimraan (187)..Aayadu waxay ka hadlaysay culimadii Yuhuuda,laakiin hada hadalku wuxuu ku jihaysan yahay culimada muslimiinta .

Marka waa waajib in dadka xaqa loo caddeeyo, xukunnada kufriga ah ee la dul dhigayna wejigooda runta ah la faydo,si ummadu mawqifka sharciga ah uga qaadato,kaas oo ah in

Loo arko inay yihiin dhaaquutyo, hadii xukunkooda la raaco naar Alle lagu mudanayo. k

Waana mas'alo sharci ah in mu'miniintu u caddaadaan habdhaqanka,mu'aamarooyinka,

iyo tabaha gaaladu adeegsadaan. War bixin badan oo nimankaa nalaga siiyay ujeeddada

laga leeyahay waxay ahayd in waxa gaalada iyo madaxdoodu yihiin iyo waxa ay maaggan yihiinba si fiican looga dheregsanaado. Allena waa kii yidhi:
{Sidaa oo kale ayaan aayadaha u kala dhig-dhignaa,iyo weliba si ay u caddaato dariiqa mujrimiinta} Al-ancaam(55)..

Waxaana laga yaabaa inay dad qiil ka dhigaan in nimanka madaxda xoog loo sheegto, oo ay baqayaan,sidaa darteed ay khasban yihiin (mukrihiin),taasina waxba kama jiraan labo sabab dartood,waa ta hore iyagaaba addoonnimada u haliilaya, si kastana diyaar ugu ah inay gaalada u adeegaan,una qabtaan wax walba oo raalli gelinaya,waa tan labaade, waxaa isu bar-bar yimid inay gaalada ka beri' noqdaan oo diintoodii qabsadaan iyo inay gaalada raacaan oo si kasta u raalli gelyaan,ta dambe ayayna doorteen.
Allena wuxuu kuwaa iyo wixii la nooc ah ka yidhi:{Arrinku wuxuu caynkaa u yahay iyagoo nolosha adduunyada ka doortay aakhiro,Allena uusan hanuuninnin qoomka gaalada ah} Annaxli (107). Falkoodaana wuxuu la mid yahay kii Hiraqle-boqorkii Ruum- ee loo keenay dhambaalkii nebiga- naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-,markuu damcay inuu rumeeyana ay baadariyadiisii ku kaceen,markuu xukunkiisii u baqayna gaalnimadiisii ku sii socday, sidaasuuna diintii xaqa ahayd ee uu dhabnimadeeda arkay aduunyo iyo xukun uga doortay.kuwanna waa tebinkiisii.

Raggaasna waxay isku dhaqan yihiin kuwii Sayid Maxamed ka hadlayay markuu lahaa:

1) Nin aqdaami faranjiya---- maantiyo abuuriin
2) Ama aaladuu sida--------- ama awrtaba u rara
3) Ama adhiga buu qala -----ama laba ugaarsada
4) Ama uba ilaalo ah -----ama uurka kala jira
5) Ashahaado beeniyo ---islaamnimo ha lagu dhaqo

Ilaahayna nama odhan---anna ma oggolaan karo.
Marka waxaa lagu khasban yahay in gaalada kufrigooda caddaystay iyo qawsaarradooa murtaddiinta ah aan la kala soocin,mar haday Alle agtiisa hal xukun ku leeyihiin.

Maalinka raggaa ay gaaladu gabbaadka ka dhigatay iyo iyaga laftooda isku

goob la
joojiy oo isku si loola dagaallamo,maalinkaa buu nasri Alle dhaw yahay,oo soo degdegi.

Laakiin,maalinta wadaniyo,qowmiyo iyo qabiil la tixgeliyo,ama cilmaaniyiintaa sufahada ah inta caqliga naga xadaan,ay dagaallo aan dhab ahayn nagu mashquuliyaan,waxaa hubaal ah inay arrintu murgayso,dhibka iyo rafaadkuna sii daba dheeraanayo.

Dhiigkasta oo diinta loo huro iyo dedaalkasta oo dacwada lagu bixiyona midho dhal noqon mahayaan inta tubta saxda ah ee dacwada aan si dhab ah loo abbaaraynnin.

## CULIMADA IYO HOGGAAMINTA UMMADA

Waxaynu soo tilmaanay in nolosha bulshootinku aanay ka maarmin madax hogaamisa oo dhaqan gelisa nidaamka nolosha ee bulshadu isku afgarato inay ku dhaqanto.

Waxaa kale oo aan soo sheegnay in umaduhu labo yihiin oo mid sadexaysa aanay jirin.

Mid nidaam-nololeedka Alle jideeyay ee islaamka ah dooratay oo muslimiinta ah,iyo qayb hawo aadane xeer iyo qaynuun ka dhigatay oo gaalada ah.Waxaa kale oo aynu soo cadaynay in shareecada islaamku aanay sinaba u oggolayn in muslimiintu ay xukun gaalnimo ah ku hoos noolaadaan,ha ku xukumeen Reer-

galbeedka ama dabadhilifyada e, waxa keliya ee diintu oggoshahay waa in muslimiintu iyagu is xukumaan,iyadoo sharciga Alle dejiyay uu yahay waxa keliya ee ay isku dhaqayaan ..

Muslimiintuna waxay ka kooban yihiin culimo iyo caamo,dhammaanna waxaa ku waajib ah raacidda sharciga Alle.Laakiin cidda ay tahay in sharciga looga dambeeyo,waa
Culimada Alle aqoonta diineed ku mannaystay.

Iyadoo Alle muslimiinta dhan diinta ku sharfay,dadyawga kale ee dunidana ka doortay,ayuu hadana culimada-waa hadii amaanada la saaray ay ka soo dhalaalaane- si gaar ah u sharfay oo xushmo iyo maamuus gooni ah oo ay dadka kale dheer yihiin ugu yeelay,weliba la is faray in la dhawro xuquuqda iyo martabadaa la siiyay, taasina nusuus badan oo qur'aan iyo sunnoba leh baa lagu cadaysay ,waxana ka mid ah:

1) {…Alle kor ayuu u qaadayaa kuwiina xaqa rumeeyay,kuwa cilmiga la siiyayna derejooyin dheeri ah…}Al-mujaadala(11).ImaamIbn-xajar (aun),isagoo aayadan ka hadlaya wuxuu yidhi :{Alle mu'minka aqoonta diineed leh wuu ka sarraaysiinayaa mu'minka aan cilmi diineed lahayn,kor u qaadista darajooyinkana waxay muujinaysaa fadligooda,oo macneheedu yahay abaal marin badan,derejada kor loo qaadayana waxay ka kooban tahay tu macnawi ah oo ay aduunka ku helaan martabo sare,iyo sumcad wanaag.iyo tu xisi ah,aakhirona inay maqaam sare jannada ku yeeshaan,aayada Alle ku leyahay:{waxaad tidhaahda rabbiyow cilmi ii kordhi.}Dhaha.waxay si cad u muujinaysaa
fadliga cilmiga maxaa wacay ;Alle nebigaiisa kuma amrin inuu ka kororsiimo waydiisto wax aan cilmi ahayn,cilmigana waxaa loo jeeda ka sharciga} Fatxul-baari (1/141).

2) Sidoo kale,Alle wuxuu suurada Annissa(59) ku leeyahay:
{War hoy dadkii iimaanka lahaayow,Alle adheeca rasuulkana adheeca iyo kuwa talada iska leh(ulil-amri).hadii aad arrin isku qabataanna xukunkiisa u celiya Alle iyo rasuulkiisa hadii aad tihiin dad Alle iyo qiyaamo rumaysan.arrimaha la idin faray baana khayr iyo cidhibsan idiin ah.}.Aayadana waxaan kala bixi karra arrimaha soo socda:

1) In Alle iyo rasuulka si buuxda oo shuruud la'aan ah loo adheeco.

2) In dadka mu’miniinta ah ee talada haya aysan adheecidoodu mudhlaq ahayn ,se ay ku xidhan tahay hadba sida ay sharecada u raacaan .

3) Inta badan-ahna ra’yiga xoogga badan- culimada tafsiirku waxay dadka talada leh (ulil-amri) ku fasireen culimada iyo fuqahada,maxaa wacay, nebiga-naxariis iyo nabad gelyo allaha siiyee- ayaa sheegay in muslimiintu haday jaahiliin talada u dhiibtaan,in iyaguna is-halaagayaan umada kalena galaafanayaan oo dhuminayaan,siduu xadiiskii saxiixa ahaa ugu yidhi:{Alle cilmiga siibid uun

iskama siibayo,laakiin wuxuu ku siibayaa iyadoo culimada la oofsado,jeer hal caalim la waayo,markaas bay dadku samaystaan madax juhalo ah,oo inta cilmi la wadiiyo ay aqoon la'aan ku jawaabaan,iyagiina is-halaagi umadiina halaagi} saxiixu muslim (1/174).Cumar bin khidhaabna-Allaha ka raalli noqdee- wuxuu yidhi ;{Ninkii dadkiisu aqoontiisa darteed madax uga dhigtaan,taasi qoomka ayay khayr u tahay.se qofkii tolkiisu isagoo jaahil ah madax ka dhigtaan,taasi isaga iyo waxa raacaba halaag bay u tahay.} Eeg (jaamicul-cilmi -1/26).sidoo kale Cumar bin C/casiis-Allaha ka raalli noqdee- wuxuu yidhi: {Qofkii cilmi la'aan camal sameeya waxa uu halleynayo ayaa ka badan waxa uu hagaajinayo}.fiiri (jaamicul cilmi 1/27).

Waxaas oo idil waxay muujinayaan in talada nolosha culimada ah looga dambeeyo

Culimada islaamkuna markay falanqaynayeen shuruudaha Imaamka guud ama Khalliifka muslimiinta, waxay tilmaamaan inay ka mid tahay inuu diinta cilmi u leeyahay weliba uu gaadhaa heer mujtahidnimo.Imaam Ashaadhibi(AUN) wuxuu leeyahay:{Culimada waxay soo guuriyeen in la isku ijmaacay in imaamnimada weyn aysan u guntamayn qof aan derajada mujtahidnimo iyo fatwada ka gaarin culuumta sharciga .}al-ictisaam (2/126)

3) Nebigeenna Maxamedna –naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-wuxuu sheegay in Reer-bani-israil ay talada u hayn jireen oo xukumi jireen nebiyadoodii,kolkuu nebi dhintana midkale loo soo bixin jiray,isaguna aanu nebi ka dambeeya jirin, culimada muslimiintuna yihiin dadka dhaxlay nebiyadii Alle, nebiyadana inaan dirham iyo diinaartoona laga dhaxlin ee laga dhaxlay xilka ah cadaynta xaqa iyo in umada diinta lagu xukumo (fiiri-fatxull-baari-6/495).

Sida nusuustaa iyo kuwo kale oo badan ku cadna, kaalinta culimadu nolosha ku leedahay waa inay hogaanka qabato oo umada rillaha rabbi cagta u saarto.weliba la oggolayn cid aan iyaga ahayn inay xukunka ka soo ag-dhowaato,waana iyaga dadka laga sugayo inay bulshada indho u noqdaan,tubta toosanna ku hagaajiyaan.

Culimo iyo caamana waa in aan la dhayalsan doorka culimada iyo kaalintooda,sababtoo ah, waxaa laga wada dheregsan yahay in shaqo walba cida aqoonta u leh lagu tixgeliyo.

Masalan, wixii mashiin hallaaba qofka mekaaniga ah baa looga dambeeyaa,wixii jirro ahna takhtarka,wixii dagaal ahna ciidamada iwm.Hadaba dhibka manta taagan,mar haduu yahay mid ka dhashay khilaafida sharciga Alle,in nolsha umada diinta la baro oo lagu dhaqo cid aan culimada ahayn oo wax ka qaban karta ma jirto.

Dhammaan dadka maanta bulshadu qiimayso ee leh siyaasiyiin, filosoferro,indheer garad aqoon-yahano iyo maal qabeenaba hawsha sabato-bixinta umada waxba kama qaban karaan,doorkooduna wuxuu ku kooban yahay

inay diinta qabsadaan culimadana ku garab joogsadaan gudashada xilkaas.
Taana waxaa kuugu marag ah,marka umadihii hore ay tubta xaqa ah ka lumaan, Alle wuxuu u soo diri jiray rusul noloshooda xaqa ku soo dabbaasha, marka rasuul la soo bixinayayna bulshooyinka raggaas aan soo sheegnay way ka buuxeen, laakiin, mar haduu Alle ogaa in aanay xilkaa gudan karin, laguma hallayn lamana dooran,ee wuxuu xulan jiray ciduu khayr ku ogaa ee xilkaa ka bixi kartay, maantana rasuul la sugi oo umada sabato bixin ma jiro,halkii rusushana culimada ayaa taagan.
Wax macne ahna kuma fadhido aragtida khaldan ee culimada laga haysto,kuna salaysan fikrad ka soo jeeda ilbaxnimada wathaniga ah Reer-Yurubka ee aanay agteeda diin iyo dadkeedba qiimo ka lahayn.
Waxa qudha ee dedaalka u baahan waa culimada oo hesha aqoon iyo tarbiyo ay ehel ugu noqoto siday xilkeeda u gudan lahayd..
Somaliduna qofka diinta aqoon u leh,waxay u taqaan magac aan la dareensanayn macnaha uu xambaarsan yahay,aadna u waafaqsan kaalinta diintu ugu talo gashay qofka caalimka ah. Kaas oo ah erayga somaliyobay ee {sheekh}.Erayganna wuxuu luqada carabiga ku leeyahay labo macne oo ah: a)Qofka waayeelka ah .b) Ugaaska beesha..
Qabiillada carbeedna waxay ugaaska u yaqineen sheekha reerka,taladiisana,nabad iyo colaad tii la qaadanayo isagaa looga dambayn jiray,wuxuu xukumaana hadal la’aan baa la fulin jiray, mana dhici jirin in laga hor yimaado. Marka sheekha qabiilka la dooranayo,
looma eegi jirin da’da,se waxaa lagu xuli jiray karti iyo hufnaan,geesinimo iyo dhiirrani,
deeqsinimo iyo gacan furraan,garasho dheeri iyo dulqaad,iyo go’aan adayg.
Markuu islaamku yimidna, qofwalba oo muslim ah waxaa lagu waajibiyay raacida sharciga,hadana dadka diinta laga qaadanayo,ee qaabkay u soo bandhigaan looga dambaynayo waxaa laga dhigay culimada uu Alle ku mannaystay cilmiga naafica ah. Sidaa ayayna isugu imanayaan doorka ay culimadu leeyihiin macnaha erayga sheikh.
hadaan u gondadego hadafkaan hadalkan ka leenahay,kaalinta culimadu nolosha ku leedahay waa inay hoggaanka hanato,ummadana dariiqa xaqa ah cagta u saarto,si marka aakhiro la tago cadaabta Alle looga nabad galo, jannadiisana loo muto,kaas oo ah hadafka ugu weyn ee ummadu hiigsanayso.
Inaysan culimadu talo soo qaban jirin oo khibrad iyo waayo aragnimo u lahayn sida dad loo dhiso ama bulsho loo maamulo ama dawlad loo maareeyona waxba kama bedelayso xaqiiqada ah in doorkoodu yahay hoggaaminta umada, ileen taasi waa wax uun baahan oo keliya isu diyaarin iyo in loo tababarto.
Haday dhacdo in culimadu ay kaalintooda gabaanna,halista imanaysa ee aan sinaba loo seegaynnin waa iyadoo gaalo loo gacan galo,oo inta talada umada

qabtaan,cadho Alle u horkacaan.ileen,marna ma dhacayso in noloshu hogaan la’aan noqoto e,

Arrinka kale ee waajibka ka dhigaya in culimadu talada taabto waa dabiicada nolosha ee ah in aan labo nidaam oo iska horjeeda hal nolol lagu dhaqi karin,ama sharciga Alle ayaa nolosha lagu maamuli,ama qaynuun gaalo,markastana waxaa hirgelaya midka dadkiisu ay xukunka haystaan, waana wax iska cad in gaalo iyo xertood aan laga sugaynin inay nolosha diin Alle ku dhaqaan,hadayba dhacdo in muslimiinta ku hoos nool ay wax uun diintooda uga oggolaadaanna,waa in yar oo aan nidaamkooda halis ku ahayn

Allena sinaba culimada ugama aqbalayo inay hawshooda gabaan,ama xilkooda dayacaan,waana la wada garanayaa digniinaha iyo goodiyadii nebiga-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- haduu hawshiisa dacwo gabo ama dayaco loo jeedin jiray.

Isaguna macsuum buu ahaa,laakiin waxay digniinahaas mujinayeen labo arrimood,waa ta hore cadaadisyadii haystay,waa ta kale,waxaa lagula hadlayaa ducaadda ka dambaysa.

Sidoo kale Alle muslimiinta uma saamaxayo inay xukun gaalo ku hoos jiraan,una noolaadaan sidii iyadoo aanay belaayo jirin,xukunka kufriga ah ee lagu dhaqayana aanay ka damqannin.Waxaas oo idil waxay ina tusayaan culayska uu leeyahay xilka culimada saran, ee ah siday umada aduun iyo aakhiroba u bedbaadin lahaayeen.

Waxaa kale oo ay na tusaysaa in culimada iyo madaxda gaaladu loollan ugu jiraan taabida hoggaanka nolosha umada,waana qodobkaa waxa ugu weyn ee colaada iyo cadaawada culimada loo qabo keenay,sida nebiyadii Alle- naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-iyo madaxdii qoomamkoodii isla arrinkaa isugu haysan jireen, iyadoo rusushu leeyihiin:War cadaabta Alle iska jira,dadkiinnana ha halaagina,Alle keligii isu dhiiba,annagana na adheeca oo taladayada raaca,halka madaxda gaaladuna odhan jireen:

Anaga ayaa weligayo soo talin jirray,diin xukun fara gelisana maannan arki jirin,xukun doon baa tihiin,laakiin, magac diin baad ku gabanaysaan,ee dadkiina dhinac ka raaca,oo annaga talada nooga dambeeya.

Waa waajib sharci ah marka in culimadu mujrimiintaa inta la hardanto ay talada ka faro maroojiso,oo sidaa xukunka ugala wareegto,hadii kalese,waxay culimadu halis ugu jirayaan in la marsho ciqaab Alle oo aan loo adkaysan karin.

Doonista ay culimadu xukun doonayaanna ma ahan arrin laga xishoodo, afkana laga dhawro,ama lala gagabado,waa in marnaba aan loo aabo yeelin,dhegna jalaq loo siin hadallada raqiiska ah ee markasta ay madaxda gaaladu ku hadaaqaan,culimadana ku duraan ee ah,wixii kuwii hore nebiyada -naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-ku duri jireen. dacaayadna uga dhigi jireen.Bal fiiri macnaha ay tilmaamayaan aayadaha suurada Saad ku jira,waxay ka

warramayaan waxa madaxdii Quraysh ay kula hadleen dadweynihiiay xukumeen,markii inta dacwadii nebiga-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- u adkaysan waayeen,isna u jixin-jixi waayay ayna adeerkii uga dacwoodeen,kolkii inta la wada hadlay la is mari waayay ayay madaxdii Quraysh soo baxeen, iyagoo dadweynihii bannaanka ku sugayaan,halkaasna waxay ku qabteen shir jaraa-id, iyagoo dadkii dejinaya isuna tusaya inay iyagu ku filan yihiin ka hortegida dacwada,waana tii Alle ka warramay hadalkoodaa markay lahaayeen: {Ma ilaahyadii buu hal ilaah ka dhigay intii kalena waxba kama jiraan yidhi?! Kaasi waa wax lala dhaka faaro!Waxaana soo baxay madaxdii gaalada(mala'a)iyagoo dadkii ku odhanaya: Mabaadi'diina ku mintida, ilaahyadiinna dartoodna u sabra,waxa la wado dano gaar ah baa laga leeyahaye,waxan kada waa arrin la iska been abuuranayo,maxaa wacay, warkan oo kale diinta kale kuma aannan maqal } (5,6,7).Aayadahan waxaa ka cad:

a) In madaxdu yihiin dadka mar walba heeganka u ah difaacida asnaamta, sababtoo ah, marka asnaamta ilaahnimada laga xayuubsho,waxay waayayaan tuubadii ay wax ku jaqi jireen,taasoo ay ku xigto inay waayaan ilaahnimada qaybtii ay ka haysteen ee ahaa xukunka iyo sharci –u-dejinta nolosha.

b)Waxay dadweynaha isaga dhigaan in iyagu u taagan yihiin ilaalinta maslaxadda guud,

iyagoo ku odhanay:Hawsha nooga seexda, marnana mabaadi'diinna ha ka baydhina.

c) Waxay leeyihiin: Arrinta xukunka diin kama hadasho ee dan siyaasadeed baa laga wataa,se diinta gabbaad baa laga dhiganayaa, lana doonayaa in xukunka lagu gaadho.

Waa in hadalkoodaas laga soo qaado qof iska hadaaqaya oo warkiisu qiimo lahayn.

Marka culimadu ay xukunka raadinayaanna,dantoodu ma aha inay sida dhaaquutyada raaxo adduun ka haqab-beelaan oo inta ilaahyo laga dhigto,khalqigu iyaga caabudaan ,

se danta iyo ujeeddada culimadu waa inay helaan rillaha Alle,iyagoo raba inay taa ku gaadhaan in awoodda xukun ee ay qabanayaan ay adoomada rabigood ugu cabiidiyaan,

kadibna ay sharcigiisa ku dhaqaan.waana la wada ogyahay in shareecada awooda la'aan aan la hirgelin karin,waana tii Cusmaan bin Cafaan –Allaha ka raalli noqdee-ilahaa:

{Alle wuxuu awooda xukunka ku horaa wax uusan qur'aanka ku horin},Taasoo uu ula jeedo inay jiraan dad badan oo aan waanooyinka iyo wacdiyada qur'aanka dheg u dhigayn oo aan waxba ku qaadanaynnin,kuwaasna waxaa lagu hor istaagayaa awoodda xukun oo cidkastoo waanada qaadan wayda,ay dawladu gacan bir ah ku qabanayso.marka waa in culimadu xukunka qabato si xuduudaa

diinta loo ilaaliyo.
Teeda kale culimada rabbaaniyiinta ah ee Alle ammaanay ma aha dad ay agtooda aduunyo qiimo ka leedahay,sababtoo ah,waxay diintu u sheegtay oo rumaysan yihiin qiimo darrideeda iyo wazniga ay Alle agtiisa ku leedahay.
Waxaa kale oo ka dhaadhacsan in noloshu isla gubanayso ayna fasaadayso hadaysan taladeeda qaban dad Alle u go'ay oo saalixiin ah, kuwaas oo awooddooda xukun u adeegsada siday ummadu inta rabigeeda xaqa ah u weynayso oo ugu hoggaasami lahayd..

## SIDA CULIMADA HOGGAANKA LOOGA FOGEEYAY

Waxaan soo sheegnay in culimadu yihiin cida keliya ee shareecadu oggoshay inay musliminta hogamiyaan,hase yeeshee,maa daama nolosha aan xukun islaam lagu soo dhaqi jirin,waxaa jahli lagaga sugan yahay xaqiiqooyin badan oo ka mid ah asaasyada diinta,jahligaa oo keeni kara in dad badan aysan si fudud uga daadegin xaqiiqadaa aan soo sheegnay ee ah in talada nolosha cid aan culimada ahayn meel uga bannaanayn.
Sababtoo ah,marka bulshada Somalida ah hoos loogu daadego,waxaa muuqanaya in culimada iyo hawshii diintu u xilsaartay ay kala fog yihiin,ama ula kac looga dhaariyay. Taana ma aha arrin maanta iyo shalay toona dhalatay,ee waa dhib mudo dheer soo jiitamayay,mana aha xukun sharciga la qaatay,ee waa wax ku yimid duruufo is-biir-biirsaday ayna ka mid yihiin :
1) Iyadoo Somalidu isaga badnayd nolol miyi,tegida dalalka kale ee islaamka ahna ay ku yaraydsidaa darted, badankood indhaba kama qaadin dawlad diinta Alle l lagu dhaqayo,oo inta culimo hoggaaminayso taladeeda iyagaa looga dambeeyo.
Taa beddelkeeda waxa nolosha ma jaraha u hayn jiray oday-dhaqmeedyo aan cilmi lahayn dadkana ku dhaqayay xeerar intooda diinta laga soo minguurshay ay yarayd.
2) Inta badan Somalida umaba tirsanayn culimada iyo wadaaddada,waxayna arki jireen oo keliya dad carri fog u xeraysta oo diinta gaajo iyo rafaad ku soo barta,noloshana aan door la sheego ku lahayn,se looga oggolaa in yar oo iska xaddidan,sida inay ubadka qur'aanka baraan,reeraha isu mehershaan,xer kiciyaan, bulshadana u sharxaan cibaadooyinka khaaska ah,dadkana diinta ku wacdiyaan, dantuna ay baday inay hawlaha ay bulshada u qabanayaan ku ujuuro qaataan.

3) Inta badan dariiqooyinkii suufiyada ee Somalida ku soo hor maray,waxay diinta ka bixiyeen sawirro khaldan iyo fikrado aan diinta sal ku lahayn,ayna ka mid ahayd in aduunka laga go'o,talo teed ahna in la qabto iska daaye,aanayba habboonayn in hanti iyo xoolo laga tabcado,in werdi iyo xadro lagu shuqloomana ay ka fadli badan tahay in la xoogsado, iyadoo taa bedelkeeda nolol laga dhigto dawarsi magaca siyaaro lagu qurxiyay

Taasina waxay dad badan siisay dareen ah,qofkii raba in diinta si dhab ah u raaco inuu ku khasban yahay in nolosha uu ka dhex boxo,dadnimo iyo isagana is daayaan, uuna noqdo miskiin dawarsi ku nool ah,heer la gaadhsiiyay in la yidhaado:war hebel raganimo seegye,yaanu wadaadnimo seegin.

4) Markay gaaladu arlada qabsadeena waxay dhidibada u sii aaseen hab-nololeedkoodii diin la'aanta ku dhisnaa,culimadii iyo wadaadadiina inta edegyo cidhiidyoon lagu awday baa takooriddii hore loogu sii dara yasid iyo xaqirid .

Gaaladuna dadkay soo dhisteen bay taladii bulshada u dhiibteen,culimadiina noloshii caadiga ahayd lagu dhibay,heer la gaadhsiiyay in barashadii diinta la qiimo tiray,dadkiina dhashoodii ula baydheen dugsiyada lagu barto dhaqamada iyo luqooyinka gaalada.

Intaa waxaa dheeraa oo barbar socday sawirrada foosha xun ee culimada laga bixiyo, si ula kac ahna bulshada loogu dhex baahin jiray,iyadoo danta laga leeyahay ay ahayd in culimadu aysan bulshada dhexdeeda qiimo iyo sharaftoona ku yeelan, si aan looga qaadan nuurka iyo hanuunka ay xambaarsan yihiin,talo tood ahna aan loo qiimayn..

Sawirradaas laga baxshay Somalidana ku dhex shaacsan aan dhawr sawir:soo qaadanno:

a)Marka la isweydiiyo ragga iyo dumarka kooda badan;waxaa la yidhaahdaa:hadii wada-

-addada ragga lagu daro raggaa badan.Macnaha hadalkaasi tilmaamayana waa in culimadu marka loollanka iyo hardanka nolosha lagu jiro aysan dadnimo lahayn,waxbana ku turrayn,kolka sidaa haweenka iyo ragga ugu dhexeeyaan. Wayna muuqata in lagu dagmay sida wadaadadu isaga dhawri jireen ka qayb qaadashada dagaalladii qabaa-ilka .

b) Geelleyda qaar markay xoolaha waraabinayaan waxay tiring jireen tixo ay ku muujinayaan aragtida ay wadaad ka haystaan, ahna inay wax ma tareyaal yihiin,iyagoo leh: Hadaan culimoy---cad la siiyiyo cunto mooyee ---ciidan kaa dayo –ceeb anaa dhigay.

c) Gabdho ay wadaado ciyaar ka kala eryeenna waxay hees-cayaareed ku soo tunteen tixahan mujinaya fikrada ay wadaad ka qabeen tixahaas oo ahaa:

1) Marka wan la qalo werdiyow------- marka kale weer cad xidhow.

2) Marka ri'laqa nin ragow ----------- marka kale reerka rogow

3) Markuu kirli arko karsamow --------marka kale kuudud xumow.

4) Marka sac la qalo salliyow--- -------marka kale saancad dhigtow
5) Marka hal la qalo humsiyow --------marka kale hoog u galyow
6) Markuu xeero arko xamdiyow ------marka kale xaako tufow.
Macnaha ay tixdaasi tilmaamayaan ka hadal iyo qeexidtoona uma baahna.
d) Sheeko baraaleydan dugsiyada waxbarashada lagu dhigi jiray waxay muujinaysaa
sida culimo ama wadaad loo xaqirayay,doorkay nolosha ku lahaayeena looga fogeeyay Sheekadaas.oo ahayd sidatan:Beel baa ugaaskeedii dhintay,wuxuuse ka tegay saddex wiil oo midi geesi yahay,kuna wadaad ,ka saddexaadna caaqil.Hadaba si kii odaga bedeli lahaa ee la boqri lahaa loo soo saaro,waxaa la isla gartay in la jarrabo,waxaana mid kasta lagu yidhi : War reerka labo libaax baa ku soo socdee taladii looga bedbaadin lahaa keen. Geesigii inta waran la soo booday buu yidhi:Ii daaya anaa labdaba maydkooda ka tallaabsane.Saa la ye noo fadhiiso.Wadaadkiina wuxuu yidhi:Faraha iiga qaada asmaan ku gani oo labadaba kula legdiye. Markuu inta cabbaar ah qur'aan akhrinayay,baa la yidhi: War waa sidee libaaxyadii reeraha soo galee?! Suu ye,hadee maxaan sameeyaa?!! Alamtaraan ku akhrin jiray,Alamtarana soo dhaafye?!Caaqilkiina wuxuu keenay talo labadii libaax isku dileenSidii baana lagu boqray.
Sheekadana waxay wadaadka ka bixinaysaa inuusan geesinimo iyo caqlitoona meesha ku haynnin,taladiisuna dhaafsanayn,asmayn iyo duco la akhriyo.se door ragannimo lahayn.
Tusaalooyinkaa iyo kuwo kale oo jiraba waxay muujinayaan dareenka guud ahaan wadaad laga haystay,oo iskaba daa in talo beel loo dhiibo e,noloshii kale ayaanba la tirsan jirin,waxaasina ma ahayn oo keliya wax ka soo jeeda jahliga diinta lagaga sugnaa ,ee waxaa jiray qorshe culimada magaca lagaga dilayay,si aysan nolosha wax door ah ugu yeelan. Wayna dhici kartaa in dad yidhahdaan:War muxuu ninku sidaa u leeyahay soo kii wadaadada la sharfi jiray ee inta xoolaha loo qalo,diinka noo akhriya la odhan jiray.?! Markay ilmaha aflixiyaan,ama xer kiciyaanna loo xoolo goyn jiray?! Markay wax mehershaan ama dhaxal qaybiyaan gunno la siin jiray?! Xaggee ninka laga qaniinay?! Waxaas oo idil ma diidani, mana inkarsani inay jireen dad si xun u dhaqma,magaca diintana ku qaraabta, ama inta diinta wax ka barta si aan haboonayn u matala.
Taa bedelkeeda waxaa jiray dad diinta si dhab ah u bartay oo intii karaankooda ah ku dhaqmi jiray,diintuna ay daacad ka ahayd.dantuse ku bixisay in waxa ay soo barteen ku ujuuro ka qaataan,isla markaan dhawrsanaa oo sharaf iyo xormaba lahaa.
Sidoo kale, culimada waa la maamuusi jiray,laakiin, ma ahayn in derajadii diintu siisay loo oggolaa,taas oo ahayd in hoggaaminta bulshada iyaga looga dambeeyo,mansabka oday dhaqmeedyada jaahiliinta ah loo dhiibtayna inta laga

wareejiyo la yidhaahdo:War caalim hebel baa aqoon diineed lehe talada reerka isaga ha looga dambeeyo,xormaynta culimada ee runta ahna waa taas, iyaduna bulshada dhexdeeda ma dhacdo ayay ka ahayd.
Xushmada culimada loo hayayna waxay ahayd uun taa aynu soo sgeenay ee ahayd xoolo goyn iyo guno la siiyo. Diintuna sideeduba way ka weyn tahay wax xoolo iyo aduunyo lagu raadsado,shaqada culimaduna waa dadka oo diinta la baro oo lagu hoggaamiyo,taana nolosha laguma hayn.Hal mar ayay soo baxday,oo ahaa xilligii Sayidka,isagana waxaa ku goobtay oo halgankiisii dhiciseeyay gumaysteyaashii iyo madaxdii qabiillada ..
Gaaladuna markay raggoodii talada u dhiibteen,isla sidii iyo ka daran baa doorkii culimada cidhiidhi loo sii geliyay,oo bulshadii iyo iyagii aad iyo aad loo kala fogeeyay.
Waxaana lagu yidhi:[ Culimoy dadka axkaanta cibaadooyinka u akhriya,ilmaha qur'aan bara,qoysaska isku nikaaxa,dhaxalka qaybiya,ciddii masjidka idiinku timaadana wacdiya.
Nolosha kale ee ummadase wax shaqo ah kuma lihidin.Bulshaduna si kasta qawaaniinta kufriga ha u raacdo,meeshay doontanna ha marto, haday wacdiga iyo qalbi jilcinta idinka dhegeystaan hagaag, hadii kalese iyaga iyo rabbigood.]
Iyadoo culimadii heerkaa la gaadhsiiyay,oo shaqadoodii ahayd inay umada diinta baraan oo ku xukumaan laga dhaariyay baa la leeyahay culimadii waa la xurmeeyay.!!!
waxay hadaba su'aasha tahay sidee culimadu xilka iyo waajibka saaran u gudan karaan?
Doorkii iyo kaalintii diintu u xilsaartayna uga soo dhalaalaan?.

## SIDEE CULIMADU DOORkOODA U GUDAN KARAAN?

Waynu soo aragnay doorka culimada laga sugayo iyo sababta ka fogaysay hoggaaminta umada, hadaba sidee culimadu inta talada u qabtaan xilkooda u gudan karaan?
Intaynaan su'asha ka jawaabin, waa inaynu isla aragno:Maxaa caqabado ah oo culimada ka hortaagan gudashada xilkaa?.Sideese looga gudbi karaa?
Runtiina turun-turrooyinkla iyo caqabadaha culimada ku hor-gudban ee gudashada xilkooda kaga teedsan way badan yihiin in laga tillaabsadan ma aha arrin fudud ,ee dhib iyo rafaad badan baa ka sokeeya.
Caqabadahaasina, inkasta oo isku xidhan yihiin aadna isu saameeyaan,hadana waxaan u kala saari karraa kuwo daakhili ah iyo kuwo khaariji ah.:

1) **Caqabadaha daakhiliga ah:**

a) Iyadoo culimo badan aysan garansiisnayn doorka ay nolosha ku leeyihiin,aysanna

dareensanayn xilka Alle saaray ee ah bedbaadinta ummada,taana waxay salka ku haysaa aragtidii khaldanayd ee culimada laga haystay oo inta iyaga laftooda ku duxday is dhiibay oo muskii cidhiidhyoona ee lagu ooday iska qabatimay,heer la dareemi waayay qiimaha cilmiga diinta ee Alle ugu deeqay

b) Iyadoo culimadu aanay weli ka soo dhex bixin halyey dhan kasta ka dhisan oo kulansaday tilmaamihii hoggaamiye diineed ee dhaqdhaqaaqyada islaamiga midayn lahaa

Waxaana saaxada dacwada ka muuqata in baahi daran loo qabo caqliyad wax aqoon leh,

xikmad badan,wax hindista,duruufaha maanta taaganna la jaan qaadi karta.

c) Iyadoo dedaallo la wada,ayaa hadana culimada aysan u xadidnayn hadafka guud (Istratijiyo) ee lagu duulayo iyo khidhooyinkii(Taktika)dii lagu gaadhi lahaa toona, hawlkasta oo la doono in la hirgeliyana labadaas arrimood la’aantoodn cidhibteedu waxay noqon guul darro iyo luggooyo, waxaana dhab ah inayba xarakooyinku ku socdaan:[ aynu hawsha wadno hadba waxa aan la kulannona aan ka war dhawrno].

c) Iyadoo wacyiga culimadu u leeyihiin xaaladaha lala dhaqmayo uu aad u hooseeya.

Masalan,waa maxay cudurka ugu khatarsan ee umada naafeeyay? Ilaa intee gaadhsiisan yahay fogaanta ay umadu diinta ka fog tahay? Waase maxay dariiqada ugu haboon ee lagu dabiibi karo? Waayo cida la is-hayo ? Maxaa la isku haystaa? Cadawgu muxuu naga maaggan yahay,muxuuse nala maaggan yahay? Siyaasiyan maxaa la hor-marin karaa ama la dib dhigan karaa? Maxaa gor-gortan geli karin,maxaase indhaha laga laaban karaa?. Wacyigaa hooseeya wuxuu keenay in si joogto ah loola kulmo guul darrooyin aan yarayn,iyo in dabinnada cadawga si sahlan loogu daato

d) Iyadoo ay aad u muuqato waayo arag la’aan iyo khibrad xumo culimada ka haysata habka bulsho loo unko loo tarbiyeeyo,iyo qaabka dawlad loo maareeyo, taana waxaa u sabab ah hawlahoodi hore oo ku koobnaa cashar la akhriyo iyo muxaadaro la jeediyo.

Xaruumihii tacliinta ee ay wax ku soo barteenna ma ahayn kuwo lagu soo baray siyaabaha hawlahaas loo gqabto ama xilalkaa loo guto,

e) Iyadoo jahliga diinta lagaga sugan yahay uu nolosha bulshada wada daboolay,in badan oo asaasyada diinta ka mid ahna aanay cadayn,taana waxay keentay in dadkii ay isaga qasmaan islaamnimadii iyo gaalnimadii, oo inta dhaqamo kala cayn-cayn ah oo gaalnimo ah la dhex batalaqsado la isu haysto in islaamnimo saafi ah lagu dhaqmayo.

f) Iyadoo umadii si kasta loo salkacshay,oo nabad iyo deganaashoba looga

dhaariyay wahan iyo wareerna qoorta loo sudhay,dhulkoodiina la dhaxal wareejiyay,iyagiina qaarna gaaladu daabulatay, intii hadhayna si ay u qaxaan gudaha lagu gubay,culimaduna culayska saaran ee ah bedbaadinta umada waxaa u dheer duruufahaas bulshada haysta oo dhinac ka gubaya,ileen bulshada ayay ka mid yihiine..

g) Iyadoo duruufaha dhaqaale, ee umada haysta aad u ba’an yihiin, taasoo fududaysay in gaaladu si kasta uga faa’iidaystaan,ha noqoto in dhulal gaalo loo dhoofiyo,ama basaasnimo loo adeejisto ama in dhaqan xumo noockasta leh lagu riixo.

g) Iyadoo ay aad u yar yihiin awoodihii iyo tabartii lagu wajihi lahaa oo looga hortegi lahaa duruufaha isduls-aaran ee daakhili iyo khaarijiba leh.

**2) Caqabadaha khaarijiga ah:**

a) Iyadoo damaca loo qabo in Somaliya la liqo uu aad u weyn yahay.colaado diin,dano dhaqaale iyo siday mandhiqadan istratiji u tahayna waxay sii xoojiyeen cadaawadda ummadan loo qabo.

b) Iyadoo dalka Somalid intiisa badan ay ku hareesan yihiin dalalka gaalada ee Itobiya iyo Kenya,oo aysan jirin dalal islaam ah oo deris la ah oo gurmad iyo hiil ka soo gaadho.

c) Iyadoo gaaladu dareensan yihiin in islaamku yahay derbi adag oo ka horjoogsan kara danahooda hunguri xumada ku dhisan,waxay dedaal aan yarayn ku bixiyaan, inay ummada iyo diinteeda kala fogeeyaan,iyagoo ka abbaraya cidhibtirka culimada.

d) Iyadoo gaaladii ay si kasta u hanteen maskaxdii iyo maankii umada, kuna soo daayay warbaahin dockasta looga furay,ururro magacyo kala duduwan huwan,oo Somali iyo qayrkoodba lehna lagu soo fatahay,geeskasta oo dalka ka mid ahna sida mulaca u dhex muluqlaynaya, shaqooyinka ugu badan ee ay qabtaana yihiin basaasid,in qabiilooyinka la isku laayo,fasaadinta nolosha iyo umada dhankasta laga gubo, lana qixiyo oo la daabulo.

Caqbadahaas iyo kuwo kale ayaa culimada kaga gudban inay ka libkeenaan hadafka laga sugayo.Laakiin gaadhista yoolkaas mar haduusan mustaxiila ahayn, sidii caqabadahaas looga gudbi lahaana uu dhib iyo rafaad la maro keliya ka sokeeyo, culimada waxay ku khasban yihiin inay dhibkaas u badheedhaan, qaxarkastana ha laga mutee ay caqabadahaas derderaan oo jidhaan .

Nebigeenuna-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-wuxuu inoo sheegay in rususha Alle –naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-ahaayeen dadka dhibka adduun ee ugu daran la baday,diinta darteedna qaxar iyo kadeed loo soo marshay.Hawsha culimada laga sugayana waa tii nebiyada Alle loo soo dhibi jiray,weligeedna ma dhicin in anbiyadu dacwadoodii hawl yaraan ku soo gutaan.Iyagoo waxaas oo kadeed ah la baday ayay dhibkaa niyad adag iyo qalbi aan jixin-jix aqoon ku qaabili jirern, ilaa ugu dambaystii Alle ku guuleeyay

gudashada xilkoodii,taasina waa sunno soo jireen ah.
Marka in dhib loo maro hirgelinta diinta waa xeer aan isbedelin oo Alle weligii nolosha aadenaha ku soo wedi jiray, ee ma aha arrin cusub oo ugub ah ah.
Allena aayado badan ayuu xaqiiqadaas,weliba kaga warramay wixii qaxar iyo kadeed ahaa ee la soo mariyay nebiyadii Alle-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- iyo dadkii xaqa ku raacay,waxaana aayadahaas ka mid ah:
1) {Runtii rusul badan baa hortaa la beeniyay beenintii iyo dhibkii loo gaystayna way u adkaysteen ilaa hiilkayagii uga yimaado,kaasina waa xeer rabi oo aanay cidi beddelayn waxaana marag kuugu ah wararkii rusushii hore ee kuu yimid}Al-ncaam(34).
Aayadani iyadoo sabar siinaysa nebigeennii-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-waxay cadaynaysaa in dhibka haystay oo kale nebiyadii horeba la soo mariyay,oo adkaysteen libta iyo guushuna iyaga u dambaysay,taasina aysan nebiyadii hore iyo isaga ku koobnayn, se ay tahay xeer joogto ah oo Alle khalqigiisa ku maamulo,oo cidkastoo xaqa raacda una adkaysata Alle wuu u gargaari oo libtuu siini.
2) {Dadku ma waxay moodeen in markay yidhaahdaan waan rumaynay la iska daynayo iyagoo aan la ibtilayn, dhabtiiye kuwii iyaga ka horreeyay waanu jarrabnay Allena wuu ogaan kuwa runta sheegay wuuna ogaan kuwa beenta sheegay} Cankabuut (2,3).
Aayadahan waxay muujinayaan inay sunno rabi tahay in dadka iimaanka sheegta dhib iyo jarrab la marsho, si loo kala saaro kuwa rumayntay sheegteen ay dhab ka tahay, iyo kuwa aanay run ka ahayn, Allena wuxuu ka cabiray in uu ogaanayo, rabina waxba kama qarsoona ee waxaa loo jeedaa in dadka qof walba uu xaqiiqadiisa kashifayo, si qof waliba waxa uu sameeyay ee uu isba marag ka yahay loogula xisaabtamo,Allena waxay adoomadiisa sameeyaan ayuu kula xisaabtamaaye uma qabsado wax uu keligii ka ogyahay, taana waa cadaaladiisa iyo fadligiisa.
3) {Mise waxaad u malayseen in aad jannada iska galaysaan iyadoo uusan Alle ogaan kuwiina jihaada, uusanna ogaan kuwa sabray}.Aala-cimraan(142).
Guul darradii saxaabada ka soo gaadhay dagaalkii Uxud ka dib ayuu Alle sheegay in sababta dhibka loo mariyay ay ahayd isagoo doonayay inuu kashifo oo bannaanka keeno dadka diintu dhab ka tahay,ee sabraya,ee inta diinta naf iyo maalba u huraan Alle dartii u jihaadaya,iyo in gooni loo sooco fool xumadoodana ardaaga la soo dhigo kuwa diinta iska sheegta, se aan diyaar u ahayn in darteed loo dhibo ama xagtin ku soo gaadho.
4) {Mise waxaad moodeen in aad jannada iska gelaysaan iyadoo aanay idin qabsan qaxar la mid ah kii qabsaday dadkii idinka horreeyay,waxaa la dhadhan siiyay colaado iyo qaxar, cabsi darteedna arladaa la gilgilatay;heer ay hiilkii Alle dherersadeen,ayna rasuulkii Alle iyo kuwii xaqa la rumeeyay yidhaahdeen:

War goormuu nasrigii Alle iman ?!!war hooy! nasrigii Alle waa dhawyahay}Al-baqra (214). Wuxuu Alle aayadan mu'miniinta ugu sheegay in dariiqa dacwadu dheer yahay,inta la sii hayana qaxar iyo rafaadba la mudanayo, hase ahaatee haday adkastaan libta iyo guushu iyagu yeelan doonaan,gaaladuna guuldarraysanayaan.

1) {Badanaa inta nebiyo ay ka garab dagaaleen rag ribbiyiin ah oo badan,marnabana dhibkii Alle dartii u gaadhay kuma niyad jabin,mana tabar dhigin ismana dullayn,oo isma dhiibin,ee way adkaysteen. Allena wuu jecel yahay dadka dartii u sabra}Aal-cimran (146). Imaam Xasan Al-basri(aun),ribbiyiinta wuxuu ku fasiray culimada iyo fuqahada.

Aayadanna waxay ina tusaysaa in dhaqanka dadka diinta Alle u jihaadaya aysan ahayn inay niyad jabaan oo is dhiibaan,heer kastoo ay gaadho waxyeellada gaaladu u gaysato.

Nusuusta aan soo dareerinay iyo kuwo kaleba waxay sugayaan in hadafka ay culimadu hiigsanayaan uusan ahayn ku uu ka sokeyo dariiq qadiifado lagu goglay, hareerahana ubax lagaga wadhay oo lagu qurxiyay,iyo beero lagu lugo baxsado oo lagu raaxaysto.

Se uu ka sokeeyo dhiig badan oo daata,naf aan tiro lahayn oo qudh baxda,xabsi lagu abaado, iyadoo inta cadaw loo gacan galo si kasta loo muto gaajo iyo ciil lala golongolo

Waxaas oo dhib ah marka la maro waxaa soo baxaya dadka ay diintu qiimaha la leedahay, ehelkana u ah in ammaanada culus ee koryeelidda diinta lagu halleeyo .

Hadaba,waxaa culimada laga sugaa waa iyagoo u banbaxa isuna diyaarsha siday caqabadahaa uga gudbi lahaayeen,amaanada inta xifdiyaan,umada u bedbaadin lahaayeen

Hadiise ay dhacdo in takaaliifta ka ratibmays koryeelida diinta iyo dhibaatooyinka ka dhalanaya la herdanka gaalada loo badheedhi waayo, waxaa dhacaysa in umadii mas'uulka laga ahaa –waa sida dhacdaye- gaalo u gacan gasho,oo ayaan darro iyo halaag u horseedaan, innagana labo kala daran isu keen qabsadaan :

a) In Alle innaga jeedsado,naga beddel qaato, diintiisana uu dad kale u doorto,kuwaa oo innaga khayr badan,waana sidii saxaabadii qaarkood loogu hanjabay markay jihaadkii ka caga-taagleeyeen sida Alle u yidhi:{Hadii aad jeedsataan,Alle qolo kale ayuu idin ku beddeli,markaas baysan idinkoo kale ah noqonayn }Maxamed(38).

b) In Alle aakhiro maxkamad ina saaro innagoo nalugu eedaynayo inaan ammaanadii nala saaray daycnay, kadibna nala mariyo ciqaab aan loo adkaysan karin, si kastana uga xanuun badan dhibkii aduunyada ee aan ka cabsannay,waana la wada ogyahay goodiga faraha badan ee ku yimid dayicida

xilka dacwo iyo u halgamida diinta.
Waana inaan ogaanno in waxa ugu badan ee munaafiqiinta ceebtooda bannaanka soo dhigi jiray ay ahaayeen sida ay koryeelidda diinta iyo jihaadka uga qayb qaadan waayi jireen.

## TALOOYIN CULIMADA KU WAJAHAN

Marka culimada lagu laasiminayo inay talada umada qabtaan, danta laga leeyahay waxaa weeye in awoodaa xukun ay u adeegsadaan dhaqan gelinta shareecada Alle.sababtoo ah,hawshaasi waa shaqo dawladeed,oo dedaal fardi bixiyo aan ku qabsoo-
-mi Karin,ileen diintu waa nidaam nololeed dhammaystiran oo nolosha dhan xukun u dejiyay,una baahan dawlad qiyamtiisa iyo axkaamtiisaba u taagan oo meel marisa, awooddaas shareecada fulinaysana fiqiga islaamku wuxuu u yaqaan {khilaafo} la’aanteedna diintu way baylihi,nolosha umadana way fasaadi.Waana tii Alleuu nebiga –naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-uu farayay inuu ka baryo inuu siiyo awood xukun (Suldhaan)oo uu hirgelinta diinta u kaalmaysto..(Fiiri Al-isra 80).
Waana taas arrinta inta badan dareenka culimada ka maqan, keentana inaysan qorshahaba ku darsan sidii gacan ku dhigidda hogaanka nolosha loogu hawl geli lahaa, si culimadu sidii habboonayd diinta nolosha ugu dhaqaan,iyagoon gaalo iyo acwaanteeda ka tuugin oo ka baryin hirgelinta iyo dhabbaqidda sharciga Alle.
Sidaa darteed waa lagama maarmaan in yoolka ay culimadu ku duulayaan uu ahaado yagleelidda dawladdii diinta fulin lahayd, iyadoo ay weliba daruuri tahay in hadafkaa iyo qorshihii lagu gaadhi lahaaba ay caddaadaan,oo haba yaraatee aanu mugdi ku jirin.
Hadaba,waxaan halkan ku soo gudbinayaa qodobbo aan leeyahay bandhigiddedu qayb bay ka qaadan xaqiijinta hadafkaa iyo barnaamijkii lagu taabbo gelin lahaa.
Kuwaasoo u baahan inay culimadu isku taxluujiyaan sidii loo xaqiijin lahaa,kana kooban
ilaa tobankan qodob ee soo socda:

### 1) IN LA HELO WADAJIR IYO MIDNIMO :

Markii nebigeenna-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- dawladii islaamka

ahayd uu Mediina ka unkay, wuxuu Alle mu'miniinta u sheegay ahmiyada ay midnimada iyo isku duubnida u leedahay jiritaanka muslimiinta iyo dawladooda,wuxuuna yidhi:

{Kuwa kufriyayna qaarba qaarka kale ayay sokeeye iyo tol u yihiin, idinkuna hadaydaan sidaa yeelin waxaa arlada ka dhacaya fidno iyo fasaad aad u weyn} Anfaal(73).

Aayadan wuxuu Alle mu'miniinta ku dhiirrinayaa inay dareemaan inay tol iyo xigaal isu yihiin,dabeedna isku duubmaan, taasoo suurta gelinaysa inay xoog yeeshaan oo hoggaanka nolosha taabaan.Sidoo kale waxaa mu'miniinta looga digayaa inay is khilaafaan oo kala tagaan,taas oo ay ku tabar gabayaan,ayna keensanayso in gaaladu hogganka gacanta ku dhigaan,ay inta dawlad la'aan idinku dhacdo,diintii baylahdo,dadkii

diinta laga halleeyo,arladana inta xuduudda Alle lagu tunto ay isla fasaaddo oo gubato.

Mu'miniintiina intay taladaa Alle ee wanaagsan fuliyeen baa waxay isugu duubmeen si aan la sawiri karin, heer arrinkoodu gaadhay in iyagoo tiro yar ay ka wada goojiyaan oo ka baqaan mushrikiintii Jasiiradda Carabta oo aad uga tiro badnaa. .

Hadaba, dhibabka ugu waaweyn ee haysta culimada iyo xarakooyinka,hadafkoodana la gaadhi la'yihiin waxaa ka mid ah kala qaybsanaanta iyaga u dhaxaysa.

Iyadoo khilaafka iyo kala taggu dhaco xilli cadawgu kala daadsan yahay baaba dhibkiisa loo adkaysan karine, maxaad u malayn dhibka iyo belada lala kulmayo marka la kala tago oo qayba meel istaagto,iyadoo cadawgoodii, kii gudaha,kuwii dalalka deriska iyo kuwii

caalamigaba u midaysan yahay,iyagoon la kala soocinna shiishka la wada saarayo.

Runtii waa dhib laxaw badan,ahna xaaladduu ka gam'i waayay Cali xiirane:ee lahaa:

1) Ma haaraamay culimadeenna------- iyo habacsanaantooda
2) Maxaa kala horeeyee------------------iyaga horinba meel geeyay
3) Yaa kala hortaagane-------------------ku yidhi hiilo isu diida
4) Hibadii ilaah siiyay-------------------yaa nacasyo hoos geeyay

Si dhibkaa loo xalliyona waxaa waajib ah in waqti badan lagu bixiyo sidii daawo iyo loogu heli lahaa cudurkaa culimada iyo xarakooyinkaba naafeeyay,kana midka ah sababaha ugu waaweyn ee cadawgeennu innooga il helay ee aan ugu jabnay.

Waana dhab in hadii la dabiibi lahaa in nolosha ummadu ay weji kale yeelan lahayd.

Hadiise la dawayn waayana ay xaladdu ka sii darayso.

Mar hadii quwadda musliiminta iyo cisigoodu ku jiraan wadajirka,sidee midnimadaa loo
xaqiijin karaa?.Intaannan su'aashan ka jawaabin aan is-hordhigno arrimo waaqaca ka jira oo duruufo kala duwan keeneen,oo mudan in aad loo tixgelyo,ahna:

1) Jahliga iyo tarbiyo xumada nolosha cammimay waxay sababeen in culimo badan iyo xarakooyinba aysan sidii la rabay uga xoroobin hawo,ayna ka dahsoomaan anshaxa iyo akhlaaqda shareecadu u jidaysay inay muslimiinta walaalaha ah dhex maraan.

2) Mar hadii xaruumo tacliimeed oo kala duwan wax laga soo bartay,waxaa saaxada isugu yimid culimo ninba meel gaara ka soo biyo cabbay.ma fududa marka inay arrimo badan isku si u arkaan ama isku mawqif ka istaagaan.

3) Iyadoo uu jiro dad badan oo inta baraarugeen diinta u soo noqday,baa waxaa bar-bar socda dulmiga xad dhaafka ah ee gaaladu muslimiinta ku hayso.taana waxay dhalisay in dad badan ninba qaabkuu u arkayay inuu diinta ugu hiilin karo u hawl galay.

2) Iyadoo cadawga islaamka ay aad kurbo ugu hayso ummadan diinteeda u noqonaysa, taana ay wedkooda u arkaan, baa hay'adahooda sirdoonku dedaal aan yarayn ku bixiyaan siday culimada iyo xarakooyinka dad ugu yeelan lahaayeen.kuwaa oo ugu qaabilsan uruurinta xogaha iyo asraarta,kala dilidda iyo iska horkeenida islaamyiinta,iyo inay juhdigooda marin habaabiyaan, hadafkoodii meel aan ahaynna madaxa u saaraan.

Arrimahaas iyo kuwo kaleba waxay sababeen inay saaxada ka muuqdaan culimo iyo xarakooyin u wada muuqda inay isku hadaf yihiin,hadan kala socda oo qolaba dhan wax u wadato, iskaashiga u dhexeeyana yar tahay.

Waxaa marka haboon in mushkiladdan xal loo raadiyo,iyadoo xikmad iyo farsamooyin xeeldheer la adeegsanayana la isku dhabar jebiyo sidii culimada iyo xarakooyinka loo midayn lahaa oo cududdooda la isugu keeni lahaa,si iyagoo wadajira hadafkooda ugu jihaysan lahaayeen, cadawgoodana uga wada hortagaan oo isaga caabbiyaan.

Si midayntaa loo xaqiijiyo, waxaa haboon in la qaato tallaabooyinkan soo socda:

a) In marwalba laga shanqariyo ahmiyada ay midnimadu leedahay iyo cawaaqib xumada khilaafka iyo kala tagga,goor kastana la isku dul akhriyo nusuusta arrintaa ka hadasha.lalana yimaado dhaqannada culimada iyo xarakooyinkaba isu soo dhowaynaya ee is jeclaysiinaya. b) In mar walba niyad wanaag iyo kalsooni la isu muujiyo,lana is dareensiiyo in walaalo la yahay oo aan la kala maarmin,caalimkuna dareensanaado in caalimka kale uu dhinaciisa dhufays kaga jiro,hadii la waayona halkiisii qalaallaanayso.

Sidoo kale,xarako kasta inay istusto in walaasheeda kale ay hayso shaqo aysan

iyadu u maaro hayn,oo hadaysan jirin booskeedu madhanaan lahaa, taasoo macneheedu yahay in aan is dugsanno,is weheshado, isuna aragno inaan la kala maarmin  qolo walbana umada dhinaceeda ka hagaajinayso, fasaadkana kala dirirayso,saa darteed la is kaalmaysto.
c) Si khilaaf iyo kala dhimasho looga bedbaado waa in la kala saaro shakhsiga iyo mawoqi- -fkiisa,hadafkuna ahaado bandhigida xaqa iyo  cadaynta baadhilka, hadaysan baahi sharci keeninna aan  sinabana la isugu mashquulin ka hadlida shakhsiyaadka, haday dhacdana aan cadaalada laga tegin,aanna la ceebayn qofka khaladadaadkiisa la saxayo.
Hana  la ogaado in insaanku gefka iyo meel ka dhaca uu ina-aadane u yahay,Se la doonayo haduu dembaabo inuu tawbad keeno.Allena qofka muslimka ah wuu sharfay,marka waa  waajib in xormadiisa la dhawro,culimada diinta xambaarsanna wayba ka sii xag jiraan oo hilibkoodu waa sun,sababtoo ah marka culimada la dacaayadeeyo waxaa dhacaysa in hanuunka aan laga qaadan,taasoo noqonaysa dagaal diinta lagu qaaday
d) Waa in la kala saaro ra'yi la isku khilaafo iyo quluubta oo kala dhimata.
 Mar hadii aqoonta,garashada iyo fekerkaba lagu kala duwan yahay, sinaba looma hurayo in arrimaha qaarkood lagu kala ra'yi  gedisnaado.Laakiin waxaa waajib ah in la iska ilaaliyo in taasi horseedo  is nac iyo quluubtoo kala dhimata.Maxaa yeelay, Alle wuxuu ina faray inaan wada jirro,wax kasta oo dhacana walaalo la yahay oo aan la kala tegin.siduu u yidhi:{Alle iyo rasuulkiisana adheeca,hana is qab-qabsannina, taana waxaay keeni inaad tabar yaraysaan,dabeedna ay quwaadiinna iyo dawladdiinu baaba'do sabrana ,maxaa yeelay Alle kuwa sabra ayuu la jiraaye}.Anfaal(46).
Aayadan wuxuu Alle mu'miniinta ugu sheegayaa sababaha ugu waaweyn ee nasriga lagu helayo,oo ah in Alle iyo rasuulka la adheeco,iyadoo la is faray raacida amarrada diinta, ayaa waxaa si gaar ah loo tilmaamay labo arrin oo ah:
a) In laga fogaado wax walba oo mu'miniinta kala dilaya,keenayana inay isqab-qabsadaan, taasoo is khilaaf , kala tegid iyo guul darro dabada ku wadata.
b) In loo sabro arrimo badan oo wada dhaqanka muslimiinta iyo wejihida cadawgu ka mid yihiin. Aayad kalena wuxuu Alle ku yidhi:{Hana la mid noqonnina kuwii kala tegay ee iskhilaafay markay xujooyinka cad-cad u yimaadeen kadib,taasoo ku timid  dulmi ay iyagu  isku sameeyeen}.Aala-cira (105).Dulmiga ay isku sameeyeenna labo qaab ayuu ku imanayay,inay iyagu isku xad gudbayeen iyo inay xuduudda Alle dayacayeen.
 Waxaa marka lagu khasban yahay in xuduudda Alle si kasta loo dhawro,qofna uusan qof kale xuquuqdiisa ku tuman.Waana in la isula yimaado qalbi furan iyo laab waasac ah. Dadkeennii hore ee wanaagsanaana iyagoo arrimo ku kala aragti duwanaa ayay walaalo ahaayeen oo wada jireen,sida Imaam Ibnul-Qayim (AUN) u leeyahay:{Dadka ehlu-iimaanka ah axkaamta qaarkeed way isku qaban

karaan,taasna iimaanka kagama baxayaan, saxaabaduna- iyagoo ahaa dadka mu'miniinta u sarreeyay,umadana ugu iimaan weynaa ayay isku khilaafeen axkaamta mas'alooyin badan},()

e) Waa in hoosta laga xarriiqo inaysan jirin belaayo gaalada uga khatarsan oo uga daran wadajirka muslimiinta iyo midaynta cududdooda,si ay taa uga hortagaanna, khubaradooda fadhiya xaruumaha cilmi baarista waxay ku taliyaan in laga shaqeeyo sidii muslimiinta guud ahaan,iyo gaar ahaan culimada iyo xarakooyinka loo kala dili lahaa.

Hadaba iyagoo hey'adahooda wax basaasa taladaa ka shidaal qaadanaya ayay qaabab kala gedisan bulshada ugu dhex jiraan,laakiin marinnada ugu muhiimsan ee ay islaamiyiinta ka soo galaan ay yihiin hey'adaha sirdoonka ee dalalka Carabta,kuwa Islaamiyiinta Somalida loo soo marana ay yihiin kuwa Masaarida iyo kuwa Sacuudiga,iyagoo ka faa-iidaysanaya kalsoonida aan loo meel dayin ee islimiyiinta Somalidu ay siiyaan cidkasta oo islaamnimo isugu muujisa.Hadaba si taa looga hortago waa in la sameeyo dallad culimada iyo xarakoo- -yinka midaysa,loona dhiso guurti aqoon diineed oo dhab ah leh,waaqaca iyo surimada siyaasadeedna u dhuun daloola,kuwaas oo hawlaha dacwada oo dhan loola noqdo.

f) Waa in culimadu iyo xarakooyinku ogaadaan in diintu dadka ka dhaxayso, aanayna jirin cid dacwada gaar u leh,isla markaana lala socdo in wixii qolo ku tallaabsato muslimiinta dhan saamanayso,sidaadarteed,waa in wixii go’aanno iyo tallaabooyin la qaadanayo laga wada tashadaa.oo xarakona aysan isaga dhaqaaqin camal saamayntiisu aanu iyada ku ekaan doonin.Marka waa in la isku kalsoonado oo arrimaha masiiriga ah laga wada tashado.Wax kastana ha laga hormariyo isku duubnida iyo wadjirka oo la'aantooda aanay waxba kala soconayn, se jab iyo guuldarro la mudanayo.

Hadiise ay dhacdo in nusuusta badan ee wadajirka ina fartay dhegaha laga furaysto,waxaa imanaysa oo la sugaaba waa in sida sunnada ah ciqaab daran inna qabsanayso.Maxaa yeelay,waxa keliya ee keeni kara in nusuustaa aan lagu camalfalin oo aan la wadajirin, waa iyadoo hawada laga soo fuqi la' yahay,nin walba oo xoogaa aqoon ah helayna isu arko inuu walaalihii ka deeqtoomo,lana oggolayn in la isu tanaasulo.

## 2) IN LA YEESHO AQOON DIINEED OO QOTO-DHEER

Waxaa lagama maarmaan ah in aqoon ballaadhan oo qoto dheer diinta loo yeesho. Maadaama arrimo badan oo diinta ka mid ah mugdi ku jiraanna,waxyaalaha fahamka khaldan laga haysto waxaa ka mid ah cilmiga sharciga,una baahan in fiiro loogu noqdo.

Sababtoo ah,cilmiga kolka la sheego waxa dad badan u sawirmi barashada axkaamta,gaar
ahaan qaabka fuqahadu u qoreen,deraasaynta culuumta axaadiista,dersidda kutubta fikriga ah iyo luqada carabiga. Laakiin waxaanu wada ognahay sida muddadii dheerayd ee dacwadu Maka ka socotay ay u soo degeen suuradaha ugu badan ee qur'aanka,iyadoo waxa ugu weyn ee ay falanqeynayeen ahayd arrimaha iimaanka tiirarka u ah,sida ilaahni--imada Alle, sida cidkasta oo Alle ka soo hadha aysan ilaahnimo xaq ugu lahayn,xaqnim-
-ada rasuulnimada nebi Maxamed-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-,rumaynta aakhiro iyo waxyaalaha la xidhiidha,akhlaaqda mu'miniinta iwm.Dhammaanna waa asaasyada iyoculuumta diinta.

Sidoo kale xadiiskii Jibriil wuxuu ina tusayaa in diintu ka kooban tahay iimaanka, islaamka iyo ixsaanka,markay noqoto in cilmi loo qasdona, waa in dersidda iyo barashada saddexdaa loo hormariyo,oo la iska dhiso.Irridka ugu muhiimsan ee barashadooda laga gelayana waa iyadoo qur'aanka toos loo abbaaro.Sababtoo ah waxa maqan ee la la'yahay noloshuna la gubanayso ma aha oo keliya in aan la aqoon fiqiga ama culuumta xadiiska ee kala duduwan ama xalaasha iyo xaaraanta oo aan la kala garanayn.

Waxa maqani waa aqoonta la rabo in loo yeesho asaasyada diinta,ee umada badankeeda uu ka yahay aragtiyo qallallan oo cilmi dhegood ahaan loo haysto,se aan quluubta si dhab ah ugu daadegin, dareenka dadkana aan si qoto dheer u gelin,saa darted aan nolosha ku lahayn saamayntii la doonayay ee iimaanka dhabta ah ku lammaanaan jirtay.

Bal u fiirso cilmiga asaasyada diinta iyo tiirarka iimaanka ah markuu quluubta dadka ku milmay siduu saamayn weyn oo noloshooda beddeshay ugu sameeyay,jeer ay dartii dhibkasta ugu badheedheen oo ugu adkaysteen.Bal eeg Asxaab-ul-ukhduudkii markay xaqa rumeeyeen godadka lagu gubay ee suurada Al-buruuj ka sheekaysay.Bal fiiri dhallintii Asxaabul-kahaf ee suurada Al-kahaf ka sheekaysay.Bal dib u raac-raac taariikhdii rusushii Alle-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-iyo dadkii raacay iyo waxa kala qabsaday iyaga iyo qoomamkoodii.

Waxaas oo idil waxay muujinayaan doorka iimaanka ku leeyahay nolosha umada,isaga ayaana gundhig u ah cilmiga diinta. Hadaba,waa in xaqiiqada iimaanka si qoto dheer loo derso,dedaalna lagu bixiyo sidii loo beeri lahaa oo inta la xoojiyo la soo saaro midhihii cilmiga naafica ah laga guran jiray, kaas oo ah inay soo baxaan umad rabbaani ah oo Alle u go'day,kulansatay aqoon iyo aragti-dheri,iimaankeeduna buuraha ka culus yihiin akhlaaqdeedana lagu soo xusuusto salafkii saalixa ahaa,saahidiin ah,oo diinta Alle ay lafaha iyo dhuuxa ka gashay,aad u dareensan in noloshoodu diinta ku xiran tahay,in laga fogeeyana ay geeri ka xigsadaan, xiisaha iyo qiirada ay diinta u hayaan darteedna diyaar u

ah in waxkasta ha ku qaadatee hirgelinta diinta ay sida ugu habboon uga dhabeeyaan.

Waa in marka ahmiyad gaar ah la siiyo waxkastana laga hormariyo barashada cilmiga iimaanka beeraya.weliba mar hadii culamadu u tafo xaydatay dhisidda umada iyo yagleelidda dawlad islaam ah,waxaa muhim ah in la ogaado waxa umada sida wanaagsan u dhisi kara ee meel ka soo saaraya inuu iimaanka yahay.Marka umada iimaanka si fiican looga dhiso ayay wax u taraysaa barashada axkaanta iyo culuumta kaleba,sida ka cad hab-dhaqanka dadkii hore,ee markasta la soo taagnaa xiisaha ay u qabeen inay kala ogaadaan waxa Alle jecel yahay iyo waxa uu ka cadhoodo.Taasoo ku timid iimaankooda oo heer aad u sarreeya gaadhay,halka maanta ay muuqato,dad nusuusta aqoon u leh,se meel Alle ogyahay heehaabanaya.Marka waxaan ku khasbannahay in arrinta asaasyada diinta culays la saaro,dedaalka ugu badanna iyagaa la isugu geeyo.

sidoo kale,haddii duruufihii hore keeneen in lagu koobnaado barashada culuum gaar ah sida axkaanta cibaadooyinka iyo qoyska iwm.iyo in la iska barto axkaam awoodii dhaqan gelin lahayd aan loo haynnin,waxaa maanta culimada looga fadhiyaa inay si dhab ah ugu jeedsadaan barashada nusuusta hadba baahideedu taagan tahay,sidoo kalena inta u noqdaan nusuusta diinta, kala dhex baxaan axkaanta nolosha dhan khusaysa tu ferdi la hadlaysa ama dhisaysa,tii bulshada kala hagi lahayd iyo xeerarka dawlad lagu maareeyo.

Maa daama nolol mucaqad ah oo faraqyo badan leh lala dhaqmayona,ayna meelkasta ka muuqdaan xaalado aan hore aadenaha u soo marin,shareecaduna xal u hayso, waa in culimadu iyagoo ilaalinaya shuruudaha iyo dawaabidha ijtihaadka ay baabkiisa furaan, lana furo oo la fidiyo darfaha nusuusta axkaanta caamka ah xambaarsan, si loo gala baxo axkaan lagu dhaqo dhacdooyinka cusub ee loo haynnin nusuus khaasoo ku soo aroortay.

Sidoo kale, mar haddii loo hadfayo,in nolosha la wada beddelo,waa in la daraaseeyo nusuusta ka hadlaysa xeerarka iyo sunnooyinkay nolosha bulshooyinku ku shaqeeyaan. Marka diintu innooga warramayso sooyaalka ummadihii hore danta laga leeyahay waxaa weeye in aan ku cibro qaadanno.Allena wuxuu leeyahay:1) {Hortiin waxaa gudbay sunnooyin ee inta arlada socotaan eega cidhib-xumada qabsatay dadkii xaqa beeniyay} Aala-cimran(137).Gudbidana waxaa loo jeedaa: inay ku fuleen oo dhaqan galeen .

Xeerarka Alle ina farayo in aan u kuurgallo sida ummadaha ugu fuleen,kuna cibro qaadanno waa dhacdooyinkii noloshu soo martay,waqtiyadii hore oo dhan ilaa shalaydii dhowayd..(2) {Hubaale qisooyinkii dadyawgii hore waxay cibro u yihiin dadka quluubta saafida ah leh} yuusuf(111)Cibro qaadashaduna waxay ku imanaysaa,iyadoo la is- hordhigo nolosha ummadihii hore,oo wixii guul ahna sabibihii dhaliyay lala yimaado,wixii guul darro ahna wixii keenay laga fogaado.

Xeerarka Alle nolosha ku maamulo way badan yihiin, waxaana ka mid ah haddii aan doonno in nolosha ummada aan ka saarro xaaladda xun ee ay ku jirto, loona beddelo xaalad wanaagsan, Alle inuu noloshaas dooriyo waxay ku xidhan tahay,iyadoo laga shaqeeyo sidii loo beddeli lahaa waxyalahaa nafsadda bulshada ku lammaan ee ay rumaysan yihiin ahna mabaadi'da kharriban,iyo fikradaha khaldan ee waxyiga khilaafsan, dabeedna quluubtooda lagu cammiro xaqiiqooyinka waxyigu xambaarsan yahay sida Alleba u leeyahay:{Alle ma dooriyo xaalad ay qoom ku sugan yihiin ilaa ay beddelaan waxa nafsaddooda ku lammaan Allena haduu qolo belaayo la doono cid ka celin karta ma jirto,Alle sokediisana ma ay laha cid wanaagooda ka talisa}aAr-racad (11)

## 3) WAA IN AQOON LOO YEESHO WAAQACA

Ninka takhtarka ah aqoontiisa waxay waxtar yeelanaysaa markuu isku darsado aqoonta cudurrada iyo dawooyinkii lagu dabiibi lahaa.Sidoo kale culimada oo ummada u taagan halkii takhatiirta,waxaa looga baahan yahay inay yeeshaan aqoonta shareecada iyo xaaladaha nusuusta sharciga la fal gelayaan ee lagu dabiibayo.si kale haddaynu u dhahno

waa in la deraaseeyo waaqaca lala dhaqmayo,casriganna loo yaqaan (Fiqhul-waaqic),se

culimadii horena u aqoon jirtay{cilmul-xaal}Imaam Ibnul-qayim(aun) isagoo macnahaas ina tusaya wuxuu yidhi:{Muftiga iyo ninka madaxda ahba uma suurto gelayso inay xukunka saxda ah helaan jeer ay labo arrimood si dhab ah u fahmaan:

1) Garashada iyo fahmida dhacdada taalla iyo fahmida waxyaalaha ku meersan si si buuxda cilmi loogu yeesho xaqiiqada waxa dhacay.

2) In la fahmo xukunka waajibka ah ee dhacdadaas la siinayo.kaas oo ah fahmida xukunka uu Alle xaaladaas saaray,kuna soo aroortay kitaabkiisa iyo carrabka rasuulkiisa

-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-dabeedna labadaa uu isku dhabaqo}.

Iclaamul-muwaqiciin 1/49.

Culimada oo aan labadaa cilmi kulansan waxay la mid yihiin farmashiste dawooyin haya, dadkiisana tarabtarab cudur ugu lee’anayaan,se aan garanayn daawada cudurka iyo sidii loogu dabiibi lahaa,marka waa in ahmiyad la siiyo barashada dhacdooyinka nolosha

Waaqacuna wuu ballaadhan yahay,wuxuuse ka kooban yahay dadka, bulshooyinka, dawladaha,iyo duruufaha ku hareersan ee taariikheed, siyaasadeed, dhaqaale ,iyo weliba waxyaabaha maalin walba arrimahaa ku soo kordha,iyo siday isu saameeyaan..

Masalan,waa in la ogaado in gaaladu ka go’an tahay in aanu xukun islaam nolosha loo oggolaan,taa beddelkeeda xukunka kufriga ah ee magaca islaam la huwiyay la ilaasho,ogaanshaha xaqiiqdaas iyo la socodkeedaba waxay keensanaysaa :

1) In go’aankaa ku talo galkiisa la siiyo,lagana shaqeeyo taagista calanka islaamka .

2) In aan lagu dagmin xukunnada ragga kuwaas wakiilka u ah ee magaca islaamhuwan.

3) In la xaqiiqsado in gaalada agtooda uu ka jiro islaam labo nooc ah, midka Alle soo dejiyay ee xaqa ah oo aysan oggolayn in nolosha lagu xukumo,iyo mid ay nuxurkii ka siibeen oo waafaqaya,ama aan diidayn nidaamkooda kufriga ah.ahna midka ay daba-dhilifyadooda u fasaxeen inay nolosha huwiyaan,si ay muslimiinta ugu dagaan.

Mar hadaysan diinta oggolaynna waxaan la hurayn in gaalada madaxa la isla galo.

Hadaba waa in aqoon loo yeesho tabaha iyo xeeladaha la isu adeegsado marka cadaw la hardamayo.Waana in laga dheregsanaado sida gaaladu ugu culus tahay oo aysan ugu adkaysan karin- iska dhaaf somaliya oo dhane –in culimadu iyo islaamiyiinta ay hoggaamiyaanba inta tuulo yar qabsadaan ay islaam ku dhaqaan
,maalinka ay taa dhacdona caasimado badan oo Yurub ka tirsan baa hurdo ledi waayi, taana waxaa ugu wacan aqoonta ay diintan u leeyihiin,ayna u arkaan in meesha uu ka hirgalo aysan uga soconayn qorsheyaalkooda maan la’aanta iyo dulmiga ku dhisan.

Waa in la ogaado in dagaalka diinta iyo islaamiyiinta lagu hayo uu markasta saddex weji leeyahay,oo markuu mid socon waayaba ka kale la adeegsanayo,kuwaas oo ah:

a) In la soo dagaal geliyo daba-dhilifyada iyo waxa ka hoos shaqeeya ee kula wadaaga degaan,midab iyo dhalasho, diintana nala sheegta.

b) Hadii rabbi qadaro in kuwaas cagta la mariyo, waxaa goobta dagaal soo xaadiraya dalalka gobolka kula dega,oo rumaysan in jiritaankeennu uu jiritaankooda halis ku yahay.

c) Haddii ay dhaco in iyagaasna lacagta la mariyo,waxaa si toos ah dagaalka u soo geli quwadaha xoogga is bida ee caalamiga ah.

Maalinkase ay dhacdo in culimadu aysan garan inta ay le’eg tahay cadaawadda loo qabo, cidda ay is-hayaan iyo waxa la isku haysto toona, amaba aysan ogayn xoogga iyo awoodda uu leeyahay matoorka saaran, taasi waa bar-bilowgii guuldarrada, taana waa dhib guud oo xarakooyinka islaam caam ahaan haysta,keentana in maalinba dhinac aan hadafkoodii waafaqsanayn loo jeediyo,oo dhaq-dhaqaaqyadii soo celinta khilaafada waxay bilowdeen mudo

maanta (80)sano laga joogo, gaadhista hadafkaana weli fair kama qodna,arrinta aynu ka hadlayno ayaana ka mid sababaha.

Sidoo kale, haddaan lagu baraarugsanayn waxa ay yihiin hey'adaha carrada ka badan ee magacyada kala duduwan huwan ee gobollada dalka u kala goosha.kuwaas oo gaaladu u adeegsadaan dano dahsoon,haba ugu muhiimsanaato waxa ay u bixiyeen (Q.M) iyo waxa ka hoos shaqeeya.iyo kuwo la siiyo magacyo la maldahay oo ay ku shaqeeyaan,sida urur-
-rada aan dawliga ahayn(NGO)s,ururrada bulshada rayidka ah,idaacadaha xorta ah,beesha caalamka, waxaas oo idil haddaan looga talo gelin inay yihiin qaabab kala gegedisan oo gaaladu ugu talo galeen iny dano badan ku fushadaan,waxa dhacaysa in si fudud loogu daato dabinnada ay u qooleen dadka diinta u halgamaya.

Mar hadii duruufaha soo wajaha xarakooyinka islaamka ay badanaa isku qaab yihiin,aan tusaale u soo qaadanno wixii dhaliyay guuldarradii qabsaday xarakadii ikhwaanka Suriya ee sideetannadii la dagaallantay dhaaquutkii dalkaas ee Xaafid Al-asad

Markuu dagaalku kululaaday,dawladdiina xaaladdu ku cakirantay,ayaa waxaa la soo diray rag cilmaaniyiinta sunnada sheegta ah iyo kuwo Nuseyriyiin ah,iyagoo laga dhigay inay soo baxsadeen,kolkaa ayay xarakadii la sameeyeen is-bahaysi dawladda looga hortegayo. Sidoo kale waxay dabada la galeen xukuumadihii Urdun iyo Ciraaq oo u sheegay inay hiil iyo hooba la garab istaagayaan.

Madaxdii xarakadana waxay warqad dacwo ah u qoreen xog-hayihii (Q.M) ee xilligaas Kurt-fald-heym,iyagoo uga cabanayo sida xaakinkii Suuriya ee Asad uu xuquuqda shacabka Suuriya ugu tunto ummadiina u gummaaday!!!

Xarakadii intaas oo falal ah ku kacday,kullina muujinaya sida ragga hawshaa waday aysan ula soconnin duruufaha iyo waaqaca ku hareersan,taasoo sababtay inay axkaam badan oo sharci ah ku tomato,sidee xarakadaa looga sugayaa inay diinta Alle nasri ugu soo hoyiso?!!! Ugu dambayntiina waxay arrintoodiin ku biyo shubatay guuldarro ilaa maanta islaamiyiintii Suuriya ka soo waaqsan la'yihiin. Bal fiiri inta khalad ee la galay:

a) Waxaa xilfi iyo is-bahaysi lala galay cadaw aan ka sokayn kii la is-hayay,kaa soo basaasnimo loo soo dirsaday,inta aan basaasnimo u soconna yihiin cilmaaniyiin ay sahal tahay in inta mansab loo ballan qaado la gato,kullina wadaniyo ku soo gabbaday

Ma la dareemi waayay in dagaalku ku diineed yahay oo wadaninimo aanay shaqaynayn?!

b) Waxay dabada gashadeen labo dal oo cadaawaddoodu aanay ka yarayn tii madaxda Suuriya,wixii dhacayna waa wax taariikhda ku cad,oo wixii sir ahaa ee laga uruurshay baa cadawgoodii farta laga saaray,Urdunna inta Asad la

heshiisay bay wixii rag ahaa Suuriya gacanta u gelisy,Sadaamna markay xaaladdu ugu ba’nayd ee socdeen dagaalkii Xamaah lagu baabi’iyay ayuu wixii taakulo ahaa ka goostay,markuu ugu roonaana hub dhacay oo aan lagu dagaali karin u soo daabulay,jeer wixii shabaab ahaa ee dar Alle u soo jihaad tegay ay niyad jabeen, dabeedna arlada Alle ku kala firdheen.

c) Waa kuma ninka ay warqadda cabashada ah u dirayaan?! Soo ma aha Kurt-faldheymkii Yuhuudiga ahaa?! Hey’adda uu madaxda u yahay soo urur Yuhuudeed oo adduunka lagu xukumo ma aha?! Teeda kale kooxda yar ee Suuriya 5% ka yar yaa ka shaqeeyay inay dalka qabsato?! Soo Maraykanka iyo Yuhuuda xukunta ma aha?!.

Marka ragga iyagoo waxaas oo idil ka indho la',hadana shacab dhan dagaal geliyay, waa wax qofkasta oo garasho yar leh filan karo in natiijadu guuldarro ku dambaynayso.

Waxaa loo baahan yahay dhacdooyinkaas iyo kuwo kale oo xarakooyinka islaamka soo qabsaday inta la daraaseeyo in lagu cibro qaato.Siiba kuwii dhowaa ee Somaliya ka dhacay,sida dagaalladii ay wadaadadu galeen taniyo sagaashannadii,kii buundada Araare ee kismaayo,kuwii Bari,kuwii Somali-galbeed,Gedo iyo ugu dambayntii kuwii Itoobiya lala galay ee ay Somaliya ku qabsatay. Kulli waa in deraaso loogu noqdo ,oo wixii wanaag ahaa ee midho wanaagsan keenayna la qaato,wixii dhaliilo ahaa ee lagu khaldamayna la soxo oo aanu dib dambe u dhicin .

Mushkiladuna ma aha in arrin la iladuufo,taa aadane ayaa loo yahay,ee waxaa dhib ah in khaladaadka dhaca lagu cibro qaadan waayo, aanna laga faa-iidaysan,isla markaana wixii meel ka dhac ah ee la soo maray indhaha laga qabsado oo ay sii socdaan

.Marka dib loo raad raaco wax badan oo la soo maray waxaa la dareemi karaa in waxyaalo badan oo dhacay ay gacmo cadaw door ku lahaayeen,aanad is odhan karto,cadaw baa dad badan oo daacad iska ahaa se qaflo dilootay rimoot-kontrol ku hagayay,laakiin mar hadii xilligu xilli dagaal yahay niyad sami keliya shaqayni mayso, Shakina kuma jiro inay jiraan damiir laaweyaal is ogsoon inay gaalada u shaqeeyaan.

Nebigeennuna-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-wuxuu sheegay in caqli badnida mu'minka iyo foojignaantiisa badan darteed aan hal god laba jeer looga qaniini karin,bal ka warran hadii marar aan tiro lahayn nalaga qaniinay?!!!

In deraasadaa la sameeyona waxay keenaysaa in laga bedbaado dabinnada cadawgu qoolay ee maalin kasta sida indho la'aanta ah loogu daadanayo..

## 4) WAA IN UMMADA CILMI IYO TARBIYO LA SIIYO

Waa lagama maarmaan in umada jahliga laga saaro.diintana loo cadeeyo,weliba asaasyada diinta far waaweyn loogu dhigo,jeer dadku si buuxda ugu kala caddaato islaamnimada iyo gaalnimada,oo kii halaag lala doonana uu hoogo isagoo ay u caddahay marinka uu doortay, kii alle hanuun la rabana uu ayaansado isagoo ku kalsoon in uu rillaaha Alle cagta saaray.

Waa muhim in dadka xaqa loo caddeeyo ilaa ay yaqiinsadaan in jannada Alle ay qaali tahay,islaamtinimo aan dhab ahayn. aanu Alle aqbalayn,jannadiisana lagu helaynnin. Dhaqammoo badan oo nolosha umada ka muuqda,oo kufri iyo faasiqnimaba lehna waxay muujinayaan intuu gaadhsiisan yahay aqoon xumada diineed ee ummada haysata.

Dhaqamadaas oo ay ka mid yihiin, dhaaquutyadii cadawga Alle ahaa oo halkii laga beri' noqon lahaa la ayido oo loo sacabbo tumo, iyadoo dadka qaar culimadii iyo xarakooyinkii ula dagaala inay islaamiyiin yihiin ,iyadoo indhaha laga fiirsado culimadii diinta oo la leeynayo ama inta la garbo-duubo cadaw laga iibsanayo,ama jihaadkii oo waajibay, muslimiintii iyo gaaladiina is unuungoynaya isha laga fiirsanayo oo aan dan laga gelayn,se aduunyo la sii daba ordayo ama inta dhulal gaalo la iska dego sharciyadooda la qaato qawaaniinta kufriga ah ee dalalkaas la iska oggol yahay,bal lagu faraxsan yahay,se

wixii qaraabo ka dambaysay u baaqaya,dhiiga iyo xoolaha muslimiinta oo la bannaystay

Waa inaan ku xisaabtanno in waxaas oo dhami ay ku imaadeen jahliga ummada sida ba'an u naafeeyay ee diinteeda kaga sugan tahay,ahna runtii cadawga kowaadee culimadu

ku hor gudban,iyo caqabadda ugu wayn ee dacwada hortaagan,isla markaana ah hubka ugu halisan ee cadawga islaamku dacwada kula diriro oo ku jillaafeeyo.

In cadawgu jahligaa ka faa-iidaysto waxaa kuu caddayn kara,iyadoo gaalo isu habar wacatay,waxa duullaanka lagu yahayn tahay ummadan iyo diinteeda,ayaa labada idaaco ee Somalidu aad u dhagaystaan ee (BBC)da iyo(VOA)da oo ay kala leeyihiin hey'adaha sirdoonka ee Ingriiska iyo Maraykan,waxay habeen iyo maalin dadka dhegaha ugu shubaan oo ka dhaadhiciyaan,in dagaalka socda aanu diin shaqo ku lahayn,ummadana aan wax dan ah laga lahayn.Hadii cid loo dan leeyahay ay jiraanna loo jeedo dad gaar ah oo gaalada xaaxda u keenay.Heer dadkii la gaarsiiyay inay ka dhaadhacdo in waxa socda aanu iyaga khusayn.Iyadoo dhabtu taa ka fog tahay,ee cidda loo jeedo muslimiinta iyo diintooda yihiin,raggan jihaadayana aysan jirin wax khaas ah oo ay difaaccanayaane ay garteen kana gubteen waxa diintooda iyo dadkooda lagula kacayo.

Sidii marka, ummada jahligaa looga saari lahaa waa mas'uuliyad culimada

guudka ka saaran oo Alle aakhiro kula xisaabtani doono.

**Si** Hadaba umadu diinteeda sidii habboonayd ugu camal fasho, una noqoto mid dusha u ridata una adkaysata takaaliifta ka ratibmaysa ku dhaqanka diinta iyo u halgamideedaba, waa in ummadu hesho cilmi iyo tarbiyo islaami ah,taas oo ku bixinaysa inay dareento in diinteedu tahay khayrka ugu weyn ee Alle ugu deeqay ee ay nolosha ku haysato.inuu gacanteeda ka baxana u aragta musiibada ugu khatarsan ee ku iman karta,isla markaana dareensan inay haysato mabda' ay kaga deeqtoonto nolosha laga soo minguuriyay xadaarada wathaniga ah ee Reer-galbeedka,aybana u arkaan kuwaasi inay halaagsameed, oo in noloshoodu la weynaato oo qiimo la yeelato iska dhaafe uba arka dad ayaan darsaday oo ay tahay in loo naxo.

Sideedabana,diintu waxay qofka mu'minka ka rabtaa in iimaankiisa iyo diintiisa uu ku faano halka gaalada iyo waxa la dhaqanka ahi ay aduunyo kufanaan sida Alle inooga qisoonayo arrintii ka dhex dhacday ninkii maalka badan ku faanayay iyo kii ku faanayay inuu Alle iimaan ku mannaysta oo uu rabbigii caabudo.

Sidoo kale, kol hadii hadafka la hiigsanayo yahay yagleelid dawladii diinta hirgelin lahayd, waa in la soo saaro shacabkay dawladdu ku tiirsanaan lahayd,aanna ogaanno in dawladaha aduunku ku wada tiirsan yihiin dad mabaadi’deeda rumaysan oo daacad u ah . Khilaafadii islaamka ee qarnigii tegay dhacdayna waxay salka dhulka ku dhufatay oo burburtay markay wayday umad ay cuskato oo kor u haysa. Hadaba waa in umada la isugu daro,in diinta la baro iyo in la siiyo tarbiyo u fududaysa ku dhaqanka diinta..

Waxaana ila habboon in dib loo saxo khaladyadii hore u jiray eecilmiga cilmiyow cilmi ma tahay loo baran jiray,halka diintu fartay in loo barto sidii loogu camal fali lahaa,ileen waxaa la yidhaahdaa : Cilmigu waa geed camalkuna waa midhihiiye.

Marka cilmiga la baranayona,weligeed waxaa dedaalka la saari jiray akhriska qur’aanka, fiqiga iyo luqada carabiga oo naxwe iyo suugaanba leh.Waayadii dambe ee aqoontu fiday,culimo badanna debedaha cilmiga ku soo barteen, culuumtii hore waxaa lagu soo kordhiyay cilmiga tafsiirka iyo barashada axaadiista. Hase yeeshee, u badnaa laqbaynta iyo isa saarka erayada,wayse yarayd in loo qaato qaab isku tarbiyayn ah,marka laga reebo qaabkii quruxda badnaa ee Sheekh Maxamed Macallin Xasan(aun) uu todobaatannadii u soo bandhigi jiray tafsiirkiisii,iyo habkii saxwadii xilligaas qur’aanka isugu dhisi jirtay. Dedaalka cilmiga lagu bixinayayna waxaa ku lammaanaa gacan bidixayn lagu sameeyn jiray tarbiyadii cilmiga barakayn lahayd,ee ku dhaqankiisa sahli lahayd

Tarbiyaduna siday u qiimo badan tahay iyo ahmiyada ay diinta ku leedahay waxaan ka garan karraa iyadoo Alle inoo sheegay inay ka mid ahayd hawlahii

ugu muhiimsanaa ee nebigeenna- naxariis iyo nabadgelyo Allaha siiyee-loo soo bixiyay,siduu u yidhi:

1) { Alle waa ka umiyiinta ka soo dhex bixiyay rasuul ku dul akhrinaya aayadaheena oo tarbiyaynaya weliba baraya kitaabka iyo xikmada,iyagoo markii hore baadinimo cad ku jiray} jumca(2).Umiyiinta waxaa loo jeedaa carabtii jaahilga ahayd ee aan kitaab samaawi ah hore ugu iman. xikmadana sunnadaa lagu fasiray.

2){ Dhabtii Alle mu'miniinta abaal weyn iyo gallad buu u galay markuu ka soo dhex bixiyay rasuul ku dul akhriya aayadahayaga,weliba baraya kitaabka iyo xikmada,iyagoo markii hore baadinimo cad ku sugnaa}Aal-cimra164).

Allena isla macnahaas ayuu ku sheegay labada aayad (129,151) ee Al-baqra, inkasta oo qur'aanku adeegsaday erayga {tazkiyah).

Waxaa kale oo ahmiyada tarbiyadu leedahay ka arkaynaa,sida saxaabadii saddex iyo toban sano Maka loogu dhisayay,ilaa la soo saaray rag aan tiro badnayn marka loo eego muddadii dheerayd ee la soo dhisayay, laakiin tayo leh, iimaankooduna buuraha ka cuslaa,nusuustana si buuxda oo leexleexad lahayn u dhaqan gelinayay.

Haddaba,maxaa keenay in tarbiyada sidaa u qiimaha badnayd la gacan bidixeeyo, aanna xaqeedii la siinnin.? Anigu waxay sababtu ila tahay, iyadoo Somalidu ku soo hormaray macnaha khaldan ee iimaanka laga haysto, kaa soo ah inuu yahay rumayn maanka qofka iska dega keliya {tasdiiq},iyadoo camallada qalbiga iyo kuwa xubnahaba aysan iimaanka hoos imanayn.Fahamkaa kharribanna waxaa ka ratibmay aragti ah:

Mar hadii dadku iimaankii qireen oo ashahaataan,in wax weyn oo maqan aanu jirin,hadii dedaal la hurayana in lagu jeediyo cilmi kororsi uun,taasoo macnaheedu yahay in aan innaba tarbiyo xisaab lagu darsan.Taasna waxaa aad looga arki jiray in qoyska sheekha cilmiga akhriya aysan diin ahaan bulshada kale waxba dhaamin,aybana dhici karto xataa inaysan salaad tukan.

Taasina,runtii waxay dhalisay in laga jeedsado xoojinta camalladii qalbiga ee sababi lahaa in diinta si hagaag ah loogu dhaqmo,sida barashada Alle,weynayntiisa,in isaga uun wax laga rajeeyo, laga baqo,la jeclaado,la isu dhiibo,loo hogaansamo,kuwaas oo runtii ah waajibyada ugu waaweyn ee diintu innaguwaajibisay.

Baylihintii tarbiyadaa waxaa laga dhaxlay midho aan la mahadin.Waxaa soo baxay dad badan oo nusuustii sharciga si kasta u laqbayni kara,hadana aanu noloshooda sidii haboonayd uga muuqan dhaqankii islaamka,heer loogu maahmaahay [fiqi tolkii kama janno tago] ,saamaynta ay bulshada ku leeyihiinna ay yar tahay.

Waxaana meelkasta lagu arkayaa dad cilmi leh, laakiin, maankoodu ka buuxo waxyaalo sharcigu cadeeyay inay xun yihiin,uuna faray in laga fogaado,seba

ayidsan oo u sacabbo tumaya.Sidoo kale,arrimo badan oo culimada iyo xarakooyinka ka dhex jira,ee ah isximin, iskaashi xumo,iyo dad badan oo beretan ugu jira maal iyo mansab adduunyo,gidi waxaasi waa midhihii xumaa ee tarbiyadii laga gaabiyay ee aan xaqeedii la siin.
Sidaa darteed, waxaa aad loogu baahan yahay in dedaal aan yarayn loo jeediyo dhisida iyo tarbiyaynta ummadda.
Erayga qur'aanku macnaha tarbiyda u adeegsadayna waa (tazkiya), luqada carabigana ku leh labo macne oo a) xaadhid,sifayn iyo dhahirid.b) kobcin iyo korin
Mar hadii qalbigu yahay xubinta insaanka ugu qiimaha badan,marwalbana sida uu noqdo ee fayobi iyo jirroba ay noloshu noqonayso,waxa sifaynta iyo korintaba lagu samaynayo waa qalbigaa.wuxuuna u baahan yahay in laga nadiifiyo,lagana xalo dhammaan waxyaalaha waxyiga Alle khilaafsan ee qalbiga ugu daran sida suntu jidhka ugu daran tahay,kadibna lagu camiro oo laga buuxiyo xaqiiqqooyinka waxyigu xambaarsan yahay,taas oo ah nafaqo uu qalbigu ku kobco oo ku xoogaysto.
Macneyaalka uu waxyigu maanka qofka ku camirayona waa nuxurka iyo xaqiiqada iimaanka,oo hadba inta uu nool yahay ee xooggiisu dhan yahay ayay nolosha mu'minku qurux iyo qaayo yeelanaysaa.
Si marka iimaankaa loo dhiso,waxaan hoos ku soo bandhigay arrimaha ugu muhiimsan ee haboon in si gaar ah loo tixgeliyo oo ahmiyad khaas ah lasiiyo, kuwaas oo ah::
1) In si gaar ah dadka dareenkooda loogu jeediyo inay qur'aanka la noolaadaan, joogtana u akhriyaan,in macneyaalka lagu soo bandhigayo la dhuuxo oo lagu fekero ,iyadoo lagu talo gelayo in xaqiiqooyinka iimaan ee uu wato quluubta lagu cammiro,jeer iimaanku wada hanto oo hago weliba si buuxda u xakameeyo dareenka qofka mu'minka ah.
Waxa dadkii hore dhisay ee iimaanka aadka u sarreeya ee aan la yaabannahay ka soo saaray waa qur'aanka. Habkay ugu dhismeenna wuxuu ahaa :
a} Iyagoo u qaadan jiray inay ku camal falaan, qofkuna inta nebig-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiye- toban aayad ka qaato ayuu ku soo qaybi jiray cilmi iyo camalba.Wayna fududahay inaan fahamno,sida aayadahaas ay cilmi ahaan ugu qaybi jireen oo waxaan odhan karraa,luqada ayay garan hayeen.
Laakiin iyadoon ognahay xilligii Maka la joogay inaan la soo dejinin wax axkaan ah oo lagu camal falo,sidee bay ugu camal fali jireen ?
Taa jawaabteedu waa iyadoo aan fahamno in ku camal falida aayadahaas ay tahay in xaqiiqooyinka iimaaniga ah ee lagu soo bandhigayo si buuxda loo rumeeyo,meesha ay qofka mu'minka joojiyaanna uu joogsado,siday wax ugu sheegaanna u qaato,waxay xaq ku sheegaanna uun xaq u arko,wixii ay baadhil ku tilmaamana wax kama jiraan ka dhigo .

b) Iyadoo qur'aanku u ahaa isha keliya ee loo oggolaa inay ka biyo cabaan, wax kasta oo noloshooda khuseeyana ay isagaa uga biyo dhaan sadaan,oo mar waxaa dhacday in Cumar-Allaha ka raali noqdee- uu Yuhuudi ay deris ahaayeen ka soo qoray aayado ka mid ahaa kitaabkii Tawreed,si uu nebiga-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-u tuso,nebiguna markuu ku arkay aad buu uga cadhooday.Taas oo tusinaysa sida loo doonayo in quluubta mu'miniinta lagu koobo qur'aanka keligii,lana rumaysto inuu ku filan yahay wax walbana kaga deeq toomaan,keligiina uu noloshooda hago.

c) Iyadoo dadkii hore lagu qiimayn jiray siday u kala badsadaaan qaadashada iyo la noolaanta qur'aanka,oo waa tii shuhadadii Uxud markii la xabaalayay loo kala horminayay hadba siday u kala badsadeen xambaarashada qur'aanka iyo la noolaantiisa.

Sida cajabta leh ee ay ula noolaayeena waxay ka muuqan arrinta taariikhdu sheegto ee ah: Qofka socotada ah markuu habeenkii Mediina soo dhex maro inuu moodi jiray in shinni guuraysa ay dul socoto,kaasoo ah guuxa ka yeedhaya dadka qur'aanka ku tukanaya

Waxaana habboonaan lahayd in lala socdo waxa ugu weyn ee maqan in uu yahay iimaankii dhabta ahaa ee nolosha dariiqa toosan ku hagaajin lahaa,qaabka keli ah ee lagu xaqiijin karana waa in qur'aanka dib loogu noqdo,lagana dhigto isha keli ah laga biyo cabo. Aynuna ku xisaabtano in qur'aanku yahay waxa keliya ee maanta dadka lagaga bedbaadin karo cudurrada ba'an ee sida duufaannada u socda ee ay wadato xadaarada wathaniga ah ee reer-galbeedka,ee inta dadkeedii ku rogtay ay dadyawgii adduunkana ku wada tallaashay, cudurradaas oo ay ugu xun yihiin diin-la'aanta iyo hanka beenta ah ee lagu doonayo in nolosha idil inta la saydhareeyo raaxo adduun laga haqab beelo,iyadoo aakhiro iyo nolol dambetoona aan dan iyo muraad laga lahayn.

Sida darted,waa in dedaal aan yarayn loo jiheeyo la noolaanta qur'aanka iyadoo loo qaadanayo tarbiyo iyo in la isku dhiso.

2) In quluubta lagu beero lagana dherjiyo barashada Alle jeclaantiisa,ka cabsigiisa,isku-hallayntiisa,in keligii wax laga rajeeyo oo laga hunguriyeeyo,cidksta oo kalena laga quusto,isla markaana keligii loo hogaansamo oo si buuxda la isugu dhiibo.

Nusuusta qur'aan iyo sunnoba leh ee arrimahaa lagu faah-faahiyayna waa kuwo tarbiyo iimaaneed iyo dhismo loogu talo galay..

3) In xiska dadka iyo dareenkoodaba wax badan la hordhigo nusuusta aan tirada lahayn ee qur'aan iyo sunnoba leh ee looga warramayo geerida,nolosha bersekha,siduu adduunku u rogman doono,banka qiyaamo iyo sida khalqiga loo xisabinayo,jannada iyo waxa ay qurux leedahay,waxa raaxo iyo nimco dhextaala,faraxa iyo rayraynta dadkeeda laga sheegayo,naarta iyo kadeedkeeda iyo oohinta iyo ba'ayeyda ka baxaysa ehlu-naarkaiwm.

Xaqiiqooyinkaa oo qofka lagu dhiso waxay dhalinayaan in ruux walba inta wer-wero naftiisa u baqo,uu ka shaqeeyo siduu aakhiro u bedbaadi lahaa,janno rabbina u heli lahaa.

4) Waxyaalaha aad loo dareemayo noloshana laga wada arkayo inay maqan tahay amaba ay daciif tahay waa ku xidhnaanta rabbi,iyo suhdigii diintu aad u dhiirrin jirtay,ilaa laguba diimo in la arko qof si gaar ah xusidda Alle u badinaya,ama qof isku taxluujiya in noloshiisa laga arko saahidnimo. Taa beddelkeeda waxaa nolosha ka muuqata in hammiga ugu weyn ee dadka uu adduun raacdaysi yahay.Marka waa in si khaas ah dadka loogu dhiso cibaadooyinka dadka sida gaarka ah Alle ugu xidha ee u jeclaysiiya,sida salaadaha farad iyo raatibo iyo naafilooyinba, soonka waajib iyo sunnaba,sako iyo sadaqaba,badinta xusida Alle,iyo in la xuso oo magacyadiisa wan-wanaagsan inta la barto,lagu baryo oo lagu amaano,ihtimaamna la siiyo towbada.

5) In ahmiyad weyn la siiyo sidii dadka loogu tarbiyayn lahaa akhlaaqda islaamka iyo anshaxa wanaagsan,jeer qofkasta laga helo dhaqankii iyo anshixii quruxda badnaa ee lagu yaqiinay dadka uu Alle jecel yahay,sida run sheegida,ballan wanaagga,xaq dhawrida qofka kale,u nuglaanta walaalka muslimka ah, ku adkaanta cadawga Alle iwm.

6) Dadkeenna Somalida ah maadaama noloshoodu miyi u badnayd waa dad u bartay nolol jaantaa-rogan ah {fawdo} iyo hortaa-furan,nidaamka iyo kala dambayntuna dhib ku yihiin, sal fudaydna lagu mashaqeeyay,waxayna marwalba doonaan in xeerarkii miyiga iyo dhaqannadoodii hore ay ku dhaqaan nolosha bulshada iyo maamulka dawlo iyo weliba hab-dhaqankii diintaba.

Marka waa in dedaal la saaro sidii umada looga dhaadhicin lahaa,looguna tarbiyayn lahaa in diinteennu tahay diin iyadoo idilba nidaam ku salaysan, xataa hadii saddex qof safar galaan ay farayso in midkood madax noqdo arrimaha safarkana looga dambeeyo.

Si naloo tuso ahmiyada nidaamka iyo kala damayntu diinta ku leedahayna wuxuu Alle ina hordhigay nebi Suleymaan-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- oo u goodinaya shimbirkii hud-hudka markii idan la’aan laga waayay goobtii lagu ogaa.

## 5) WAA IN BISAYL SIYAASADEED LA YEESHO

Fogaantii ay culimadu ka fogaayeen hogaanka umada wuxuu gayaysiiyay in aysan wax weyn uga baxsanaan baxaadegga siyaasadeed,taasina ay ka muuqato

gebi-dhaclaynta badan ee culimada iyo xarakooyinku ku jireen taniyo todobanadii,intaana la hollinayay in dhibabka umada haystay wax uun laga qabto. Sharciguna wuxuu cadeeyay,caqliga fayowna keenayaa in marka camal Alle loogu dhowaanayo la samaynayo, in hirgelinta camalka laga hormariyo iyadoo aqoon loo yeesho xaqiiqada camalkaas iyo cilmigii lagu fulin lahaa.Masalan,marka hawl jihaad loo darbado,walaaluhu waxay dhallinta u furaan taba-barro caskari ah oo lagu baro arrimaha jihaadka iyo habka cadawga loo unuun gooyo,waxayna soo aflixiyaan rag u xiisa qaba inay gaalo ka ciil beelaan, oo ah sooma-jeesteyaal fool adag faltankana wacdaro ka gaysta,runtiina gaaladu ka goojiso.

Sidaa oo kale,mar hadii dhisid dawlo loo tafo xaytay,waxaa la doonayaa in aqoon loo yeesho surimada siyaasadeed ee hawsha taalla lagu maarayn lahaa,iyo xirribaha iyo xeeladaha looga dabbaasho duruufaha qallafsan ee dacwada iyo halganka soo wajahaya

Markaan siyaasad leeyahayna,uma jeedo macnaha qaabka daran ee dad badan markay eraygaas maqlaan maankooda ku soo dedegaya,kaas oo ah in xirfad loo yeesho khiyaanada,beenta iyo sida wax la isu daba marsho.

Maya islaamku wuxuu leeyahay qiyam aan sinaba loo aqbali karin in meel looga dhaco,sidaa darted,lama oggola habdhaqanka Mekafiliga ah, ama danaysiga-bragmatism-ka ku dhisan ee maanta adduunka lagu rogay.

Waxaanse u jeedaa hab-dhaqanka anshaxa iyo usluubta hagaagsan ku dhisan ee loo yaqaan siyaasada sharciga {as-siyaasah-asharciyah}.macneheeduna yahay maamul iyo maarayn shareecada laga qaatay.Erayga siyaasadna waxay luqada carabiga la macne tahay:[maamul],waxaana la yidhaahdaa,siyaasada tacliinta,siyaasad dhaqaalaha,siyaasada arrimaha debeda, kullina loo jeedo maamulka iyo maarayntaa arrimahaa loo dejiyay.

Siyaasaduna waxay ku taagan tahay labo tiir oo ah:

a) In la xadido hadafka iyo yoolka fog {istratijiyada} ee ay umadi hiigsanayso.

b) In umada waxay awood leedahay,mid aqooneed,maskaxeed,dhaqaaleed iyo tubulsho la isku habeeyo loona maareeyo sidii looga dhigi lahaa mid u adeegta gaadhistahadafkaa.

Hadafka diinta umada u xadidayna waa in la gaadho rillaha Alle,si marka aakhiro la tago looga bedbaado cadaabtiisa looguna guulaysto jannadiisa.

Waxaa marka laga doonayaa cidda hogaanka haysa in wax waliba inta la maareeyo, loo jiheeyo u khidmatnta yoolkaas.

Masalan,waa in warbaahinta loo habeeyo sidii rillaha Eebbe loo heli lahaa,oo loo adeegsado in khayrka iyo waxa dadka anfacaya lagu faafiyo,wax kasta oo rabbi cadho gelinayana aan lagu baahin.Waa in dhaqaalaha lagu saleeyo sharciga Alle, laguna kasbo oo lagu bixiyo dariiqyada diintu fasaxday,irrid walba oo xun ee ay xarrimtayna la jufo,oo aan lagu shaqaysan karin waxna lagu

bixin karin.Sidoo kale in nidaamka tacliinta lagu jaangooyo hab Alle ka raalli yahay,oo umada la baro waxa adduun iyo aakhiro anfacaya,wixii halaag u keenayana aan sinaba loogu oggolaan in la baro ama ay barato..

Waa in xidhiidhka debeda lagu jaangooyo meel marinta hadafka umada, loona jihaysto in diinta dadyawga kale la gaadhsiiyo,ciddii ay tol iyo xigaal nooga dhigtana la tolaysto,ciddii ay cadow noogu sheegtana lala colloobo.

Waa in garsoorka loo habeeyo sidii rillaha Alle loo heli lahaa,laguna saleeyo axkaanta sharciga, wax diinta ka baxsan oo qaynuun aadane ahna aan dadka lagu kala saarin.

Hadaba,marka nolosha qaabkaa loo habeeyo,waxay umadu soo baxaysaa mid hadafkeedu cad yahay,shareecada ku dhaqanta oo leex-leexad iyo laa-laab oggolayn, cidkastoo qallooc iyo ujeeddo gurracan wadatana,si fudud ayay barxada u iman ama dabinka ugu soo dhici,ama bulshada dhexdeeda tuke cambaar leh uga noqon,mana dhacayso in si sahlan loogu daato shirqolada cadawgu maleego,sababtoo ah, waxa cadawga si dhib yar ugu gacan gala oo dabinnadiisa ugu daata waa cida aan rillaha Alle ku xisaabtamin, hankeeduna raaxo adduun dhaafsanayn,waxaanna tusaale u soo qaadan karraa saxaabigii Kacab Ibn Malik- Allaha ka raallin noqdee- markuu boqorkii reer-Qasaan u soo qoray warqada ee ku soo faray in cidhiidhiga la baday-waa siday la ahayde-ka soo tago, uu u yimaado,si uu sharaf ugula noolaado,Kacabna warqadii inta jeexjeexay

ayuu tinaar ku tuuray oo gubay,isagoo ka xun in gaal qudhmuun soo hunguriyaysto.

Markaan macnaha siyaasad qaabkaa u fahamno,waxaan dareemi karraa culayska ay leedahay dhisida ummadii sidaa buuxda diinta loogu dhaqi lahaa, sharcigana ciidan fuliya ugu noqon lahayd,iyo sidoo kale baahida daran ee loo qabo kaadirkii hawlaha dawladda qaban lahaa.Maxaa yeelay dawladda la baadigoobayo waxay u baahan tahay dad mabaai'deeda rumaysan oo habeen iyo maalinba heegan ugu jira hirgelinteeda iyo waaardiyaynteedaba.Ma dhacayso marka in gaalo iyo acwaantooda laga tuugo inay sharci dhaqan geliyaan,

Bal u fiirso dhacdadan taariikhiga ah:Xilligii madaxweynihii hore ee Somaliya C/rashiid uu uu doorashada madaxtinnimada u taagnaa ayuu wuxuu la kulmay qaar ka mid culimadii Somaliyeed,isagoo ka codsanaya in doorashada lagu taageero.

Wadaaddadiina inay doortaan waxay ku shardiyeen labo shardi ,oo ahaa:

a)In markuu xukunka qabto ,uu Sheekh Nuur Cali Colow(aun) uu ka qaado xafiis muhim agtooda ka ahaa oo uu sheekhu madax ka ahaa kana tirsanaa w/garsoorkiyoArr.diinta.

b) In Shareecada dalka lagu xukumo.

Markuu doorashadi ku guulaystayna,qodobkii hore wuu u fuliyay,kii kalena

wuxuu uga baxay inay tahay arrin baarlamaanka u taalla ,oo haday aqbalaanna hagaag,hadii kalese aanu waxba ka qaban kari.
Culimada waqtigaas ha niyad wanaagsanaadeen oo ha dalbeen in diinta la dhaqan geliyo,laakiin,waxaa muuqata,inayba la socon siyaasadaha jiray,oo ay agtooda ka ahayd:
Mar hadii gaaladii cad-cadayd guurtay,inaanayba jirin wax mancinaya in diina nolosha lagu dhaqo.Mana dareensanayn in raga talada haya ay wakiillo uun yihiin,waxa aqalka baarlamaanka la isugu keenayna ay arrintoodu tahay uun wax dadka lagu maaweeliyo,iyo
Dad wixii la rabo laga saxiixdo,ayna dhaafsanayn:
Shimbiro yahaw heesa—---hees wanaagsan heesa.
Teeda kale ,marka xukunka Alle inta la qaado,dad aqal baarlamaan fadhiya inta la hordhiga la odhanay:waxaad ka dooddaan in xukunka Alle addoomadiisa lagu dhaqayo iyo in la xoorayo oo qawaaniinta reer-galbeedka lagu xukumayo.
Marka in dad sharciga Alle sidaa u ihaanaysanay lala hoos ordo oo laga tuug-tuugo in uu diin alle meel mariyo waa arrin ina tusaysa sida aqoon diineed loogu baahi qabay ,
Sidoo kale,waa in aan ka dhergsanaanno marka xukunka islaamka laga hadlayo in arrintu aysan ahayn oo keliya rag jibbaysan oo ciidan ahaan u tababaran oo dagaallama, waa sax oo jihaad la'aan iyo rag hub qaada la'aantood diintu ma hirgalayso,laakiin,hubka iyo ragga wadaba waa inay siyaasadu hagtaa oo ka dambeeyaan,maxaa wacay,diintu mabaadi’ bay wadataa ciidanka iyo hubkoodana waa lagu ilaalinaya,waxaase la adeegsan marka laga maarmi waayo,oo wada hal wax tari waayo,ama luqada cadawgu awood noqoto.laakiin ma aha in rag ciidan ah qaraarrada yeeshaan..
Aqoonta siyaasada waxaa kale oo soo gelaya in cilmi loo leeyahay hababka iyo tabaha umadaha gaalada ah loola dhaqmayo,kuwo colka la yahay iyo kuwo heshiis lala galayba
Nusuusta diinta ayaana arrintaa aad u lafo gurtay,marka nusuustaa siday tahay loo raaco ayaana gaalo laga il-heli,oo kii makri iyo khayaano wata si fudud dabinka ugu soo dhici,dabeedna abaalkii loo marin,kii kalena suuskiisa ayaa wax loogu beegi,marka ma jirayso waxa maanta socda ee gaalo mu'aamaraday dejisaba nagu fulayso,heer ay gaareen inaysan xataa shirqoolladooda qarsan,ileen waxay ogyihiin inaan si sahlan ugu dadanayno oo aannan marnaba wax iska celin karin.

## 6) WAA IN GO'AANNADA LOO MADAX BANNAANAADO

Aad baa loogu baahan yahay in culimadu iyo xarakooyinkaba ku xisaabtanto,mar hadii ay u hadfayaan yagleelid dawladeed,in qoorta la iskula

jiro dawlado in la isku rogmado oo la isku baaba'o ka fadilaya inuu hirgelo hadafka islaamiyiinta.
Waxay marka culimadu ku khasban yihiin inay samaystaan dallad cududdooda midaysa, dedaalkoodana inta meel isugu keenta habaysa oo hal dhinac u wada jeedisa,Guurtida ay dalladaasi hadhaynayso ee qaraarrada kama dambaysta ah leh waxaa fiqiga islaamka loo yaqaan :[Ahlul-xalli-wal-caqdi}.waana in guurtidaas ay ku xisaabtamaan in badanaa go’aannada ay qaadanayaan ay masiiri yihiin,ayna ka ratibmayaan natiijooyin calculus. Waxaa marka aad iyo aad muhim u ah in loo madax bannaanaado go’aannada iyo qaraarrada la qaadanayo,ayna guddoomiyaan guurti culimada laga xulay, oo la wada hoos geynayo dhammaan wixii khuseeya diinta iyo dacwadaba .
Mar hadii masiirka umada ay guurtidaas culimada laga soo xulay ku xidhan tahay,waxaa lagama maarmaan ah in raggaas laga helo tilmaamaha laga doonayo dadka uu Alle nasrigiisa u ballan qaaday,sifooyinkaas oo ah :
1) Inay yihiin dad Alle ka baqaya. 2) Inay leeyihiin aqoon diineed oo dhamaystiran
3) Inay yihiin geesiyaal calool adag oo go'aan adayg lagu yaqaan..
4) Inay yihiin dad cadaalad, hufnaan iyo deggenaan iyo miyir qab loo qirsan yahay.
5) In barnaamijkoodu ku socdo wada tashi loona maamulo qaab mu'asaso.
6) Inay yihiin rag feejigan oo aad ugu dhuun duleela waxa hareerahooda ka socda.
7) Inay yihiin rag si buuxda Alle ugu kalsoon,kuna talo gelaya inay socdaan ilaa dhamaadka dariiqa,gaalada isu bahaystayna aanay kurbo iyo werwertoona ku haynnin.
Guurtidaasi waa inay si qoto dheer u ogaato in quwaddodu iyo hadafka lagu guulaysto ay ku xidhan tahay in la helo iimaan weyn oo xoog badan,wadajir iyo isku duubni iyo quwad ciidan oo xoog leh.Iyagaa hoggaanka loo dhiibay ayaana laga doonayaa inay habeen iyo maalin ku fekeraan sidii ay arrinkaas u xaqiijin lahaayeen, markaa ayayna umadu si buuxda u garab joogsan oo u ayidi.
Waxyaalaha la doonayo inay hawlahooda asaas uga dhigaanna waxaa ka mid ah inaysan marnaba fududaysan qaraarrada masiiriga ah ee ay qaadanayaan.Waa inay Alle ka baqaan oo go'aan qaadashadua ka fogeeyaan inay saamayn ku yeelato cid khaariji ah oo dano gaar ah wadata, waa in culimadu si buuxda ugu madax bannaanaadaan go'aanadooda,ayna u aabe yeelin cadaadisyada markasta kaga iman karaa qolyo danaynaya hirgelinta ujeeddooyin khaas ah oo ay wataan,danna aan ka lahayn ahdaafta qiimaha badan ee culimadu ku duulayaan,balse cadaawada ay dacwada iyo dadkeeda u hayaan aysan ka yarayn ta ay qabaan cadawga la is-hayo ee manta qoorta la iskula jiro.
Masalan xukuumadaha Ereteriya,Masar iyo Sacuudigu cadaawada ay

islaamiyiinta u qabaan kama sokayso ta ay Maraykan iyo Itoobiya qabaan, caadhifada ay muujiyaanna waa wax ku salaysan dano siyaasadeed oo aan meel dheer jirin,haday si fudud u helaanna ay caadhifadii iyo hiiladii ay muujinayeen daaqada ka tuurayaan,se ka yshalay lahaayeen waannu kaaga hiilinayaa ayay kuu dhiibayaan oo dano gaar oo ay leeyihiin kugu dhaafsanayaan.Teeda kale,saddexduba diinta aynu xambaarsan nahay ee aan u halgamaynno ragii waday ayay qaarkoodna cidhib tireen sida Ereteriya,kuwa kalena ay xabsiyadooda ka buuxsheen, waxa ay laayeenna tiro ma leh.Marka ma aha duruufaha yaalla inay innaga indho tiraan waaqaca jira.

Waana in la kala saaro shucuubta masaakiinta ah ee ka gubanaysa dhibabka nalugu hayo ee tab ay wax u qabtaan garan la' iyo xukuumadaha gaalada askasrta u ah,marnana aan laga filayn inay ragga kuraasta ku fadhiisistay ku caasiyaan.

Taana waxaa marag kuugu ah waxa lagu hayo reer-Faladhiin,shucuubtiina waa ka xun tahay waxa walaalahood lagu hayo,xukuumadihina waxaa amar lagu siiyay inaysan tallabo qaadin,ileen waa la xukumaaye,waxa ciidamo tiro dhaafay ee ay hayaanna waa kuwo lagu ilaalinayo xukunnadaa kufriga ah diintana la diriraya.

Waxaas oo idil waxaan uga golleeyahay,war cid culimada ka baxsan yaanay go'aannada la qaadanayo faro gelin iyo saamayn ku yeelannin,sababtoo ah, hadii qof aan diintan iyo mabaai'deeda si dhab ah u rumaysnayn taladeeda door ku yeesho,waxba tabar iyo taag ulama hadhayo inuu marin habaabiyo,siduu doonana u fadqaladeeyo,ama uu jillaafeeyo. Taana ma diidayso in muslimiinta ninba dhankuu aqoon iyo karti u leeyahay looga faa-iidaysto,laakiin waa kala labo qadiyadood inay qaraarrada wax ku yeeshaan, iyo inay hawlaha ay ka soo bixi karaan loo adeejiyo,iyagoo lagu qancinayo in arrintu aysan ahayn manfac aduun oo loo tartamayo se ay tahay mas'uuilyad culus oo hadii lagu guuldarraysto cadhada Alle iyo ciqaabtiisaba halis loogu jiro .

Mar hadii hawsha dacwada loo gunti giijistayna waa in Alle keliya la isku tiiriyo oo aan cadawgiisa la cuskan .Runtiina xaalada taagan way xanuun badan tahay, waxaana muuqda cadawgii oo si kasta noogu goobtay,kuwii dad badan oo ma kasto ah u haysteen inay tol iyo sokeeye yihiin oo la arkay inay cadawgiiba ka sokaynnin,sida saraakiishii Yamaneed ee Itobiyaanka iyo Maraykanka Godey kula shiri jiray, si qorshihii la maagganaa looga wada qayb qaato, ama sida sirdoonkii carabaha ay uga shaqeeyeen in madaxdii maxkamadaha ay ugu mashquuliyaan shirar dedbedaha lagu qabto,ama iyadoo dagaalladii gaalada lagula oo heerkii u sarreeyay maraya,oo raggii ugu muhiimsanaa ee hawlaha kala hagi xajka loo wada kaxeeyay,taasoo ahayd runtii khayaano weyn oo dadkii Somalidu dugsanaysay ku kaceen,oo hadii wadaaddadu dareemi waayeen in maqnaanshahoodu dhicisaynayo hawshii ay wadeen,sirdoonka Carabtu ma

dareemayn miya khatarta ay arrintaa lahayd.Taana waxay keentay in la is weydiiyo:War xaggee loo ciirsadaa.Runtu waxaa weeye maciin aan Alle ahayn oo la isku tiiriyo ma jiro.

Xaaladan oo kale markay nebiga –naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-qabsatay waxaa ku soo degtay aayadihii Alle ku lahaa:{Sida amarka laguugu siiyay u toosnow adiga iyo kuwa ku raacay ee towbad keenay,marnana ha xadgubina,hana isku tiirinnina oo ha cuskanniina kuwa dulmiga gaystay,hadaad taa samaysaanna waxaa idinku degaysa naar mana lihidin cid aan Alle ahayn oo arrimihiinna daryeesha,hadaad cid kale isku tiirisaanna la idiin gargaari maayo…} Huud(112,113).

Marka waa in aan ogaanno in diinta Alle leeyahay,ilaashanayo,kolkaana isaga la isku halleeyo,wuxuuna ina leeyaha:{Alle ayaa cadawgiinna idinka yaqaanna, isagaana ugu wanaagsan cid danihiinnaa kafaala qaada cid idiin hiilisana isagaa ugu fiican} Al-nisa (45).Marka waa in aynnaan cadawga Alle kala tashannin koryeelida diintiisa .

Sidaa darteed,waxaa la doonayaa in guurtida dacwada lagu halleeyay ee hagaysa ay ka madax bannaan yihiin cadaadis nooc kasta oo uu yahay,mid siyaasadeed,ku dhaqaale,ku qabiil,mid danaysi ku yimid,iyo cadaadis ka dhashay xamaasad iyo qiiro laab-la kac ku dhisan oo dhallin qori sidata ay keenaan.Intaba waa in geed lagu laalo,cidkastana meel la isaga xidho,lana yidhaahdo ;Adeer noo kaadi oo cagta dhig,waxa ay wadato marka laga baaraan degona qaraarkii la qaato farta laga saaro, haduu ku qanco hagaag, hadii kalena runta indhaha laga saaro.

Maalinkase ay dhacdo in tixgelin la siiyo caadhifo dadeed ama ilaalin dareenka cid kaalmo dhaqaale gaysatay,ama cid leh siyaasiyan baan idiin garab taaganahay.taasi waxay noqonaysaa in la qaatay go'aanno aan cidhibtooda laga fekerin,dabadana ku wata cawaaqib xumo aan waqti dheer laga waaqsan doonin. Tixgelinta arrimahaas la siiyayna waa sababta keentay in tiro wadar ah la qaatay go'aanno ah in la is-hubeeyo oo dagaallo la galo,hadana wax yar kadib dib looga noqdo,oo hubkii la xaseeyo. Hadalkanna waxaan u leeyahay,anigoo la socda in walaalaha marar badan siyaabo kala duwan loogu tikhaan-tikhiyay faltanno aysan u bislayn oo aysan diyaar u ahayn,ayna is arkeen iyagoo laf cad toobin ku haya, mar ay xeedho iyo fandhaal kala dheceen, la arkay meesha aan laga noqon karin ee arrini heehaabanayso,markaana arrini calaacal,is-hiifid iyo in la is-haaraamo ku soo ururtay.

Mar hadii asaasyada ugu waaweyn ee la doonayo inay dacwadu ku socoto yihiin wadajir iyo wada tashi (shuura) waa in aan talo la qaadan jeer dhan kasta loo rogo-rogo, si buuxdana loo ruugo,iyadoo arrin walba cida takhasuska ku leh la gala tashanayo, go'aanka la qaatona inta Alle la talo saarto loo guntado sidii loo xaqiijin lahaa.

Waxaa la doonayaa in aad loogu dhug lahaado in sirdoonka gaaladu ay sida jinniga u dhuumalaystaan,dedaal badanna ku bixiyaan dhicisaynta ama marin habaabibta dedaalka iyo hawl gallada ay islaamiyiintu wadaan.Taasna macneheedu ma aha inaan hooskeenna ka cararno,laakiin mar hadii loo tafo xaytay hirgelinta diinta Alle,mowqifka cadawguna yahay: [Wallee taa cirkaa idiinka dhow] ,waa khasab in loollan la galo, taasina waxay keensanaysaa in cid walba ku dedaasho inay sirta cadawgeeda hesho.Marka wax lala yaabo ma aha in sirdoon la isu adeejisto,se waxaan habboonayn iyadoo colaaddu heerkii u sarraysay marayso inaan arrinkaa lagu xisaabtamin.Taasina waxay dhalisay taniyo waqtigii hawlaha dacwada la billaabay in xogaha iyo asraarta go’aannada ugu khatarsan ee la qaato ay si fudud gacanta cadawga ugu galaysay,taasoo muujinaysa in kalsoonida iyo niyad wanaagga aan meesheedii la dhigin,iyo xidrigii loo baahnaa oo aan qiimayntiisa la siinnin.?!!! .Oo soo maalinkasta ma akhrino aayada Alle ku leeyahay;{War hoy kuwa xaqa rumeeyaow foojignaantiinna iyo taxadarkiinna qaba…} Al-nisa (71).?!!!

Soo siirada kuma cada in nebigeenna-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-markuu isu diyaarinaya duullaankii furashadii Maka in sirtii uu xataa Abuubakar-Allaha ka raalli noqdee-ka qariyay,oo markuu Caash-Allaha labadaba ka raalli noqdee-waraystay halka ciidanka loo abaabulayo soo tii ku tidhi:La iima sheegin, war iyo wacaalna uma hayo.

Soo xadiiskii Kacab –Allaha ka raalli noqdee- laguma sheegin in nebigu-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- duullaannadii uu aadi jiray oo idil in meeshu u socdo maahee meel kale kuma far fiiqi jirin?! Isagoo sidaas u yeeli jiray dareen uu ka qabay in cadawgu rag sirdoon u ah soo dirsadaan meeshana ka dhow yihiin.

Maxaa keenay hadaa kulamada go'aannada masiiriga ah lagu qaadanayo in sirtooda la baxsho oo cadawga miiska loo saaro?! sax,cadawgu shaqadiisuu qabsaday,lagulana yaabi mahayo,dadka hoosena inay cadawga u shaqeeyaan arrin ugub ah ma aha,ee waxaan marnaba la aqbali karin in cadawgu rag ku yeesha guurtida u sarraysa ee go'aanadu ka go'ayeen .!!! Taana waa dhab jirta oo aan la inkiri karin

Waxaanan taa sabab uga dhigayaa arrin aan is leeyahay waa xasaasi laakiin in la xuso ay dantu khasbayso,taasoo ah dadyawga muslimiinta ah waxa u taliya waa cadaw aan ka sokaynnin gaalada ay wakiilka u yihiin ee umada dul dhigtay,sidaa darted, hey'adahooda sirdoonka ee ah udub-dhexaadka ay xukunnadooda ku taagan yihiin, waxay si toos ah u hoos tagaan kuwa gaalada Reer-galbeedka,taas oo macneheedu yahay labada dal ee islaamiyiintoodu ay xarakaadka Somalidu xiriirka hoose leeyihiin ee Masar iyo Sacuudiga, ciidankooda sirdoonku waxay hoos-tagaan (CIA)da Maraykanka,kuwaas oo aanu haba yaraatee shaki ku jirin inay siyaabo kala duduwan ugu dhex jiraan

islaamiyiinta dalalkaas.
Haday rag qaar ku doodaan inaysan basaasiin la tacaamulin,waxaa jawaab ugu filan,in sirdoonka cadawgu aysan dheheen jawaasiis baan nahaye iska kaaya jira. Sidoo haday kuwo kale yidhaahdaan; Cidna tuhmi maynno,dadka quluubtoodana nalama farin inaan jeexno!!! waxaa jawaabtoodu tahay,cidina yaan lagu xad gudbin,laakiin,ha la ogaado in shareecadii arrintaas inna fartay ay nagu amartay in la taxadaro,oo waa in aan cidkasta malo wanaag lagula dhaqmin,taas oo keenaysa in umada cadawga lagu khatalo.
Xaalada manta taaganna waa mid colaadeed oo sababaysa in dhiig badan daato,dhibab badanna la maro,marka waa khasab in sirta dhawrsoonaato

## 7) WAA IN DHULKII IYO UMADIIBA LA SOO DHACSHO

Waxa dawlad la yidhaado waxay ku taagan tahay afar tiir oo haddii midkood la waayo aanay dawlad jirin.kuwaas oo ah: (1)Dadweyne (2)Dhul dadku deggan yahay (3)Nidaamkii iyo sharcigii lagu maamuli lahaa iyo (4)Madaxdii dawlada caynaanka u hayn lahayd. Hadaba,sharcigii waa yaal,culimadii la rabay inay hogaanka u qabatana waa tan lala hadlayo,waxaase maqan dhulkii oo inta cadow gacanta loo geliyay la dhaxal-wareejiyay,iyo umadii oo la kala haatiyay,lagana dhigay wax gaajo lagu dilay,in xabad lagu xasuuqay,qaar la dullaystay oo xeryo qaxooti lagu abaadiyay,iyo tiro aan yarayn oo si diinta looga saaro carro gaalo loo daabushay .

Marka waa hawl culimada u taalla siday wax uga qaban lahaayeen dhibka baaxaddaas leh,waa in loo hawl galo sidii loo soo dhicin lahaa ugu horrayn dhulka muslimiinta ee Somalida tii jamhuuriyada iyo inta gaalada loo gumeeyayba.
Arrintuna ma aha wadaniyadda diinta ka horjeeda ee xadaarada gaalad ka soo jeeda ee sida ula kaca ah ugu beereen aduunka.Ee waa in dhulalka muslimiinta gaalo laga xoreeyo,oo inta gacan muslimiin la geliyo diinta Alle lagu dhaqo.
Kuwa culimo iyo caamoba leh ee u haysta in dhulka gaaladu qabsatay ay ka bixi doonaanna waa kuwo riyo ku nool ah, mana dareensana waxa maanta umada Xabashi u garbo duubay inay yihiin kuwii shalay Menelek u jajuubay shucuubta muslimiinta ah ee tirada badan,hadana si ay gacan ku haynteeda u sii xoojiyaan ku soo daabulaya calooshood u shaqaysteyaal magac aan waxba ka jirin la huwiyay.
Sidoo kale, waa in laga shaqeeyo sidii umada la bililiqaysta inta dhulkeeda loogu soo cesho aduunk iyo aakhiroba loo bedbaadin lahaa.Af buuxa ayaanan ku leeyahay: Umada waa la bililiqaystay,iyadoo ujeeddada laga leeyahay ay tahay in diinteeda laga halleeyo oo aduun iyo aakhiroba la seejiyo.Taasoo gaaladu ay

u arkaan guul weyn oo u soo hoyatay.Wax qiimo ahna ma laha hadalka qaar ku hadaaqaan ee ah dadkan iyagaa khiyaarkooda ku aaday dhulalka gaalada, waana kuwaas maalin kasta tuban safaaradaha dalalka gaalada,iyagoo fiisooyin iyo kafaalo kaniisadeed khiyaarkooda ku doonaya.

Dadkan masaakiinta ah waxaa lagu sameeyaya duruufo loogu baahi geliyay inay carro gaalo u habqamaan,teeda kale waa dad caamo ah,oo aan dareemayn halista diintooda lagu hayo,In arrinkan uu lagama maarmaan yahayna waxaa u marag ah.

a) Dadkani marka dhul gaalo la geeyo waxaa khasab ku ah inay raacaan oo ku dhaqmaan qaynuunka kufriga ah ee dalkaas,iyagoo markii horeba dhulkoodii lagu gumaysan jiray oo ay magan ku ahaayeen,maxaad u malayn marka carro gaalo la sii geeyo?!! Soo bulshooyinkaa gaalada inta ku dhex milmaan dhaqankii gaalada qaadan mahayaan?!!. Soo berri kuma faani doonaan inaysan diin islaam shaqo ku lahayn?!!

Maxaa diidaya reeraha boqollaalka kun dhaafay ee la daabulay inay riddoobaan ?!!

Inkastoo ay hawl dhib badan tahay,hadana waa waajib in gurmad loo galo soo dhicinta masaakiintaa gaaladu bililiqaysatay.

b) Markuu Alle nebi Muuse-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee – u soo diray inuu Reer-bani-isra’il bedbaadsho oo gumaysiga ka bixiyo,waa kii la faray inuu dib ugu raro dhulkii Shaam ee ay asalkoodii hore ka soo guureen, sidaas oo kale waa in umada la soo cesho,diinteeda la baro,la dhiso oo lagu baraarujiyo siday uga hortegi lahaayeen, oo isaga dhicin lahaayeen cadowga isir-suulinta la maaggan,weliba si qoto dheer looga raarido in mar hadii gaalo isbahaysatay qaadatay go'aan ah in Somali la cidhib tiro diinteedana laga saaro.iyaguna doonayaan bedbaadinta jiritaankooda inaysan u bannaanayn dariiq aan jihaadka ahayn. Waxaana loo baahan yahay in Xabashida iyo waxa dabada ka wada hilfaha loo qaado,weliba lagu dedaalo inaysan nabad iyo wada hadal ku bixin,ee mar haday xoog ku soo gashay waa inay xoog ku baxdaa,maxaa yeelay, markay iyadoo bed qabta baxdo intay xad beenaadka fadhiisato ayay maalinba gobol soo jiidhi.

Waa inay la kulanto dharbaaxooyin ay kuwa kale la sii firxadaan.Taasina ma aha arrin ciyaar iyo fudayd ku xaqiiqoobaysa,ee waxaa ka sokeeya rafaad iyo qaxar,laakiin aan ogaanno inay gaaladuba qaxarkaa iyo ku ka daranba haysto.Waa inay firxadkoodu iyagoo gubtay,kabahana gacmaha ku wata ku ooyaan:Alla meel baastan maxaa na soo geliyay.

Waana la huba oo taa way iman marka culimadu calanka jihaadka kor u qaado.

Hana la ogaado in gaaladu markasta oo ay jilcaan inay adeegsadaan xeelado ay ceebtooda ku qariyaan oo ay ugu muhiimsan tahay in dhibka jira wada xaajood lagu dhammeeyo

Waa in aan marnaba laga yeelin,ee la yidhaahdo;markaan xoog iyo qori caaradii idinku bixinno baynnu wada hadli doonnaa,inta ka horraysase maya.
Allena waxaa loogu mahadiyaa in maanta aan la joogin xilligii Reer-yurubku inta muslimiintii Geeska Afrika Menelik u garbo duubeen ay ku yidhaahdeen:waan ku garab taagannahaye,muslimiinta ka shaqayso oo maraqooda cab.xilligaana uu dadku u badnaa reer miyi iyo oday-dhaqameedyo musqaayad yar loo xooro oo aan ka dareen qabin belada hareertooda ka socotay,iyo waxa mustaqbalka umadahooda lala maagganaa.

## 8) WAA IN LA FAHMO QIIMAHA CUNSURKA SOMALIGA AH

Sida nebigeenu-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- inoo sheegay aadanuhu sida macaadinta ayuu u kala qiimo badan yahay,oo kiisa xilliga jaahiliga akhyaarta ah markuu islaamo oo diinta barto wuu ka khayr iyo qiimo badan yahay ka kale.
Sidaas oo kale, waxaa la ogyahay Somalidu markay diinteeda si dhab ah u qabsato inay yar tahay umad muslim ah oo ka diin wanaagsan, waana hubaal inay ka duwan yihiin shucuubta ku hareersan ee la dega Geeska iyo Bariga Afrika,weliba ay leeyihiin sifooyin ehel uga dhigi kara in lagu aamino oo lagu halleeyo in mandiqada Geeska iyo Bariga afrika ay ka hirgelyaan diintan,calanka islaamkana ay ka taagaan, ilaa weliba dalalka kulaala harooyinka waaweyn.Iyagoo aan haysan dawlad baritaaraysa ayay badanaa meelaha ay degaan khayr badan ka hirgeliyaane,maxaad fili lahayd iyagoo dawlad ah?!! Marka umaduhu way ku kala habboon yihiin hoggaaminta bulshooyinka caalamka.
Allena markuu nooga warramayay nebi Muuse–naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-oo Ree-bani-isra’il dareensiinaya qiimaha ay leeyihiin waa kii laha:{Tolkayow bal xusuusta abaalka Alle idiin galay markuu idinka soo saaray nebiyo oo boqorro idinka dhigay} Ma-ida(20).Culimaduna boqornimadaa waxaa loo jeedaa bay yidhaahdeen: Haday helaan tarbiyo ku habboon oo macdantooda dhabta ah soo saarta inay yihiin dad ehel u ah hoggaaminta umadaha aduunka.Qiimaha gaarka ah ee ay lahaayeenna waa ta keentay in xilligoodii laga doortay shucuubtii ku hareersanaa ee aduunka ka jiray.
Sidoo kale markuu Alle aadanaha ku galladaystay diintan islaamka ee macaanka badan, wuxuu dadyowgii adduunka ka xushay dadkii Carabta ahaa, una xilsaaray inay adduunka kale diinta gaadhsiyaan, runtiina markay heleen tarbiyadii ku haabboonayd si sharaf leh bay xilkoodii uga soo baxeen oo

dhambaalkii loo dhiibay u gudbiyeen.

Dadka Somalida ahna waxay leeyihiin sifooyin badan oo umadi ku mutaysato hogaam- -inta umadaha ku hareersan,waase haday hesho halyey aqoon diineed leh oo siiya tarbiyo dhab ah,waxaan qabaa inay ku filan tahay oo lagu hallayn karo in calanka islaamka ay ka taagto mandiqada Geeska iyo Bariga afrika. Weliba ay noqoto cududda ugu muhiimsan ee u taagan difaacida diinta kadib markay ka hirgelisa degaankeeda iyo dhulalka ku hareersan,taa keliya ma ahee,waxay dulliga ka saari lahaayeen shucuub muslimiin ah,oo gaaladu si kasta u silicsatay,oo inta dadnimadii laga dilay la cabiidiyay.

Cunsurka Somaliga ahi waa mid uu Alle ku mannaystay,fahmoxad-dhaaf ah,caqli badni, fiiro-dheeri,fir-fircooni,geesinimo iyo hal-adayg,deeqsinimo iyo gacan furraan.

Waa dad aan si fudud u aqbali karin midiidinimo iyo in la addoonsado,taana waa ta keentay in mandiqada Geeska iyo Bariga Afrikaba xasili weydo,kadib markay wax badan gaalada Reer-galbeedku isku dayeen inay gumaystaan ama gaalo kale hoos geeyaan.

Gaalada Reer-yurubka ee qabku diloodayna,iyagoo wax badan ka dersay dabeecadaha ummadan,aadna u bartay sifooyinkooda,dareemeena in qabkooda aan loo aqoonsanayn, waxay degeen qorshe ah in umadan ilaa shan qaybood look ala jar-jaro,qayb kastana dal gooni ah la hoos geeyo.iyagoo si gaar ah isugula dardaarmay in cunsurkan Somaliga inta laga bislaynayo aan loola dhaqmin sida daywga ku hareersan ee la gumaysto loola macaamaltamo.se lagu dedaalo sidii abuurtooda iyo fidhradooda loo fasaadin lahaa, diintana si doqoni ma garato ah looga fogeeyo.ilaa sida umadaha kale u cabiidsamaan.

Deraasada ay Somalida ku sameeyeen,waxay u soo saartay dabeecada dhabta ah ee umadan, siiba natiijadii uga soo baxday labo waqti oo ay taariikhda ku qorteen,ahaana:

a) Halgankii qadhaadhaa ee gumaysiga iyo gaalo diidka ahaa ee ay kala kulmeen.

b) Xilligii ciidamadu talada qabteen,inkastoo meel daran ku hoggaansheen,laakiin waxay muujisay midnimo iyo isku duubnaan awooddoodii laga wada acuudu billaystay.

Waana taa ujeeddadii ka dambaysay inay Reer-galbeedku sirdoonkii Midowgii Sofiyeeti (KGB) si hoose ugu baaqaan inay Somaliya inqlaab ka sameeyaan si ay uga hirgeliyaan nidaamkii shuuciga ahaa, kaasoo sahlayay in la baaba'sho dhaqankii umadda iyo akhlaaqdeeda.Runtiina gaaladu qodobkaa way ku guulaysatay, oo nidaamkaas umada wuxuu gaadhsiiyay dhaqan xumo iyo dhalan rogid aanay weligeed Somali soo marin,inta diin uga hadhayna waa in Alle ku bedbaadiyay saxwadii islaamiga ahayd ee horraantii todobaatannadii Somaliya ka hana qaaday.

Sidoo kale waa taa sirta dahsoon ee laga leeyahay in umadii siday u dhannayd la salkiciyo, si ay bal umadaha gaalada ah ugu dhex milanto oo u fasakhanto,ilaa maanta caarro gaalo lagu hayo gabdho silcay oo gaaladii xumayd ee laga yaq-yaqsan jiray dullaysteen,wiilal si toos ah u gaaloobay,rag sidii naagihii loo guursaday.

Colaaddaa ba'an ee umaddan loo hayo iyo waxyaalaha lagula kacay waxay muujnayaan qiimaha cunsurka Somaliga ahi leeyahay,ee runtii hadduu helo tarbiyo islaam oo dhab ah,midnimo iyo hoggaan aqoon dheer leh, waxaa la hubaa inuu gudan lahaa kaalin aad u qiimo badan oo Alle ku farxo,mandiqadanna waxay lahaan lahayd weji aan ahayn midka ay maanta leedahay.

Awayse culimadii inta qiimahaa dareento ka faaiidaysan lahayd macdantan qaaliga ah?!. Waa in hadaba culimadu aysan dayicin dabeecadaha qiimaha badan ee umadani Alle ku mannaystay,ee inta fidhradeeda la nooleeyo ha lagu jiheeyo inay diinta u khidmayso.

Hana la dareensiiyo inay tahay umad loogu talo galay inay noqoto mid dhambaal khayr u xambaarsan shucuubta ku hareersan.Allena waa kii isgaoo mu’miniinta la hadlaya ku lahaa:{Sidaan diinta idiinku mannaysannay si la mid ah ayaan idiinka dhignay dad akhyaar ah,si aad u noqotaan kuwa umadaha ku markhaati fura…} Aala-cimra(102).

Marka aakhiro la tagana ma noqon karaan kuwa dadka ku markhaati fura jeer inta aduunka la joogo ay dadka xaqa u caddeeyaan oo u bandhigaan, cidii raacda maahee cidii kale ay aakhiro ku marag furan,in xujadii lagu oogay.

## 9) JIHAADKA NOLOLI NOOGAMA SOKAYSO

Waxaa culimada ku habboon inay ka dheregsanaadaan dhabta waaqaca ka jirta ee ah loollanka adduunka ka jira ee u dhexeeya xaqa iyo baadhilka, taagnna taniyo intii aadenaha arlada la keenay,ilaa qiyaamahana soconaya.Loollankanna waxaa arlada ku kala matalaya dadka xaqa rumaysan oo ay horseed u ahaan jireen rusushii Alle –naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-,maantana ay culimadu wakiil ka yihiin iyo muslimiinta kale ee ayidsan,halka baadhilka ay matalayaan madaxda gaalada iyo dadweynahooda,

Sida nusuusta ku cad,sunnooyinka Alle nolosha ku maamulo waxaa ka mid ah in sebennadii nebi Muuse –naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-ka horreeyay iyo weliba qaytii hore ee dacwadiisa, in marka qoomamka rususha loo diray ay fariintooda ku gacan sayraan,waxaa lagu halaagi jiray masiibooyin umadahaas wada camima,markaa kadib ayaa arladii oo qudhunkoodii iyo xukunkoodii

kufriga ahaa laga dhahiray, taladeeda  lagu wareejin jiray rusushii Alle iyo dadkii wanaagsanaa ee raacay.Diintana ugu dhaqmi jireen

Wixiise halaaggi fircoon iyo ciidankiisii ka dambeeyay,waxaa muslimiinta oo ay Ree-
Banin-israa-iil ugu horreeyeen lagu waajibiyay inay gaalada xoog iyo qori caaraddii ula tagaan, ilaa yoolka loo halgamayo la gaadho,kaasoo ah in talada nolosha gaalada laga wareejiyo,oo muslimiintu qabtaan sidaana xaqa ku hirgeliyaan

Hadaba,loollanka ka dhex aloosan dadka xaqa iyo baadhilka kala matalaya,waxaa gundhig  u ah arrin culus oo la isku maandhaafsan yahay,kaas oo ah:

Musliminta oo rumaysan kuna baaqaya mar hadii nolosha aadenaha Alle keliya abuuray, leeyahay, irsaaqo,oo daryeelo,inuu isaga keliya ilaaha nolosha iyo rabbigeedba yahay. Taasoo macneheedu yahay in isaga keliya talada nolosha iyo xukunkeedaba iska leeyahay, sidaa dartedna,isaga qudha loo hoggaansamo oo la isu dhiibo.

Iyadoo gaaladuna-siiba madaxda-  arrinkaa diidan yihiin oo ka horjeedaan,iyagoo la soo taagan inaysan xukunka ka tanaasulaynnin, noloshana ay hawadooda ku dhaqayaan, lehna arlada annaga aadenaha ah ayay noo gaar tahay xukun annaga naga baxsanna ma hoos tegaynno,Allena aduunka kale ee ballaadhan ha u tashado.

Marka lagu waaniyo inaysan cadhada Alle iyo ciqaabtiisaba u adkaysan karin, lana faro in dadweynaha masaakiinta ah ee ay xukumaan aysan diinta ka horjoogsan waanadaa waxay kala hor tagaan xoog iyo cudud milleteri, dadweynihiina inta gadaal marsadaan ayay dadkii dacwada waday u awood sheegtaan,oo xabbad dhafoorka ka saaraan.

Taana waxay khasab ka dhigtay in dadka xaqa matalaya ay isku garab wadaan bayaaninta xaqa lagu burinayo mabaadi'da baadhilka ah ee gaaladu rumaysanyihiin,iyo weliba cudud mileteri oo lagu wiiqo awoodda cidkasta oo xaqa xoog hubaysan kala hortimaaada.

Sidaa darteed,xaqa iyo awooddu ma kala maarmaan,mana kala hadhi karaan.

Sababtoo ah,xaq aanay quwaad fulisa daadihinayn wuu dayacmayaa,awood aanu xaqu hagayninna dulmi bay gaysan oo nolosha ayay halaag iyo hoog badi.

Waa in marka culimadu ku talo galaan in loollanka taagan aan sinaba looga maar min xoog iyo cudud shareecada lagu fuliyo laguna waardiyeeyo.

Herdanka gaalada la iskula jiro waa mid ilaa qiyaamaha soconaya,islaamkuna loollankaa,siiba marka la faltamayo ee gacanta la isula tagayo,wuxuu islaamku u bixiya jihaad loona jeedo la dagaallanka cadawga islaamka,iyadoo shareecadu xadidday ujeedd-
-ooyinka  jihaadka loo jideeyay, waxaan ka soo qaadanaynna afarta ugu

muhiimsan ee ah:
1) In la bur-buriyo quwadkasta oo faafinta xaqa cudud mileteri ku hor istaagta.
Iyadoo quwadaasi adeegsanayso tabo badan oo cabsi gelin,damac gelin iyo dacaaydaynta xaqa iyo dadkiisaba leh,ayay adoomada ka horjoogsataa inay rabigood u hoggaansamaan
Diintuna waxay arrinkaa dartii u waajibisay in kuwaa inta xoog loola tago la tirtiro,sida Alleba u yidhi:{Lana dagaallama gaalada ilaa fidno laga waayo, xukunka arlada dhanna Alle keliya la wada siiyo.]Al-anfaal(39).Fidnadana waxaa lagu fasiraa kufriga iyo shirkiga,diinkana waxaa loo jeedaa xukunka. Macnaha aayadu tilmaamaysana waxaa weeye in jihaadka gaalada lagu wado ilaa quwadooda la burburiyo,oo la waayo cid baadhilka difaacda, lana waayo cid dadka diinta ka hallaysa,sidoo kale waxay faraysaa in dagaalku aanu hakan ilaa xukunka nolosha dhan Alle keligii loo aqoonsado oo la siiyo.
2) In dulmiga laga hortago xaqana dhidibbada loo aaso,arladana fasaadka lagala diriro.
Taas oo ku imanaysa in dadka xaqa rumaysan ay is-hubeeyaan oo kuwa nolosha kufriga iyo fasaadka ka wada cagta hoosteeda geliyaan,ilaa xumaantooda ay la dhuudhuuntaan.
Hadii dadka xaqa rumaysan aysan xaqa cudud mileteri ku ilaalin,waxay taasi fursad u noqon oo ka faa-iidaysanaya gaalada mujrimiinta ah,oo aan biyo u kabbanayn cidhib tirka muslimiinta. wuxuuna arrintaa Alle tusaale innoogu siiyay labo dhacdo oo taariikhi ah:
a) Markii Ree-bani-israil inta gaalo ku soo duushay la jebiyay oo dhulkoodii laga soo saaray,waa tii odayadoodii inta kulmeen la noqotay in dhibkan haysta iyo qaxootinimada looga bixi karo oo keliya iyagoo dib isu abaabula oo cadawga ku rogaal celiya,taana ay ku bixisay inay nebigoodii ka codsadeen inuu abaanduule dagaal geliyo u cayimo.
Markay ka dhabeeyeenna waa tii ay cadawgii ka adkaadeen,nebi Da’uudna-_naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- uu Jaaluut dilay.Sidaas buuna Ree-bani-israail cisigii ugu soo noqday,weliba guushii jihaadka ka dhalatay waxay Ree-bani-israail u horseeday inay gaadhaan casrigoodi dahabiga ahaa,kaasoo ah xilliyadii xukunkooda isaga dambeeyeen nebi Daa’uud iyo nebi Suleymaan-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-Allena isagoo arrinta ka hadlaya waa kii yidhi:{Idankii Alle ayayna gaaladii ku jebiyeen Da’uudna wuxuu dilay Jaaluut,Allena wuxuu siiyay boqortinnimo iyo xikmad,wuxuu doonayna wuu baray,hadii aanu Alle dadka qaarba qaarka kale ku waabinayninna arladaa isla fasaadi lahayd,laakiin Alle abaal weyn ayuu adoomadiisa u galay}Albaqra (251).
b) Markii saxaabadii-Allaha ka raalli noqdee- Medina u hijroodeen waa tii loo fasaxay inay hubka qaataan oo iska dhiciyaan gaaladii Quraysheed,taas oo

ahayd in muslimiintu aysan gaalad ka nabad gelayn ilaa indho kulul la tuso,oo laftooda u baqaan,taas oo macneheedu yahay hadii mu'miniintu aanay horjoogsan fasaadka mujrimiinta inay arladu isla gubanayso,xataa aanay bedbaadayn meelaha diinta darteed loo xormeeyo.

Allena waa kii lahaa:{…Hadii aanu Alle dadka qaarba qaarka kale ku waabinayn waxaa la dumin lahaa soomicado iyo biicooyin iyo kaniisado iyo masaajidyo in badan Alle lagu xuso..}Al-xaj (40).Soomacaduhu waxay ahaayeen aqalo kor u dhisan oo ruhbaantii kirishtadu ku cibaadaysan jireen,biicooyinkana waa guryaha kirishtaanku ku cibaadaysan jireen,salawaatkuna waa kaniisadaha yuhuudu ku cibaadaysan jireen

Aayaduna waxay tilmaamaysaa,in hadii gaalada aan arlada laga qaban,mu'miniintana aan loo adeejinnin inay kuwaas quwad kala hortagaan, waxaa dhacaya fasaad heerkii u sarreeyay gaadha,kaas oo wax kale iska daaye xataa meelihii xurmada diineed lahayd aysan nabad gelayn.Mana la sugayo in gaaladu ku qancaan wanaagga xaqa ee loo bandhigayo, ama ay arlada dulmiga ka daayaan,ama ay dadka xaqa xambaarsan shaqadooda ku ixtiraamaan,se waxayba u arkaan inay jiritaankooda halis ku yihiin.

Marka ma habboona in mu'miniinta iyo dadka xaqa xambaarsan inay naxariis ka sugaan dad isu arka inaysan jirin khatar xaqa uga daran.,se waa in xoog la isaga difaaco loo hayo.

Waxaana ka mid ah sheekooyinka xayawaannaada:In habeen ay tuugo inta si kasta u wareegeen wax ay xadaan waayeen,markay quusteen ayay heleen santuuq xidhan. kolkay la fogaadeen oo fureen baa diiq uga soo b axay,suu ye ,war xaggee ii wadataan soo ima garanaysaan?!!! Markuu isu sheegay ee yidhi:War anigu khayr uun baan ka shaqeeyaa oo adoomada ayaan saqda dhexe salaadda u kiciyaa!!Ayay  ku yidhaadeen: War ninkaan weligayo raadinaynnay caawa ayaan hellay.Markuu sababta waydiiyayna waxay ugu jawaabeen:Soo adiga ma aha ninka aan habeenkii markaan qarraafaynno dadka nagu kiciya ee aan ka shaqaysan weynay? Markaa ayuu yidhi:Weligay maanta ka hor ma moodaynnin inay jiraan dad uu khayrku u daran yahay.

Dhabtu waa sidaa,waxaa jira dad aan sinaba khayrka u oggolayn,ilaa ay awood ka xoog badan  arkaan.Waa fadli rabbi marka in dadka xaqa wata lagu waajibiyay inay mar walba jihaad u darbadaan,si ay arlada belaayada gaaladu wado uga ilaashaan.

3) Ilaalinta jiritaanka mu'miniinta iyo u hiilinta dadka tabarta daran ee la guumaysto.

Gaaladu waa daalimiin ay hunguri xumo iyo hawo hor ordayso,cadaawada ay diinta u qabaanna aanay yarayn,inta karaankooda ahna ku dedaala inay muslimiinta  cidhib tiraan. Waxayna tillaabadaa dib uga joogsadaan oo aysan ku dhaqaaqaynnin keliya markay muslimiinta xoog iyo awood ku ogyihiin.

Sidaa darted,ayuu Alle muslimminta ugu amray inay markasta cududooda mileteri kor u qaadaan si looga baqo,wuxuuna yidhi:{Gaalada u diyaarsada intaad awooddaan ee ah quwad iyo heegan gelinta fardaha,taas oo aad cadawga Alle iyo cadawgiinnaba ku argagi- xinaysaan..}Anfaal(60).Quwadana wuxuu nebigu-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-ku fasiray ganidda,waxaana manta soo gelaya dhammaan noocyada kala duwan hubka,eel eh gantaallada,sawaariikhda iwm.Heegan gelinta fardahana waxaa manta halkoodii taagan giddi gaadiidka lagu dagaal galo.si mu'miniinta looga argagaxo oo markasta looga cabsado wuxuu Alle ina amray in maalinka gaalo loo gacan qaado kuwa gacantu gaadhay
waxa ku dhaca ay kuwa ka dambeeya la sii firxadaan (fiiri Anfaal 57 ).

Waxaa kale oo xoogga loo diyaarinayaa jihaadkana loo gelayaa waa in dulliga laga dul qaado muslimiinta taagta daran ee dani baday inay gaalo ku hoos noolaadaan,isla markaana aan awoodin inay hijroodaan oo dhul muslimiin tagaan.Waana kaa Alle mu’miniinta ku lahaa:{Maxaa dhacay oo aydan ugu dagaallamaynnin koryeelida diinta Alle iyadoo dadkii la gumaysanayay ee rag,haween iyo dhallaanba lahaa ay Alle u cabanayaan ayna leeyihiin rabbiyow mar naga bixi magaaladan dadkeedu daalimiinta yihiin,agtaadana nooga sahal dad maslaxadayada u quma,agtaadana nooga sahal dad hiil noo gala}Al-nisa(75).Magaalada ay ku noolaanteeda ka ooyahayaanna waa dhulka aan sharciga Alle lagu xukumin,ee qawaaniinta kufriga lagumaamulo.

Marka xoogagga muslimiintu waxay hubka u garwaaxsadaan waa inay muslimiinta la
Gumaysto ee tabarta daran u hiiliyaan oo dartood loo dhawro oo loo tixgeliyo, maalinka cududdaa la waayana muslimiintu waxay noqonayaan dad si kasta loo dullaysto.

4) In hoggaanka nolosha la taabo si diinta loogu dhaqo,sababtoo ah,iyadoon awooda xukun gacanta lagu dhigin sinaba suurto gal uma aha in shareecada la hirgeliyo.

Allena waa kii lahaa :{Allena wuu u hiilinayaa kuwa diintiisa u hiiliya Allena waa mid awood badan oo guulle ah,kuwaas oo ah kuwa marka talada arlada gacanta loo geliyo salaada ooga,sekadana bixiya,samaantana fara oo xumaanta reeba.cidhibta arrimaha dhanna Allaa leh}Alxaj(41-40).Aayadan waxay ka hadlaysaa arrimaha laga doonayo inay la yimaadaa mu'miniinta kadib marka Alle nasriga siiyo oo xukunka u gacan geliyo, waxayna tilmaamaysaa arrimaha soo socda:

a) Marka mu’miniintu awooda helaan inay tahay mid Alle gacanta u geliyay,taas oo lagu dareen siinayo in haday gudashada xaqa Alle ka gaabiyaan,awooddaa laga xayuubinayo.

b) Marka aayadu leedahay salaada ayay oogaan sekadana way bixiyaan,looma

jeedo afraad xilkaa gaar ahaanta u saaran gudanaya ee waxaa macnahaa soo hoos gelaya inay yihiin dawlad awooda gacanta ugu jirta u adeegsanaya siday umadu waajibyadaa u gudan lahayd,sababaha ay ku gudan karaanna u fududaysa,waxyaalaha samayntooda ka horjoogsan karana lala dirira.

c) Marka aayadu sheegayso inay wanaagana faraan xumaantana reebaan yaan la moodin in loo jedo wadaad minbar taagan oo wacdi jeedinaya,hadii laga qaatana hagaag odhanay,hadii kale leh: Anigu xilkaygii gutay.Macnaha aayada waxaa soo gelaya isaga iyo cidkasta oo xilkaa u qumta,waxase aayadu la hadlayso waa rag uu xukunku gacanta ugu jiro oo umada u furaysa irdaha khayrka oo ay ugu weyn tahay inay Alle keligii ilaah ka dhigtaan una fududeeyaan siday macruufka u fulin lahaayeen.

Sidoo kale, bulshada ka awdaysa dhammaan albaabada sharka,ayna ugu weyn tahay in qayrkii cibaadada iyo xukunka nolosha lala wadaajiyo.Iyadoo taa u dheer tahay inay dadka xumaanta nacsiiyaan kuna dhiirriyaan siday waxyaalaha Alle ka cadhoodo uga hortegi lahayd,iyadoo cidii loo caal waayona gacan bir ah ku qabanaysa, ilaa dadka sharka samaynaya aysan ku dhiiran inay xumaanta la soo banbaxaan,maxaa yeelay waxay og yihiin in diintu dawlad ilaalisa leedahay.

Ujeedooyinkaa ayaa ka mid ah kuwa jihaadka loo farad yeelay,markaad u kuur gashana waxaad arkaysaa in maanta aysan jirin maalin aan jihaad uga baahi badan nahay, se waxayba dhabtu tahay inaanay jirin nolol jihaad ka sokeysa.Maxaa wacay:

a) Quwidihii gaalada ayaa si kasta u doob dhabanaya,dulmigoodiina karaar dhaafay, diintii Allena hortaagan,waa in marka jihaad loo darbado oo xoog looga hortago

b)Muslimiintii waxay noqdeen dad la gumaysto oo gaalo siday doonta ka yesho,jeer dhiiggoodii qiimo belay,marka waxa keliya ee dulliga looga baxayo waa jihaadka.

c) Mar hadaynnaan shareecada Alle ku hoos noolayn,wax nolol ah oo aan haysanno ma laha, taana waxay ku hirgeli oo keliya iyadoo calanka jihaadka la taago..

Mar hadiinolosha cisiga iyo karaamada leh iyo jihaadku isku xidhan yihiin,Alle wuxuu Jihaadka ka dhigay waajibyada ugu waaweyn ee diinta,heer la gaarsiiyay in laga dhigay fiiqa iyo baarka u korreeya ee diinta.Dadka jihaadayana waxaa laga dhigay mu'miniinta kuwooda adduun iyo aakhiroba ugu derejo sarreeya.Waana camalka qiimaha uu leeyahay dartii nebigu-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- uu jeclaystay in inta jihaadka la dilo la soo nooleeyo si uu hadana jihaadka u galo oo marka kale loo dilo,ila dhawr jeer uu sida ku celceliyay.Allena wuxuu sheegay qofka shahiidka ah inuu nool yahay oo uusan dhiman.Runtii lagama sheekayn karo sharafta iyo qiimaha jihaadku leeyahay..

Waxaase weynankiisa marag u ah in hadii loo badheedho oo dhibka ka imanaya niyad bir ah lagu waajaho in gaalo laga il helayo oo cisi iyo sharaf lagu naalloonayo,hadii laga caga jiido oo loo adkaysan waayana in la dulloobayo,aduun iyo aakhirona la seegayo.

Waxaana in lagu baraarugo u baahan in gaaladu ay aad fulayo u yihiin,oo jihaadka si ba'an u neceb yihiin,maxaa yeelay,marka magaca jihaad la sheego waxaa dhiiggu boqol istaagayaa oo jihaadka u jibbooda dadka muslimiinta ah,xataa haday dhaacada ku fiicnayn, taas oo keenaysa inay gaalada isku dhinac uga soo wada jeedsadaan.

Gaaladuna ma laha wadne ay kaga hortagaan muslimiin midaysan oo jihaad u jibbaysan, waxay markaa dedaalka ugu badan ku bixiyaan in magaca jihaadka aanba la soo hadal qaadin,xataa hadii dagaal laga fursan waayo,oo lala diriro waxay jecel yihiin in magac aan jihaad ahayn la adeegsado,lana yidhaahdo waa dagaal gobanimodoon ah,waa iska caabbin cadaw,xoraynta waddanka,difaaca dalka hooyo iwm.

Waxaa kale oo ay jecel yihiin in dadka jihaadka wada aan mujaahidiin loogu yeedhin,se loogu yeedho waddaniyiin,xorriyo doon xoogagga wax iska caabbinta iwm.

Waxaa kale oo gaaladu isku dhabar jebiyaan siday jihaadka u marin habaabin lahaayeen, iyagoo wadiiqooyin badan u qaadayana ku dedaala in mujaahidiinta la kala dilo si ugu yaraan ay midhaha jihaadka u xadaan,mujaahidiintuna mar dambe isu arkaan iyagoo meel cidlo ah fadhiya.Waxaa kale oo markay is arkaan inaysan mujaahidiinta u babac dhigi karin ku dedaalaan in arrinta la qaboojiyo,mushkiladana wada hadal lagu xalliyo.taasoo ah wedka mujaahidiinta iyo jihaakaba, maxaa yeelay;waa u caado markay jilcaan inay waan-waan iyo wada hadallo afka baarkiisa ah ku meeraystaan.Mujaahidiintuna markay taa aqbalaanna waxay gorgortanka iyo wada hadalka gelayaan iyagoo mowqif daciif ah taagan,kuna khasban in wixii la rabo loo meeriyo,taana ay noqonayso tacab khasaar iyo midhihii jihaadka oo la dayacay,ama gacan kale guratay.

Marka,waxaa culimada la gudboon inay indho feejigan ku fiiriyaan xeeladaha cadawgu adeegsado gaar ahaan xilliga jihaadku socdo.

## 10) WAA IN NASRIGA ALLE LAGU KALSOONAADO

Nasriga Alle wuu iman oo waa la hubaa,inta ragga hawsha dacwada iyo halganka u qumaya ay xeerarka nasriga lagu helo ee Alle xadiday ilaalinayaan.

Waxaase sixid u baahan khalad baahsan oo dadku ka haystaan macnaha nasriga,inta badanna waxaa laga haystaa hal macne oo ka mid ah macnayaasha badan ee eraygaa soo hoos gelaysa,kaas oo ah in xukunta gacanta lagu

dhigo,Laakiin:
In xukunka gacanta lagu dhigo oo diintu kor noqoto waa guul iyo nasri,
In cadawga inta la jebiyo laga adkaado waa guul iyo nasri.
In gaalada dhul laga qabsado waa nasri.
Mabaadii'da diintu wadato oo guulaysat waa guul iyo nasri.
Cadawga oo halaagsamaa waa guul iyo nasri.Intabana nusuus ayaa cadaysay oo nasri ku tilmaantay. Arrinka oo sidaa loo fahmo wuxuu keenayaa in aan la quusan, xataa hadii gaadhista hadafku daba dheeraado,oo guushii si dhakhso ah loo haleeliwaayo.
Waana in arrimaha soo socda qorshaha lagu darsado:
a) In lagu talo in la is-hayo cadaw colaadda noo dhaxaysa ay qoto dheer tahay.
b) In si dhab ah loo yaqaan dariiqa la qaadayo.
c) In lagu xisaabtamo inuu yahay dariiq dheer oo qaxar badan
d) In lagu talo galo inay markasta yaraan karaan wehelka dariiqa.
e) Iyadoo waxaa oo dhan ay jiraan in adkaysi lala yimaado.
f) In la ogaado in la mudanayo rafaad iyo qaxar aan la malaysan karin,in dhiig aan yarayn uu daadanayo,naf badan ay qudh-baxayso,carruur aan tiro lahayn agoontoobayso,haween aan xisaab lahaynna asay xidhanayso,waalid aan qiyaas lahayna gablamayo,
Waa in la ogaado in qoorta la iskula jiro rag kibray oo addun ballaadhan sanka uga mudan yahay.Aanna ku qancayn inay nagula kacaan wax ka yar waxa ay muslimiinata aduunka ku hayaan.Cadawgaas oo marka dusha laga eego haysta nagana badsada hub,dhaqaale ,ciidan, qalab-warbaahineed,shucuub badanna gumaysta, hadbana intuu rabo kugu soo kicinaya.
Laakiin,marka runta la abbaaro,aad u tabar daran,oo muddo dheer aan adkaysan karin, ciidankiisuna aanu dhimashoba rabin,halka innagu aynu haysanno diin adag oo xaq ah,oo hadii aan la imaanno dhaqannadii lagu mudan lahaa nasriga uu roonihii diinta innagu galladaysta hiil iyo hooba innala garab joogo,.cid uu Alle u hiiliyona marnaba gaal uraya kama il helayo,siduu shaacirkii Dhoodaanba u lahaa.

1) Abshir baaba ii muuqatiyo--------- guul agteenna ahe
2) Wax soo aaddan khayr eebahay---- soo abaabulaye
3) Ammuur weeye laynoo aqbali---- oo ijaabo lehe
4) Allaahu akbar waxaan haysannaa ----diin awood badane
5) Islaamnimada awgeed kufriga--- waynnu ka adkaane
6) Ashahaado ruuxii cuskada ------- amase iimaan leh
7) Gaal urayaa kama il helo------- oo iblays ahuye
8) Aayado caddeeyaa jiroo-------- --taa Allaa yidhiye
9) Walow aan sidaa aamiinayo----idam ilaahayba
10) Ebada markii lagu daray------na anfacaysaaye.

Haddaba,waa in la iska fogeeyaa niyad-jab iyo quus,iyo in la is dareensiiyo in aan waxba la iska dhicin karayn,dabeedna la is-dhiibo.

Maya! qofka mu'minka ah sinaba quus uguma soo dusi karto,maxaa yeelay,si kasta oo gaaladu ugu muuqdaan inay awood badan yihiin, wax walbana gacanta ugu jirto,hadana qudro ma leh,oo cidda ay isku taageen waa Allihii weynaa ee awoodda badnaa,aadane miskiin ahna markuu Alle isku taago waad garan kartaa waxa arrini ku dambaynayso,iyo siday gaalo guuldarro u qabsanaysa, ama adhaxdu u jabayso.

Hadii la isweydiiyo: Sidee bay gaaladu Alle isugu taageen?! jawaabu waxay noqonaysaa:

Sideedaba waxa colaada sababay ee la isku maandhaafsan yahay waa:Alle keligii baa ah ilaaha xaqa ah.iyo maya oo ma oggolin in Alle keligii Ilaah noqdo;

Waana tii dagaalkii Beder markii labada qolo ay isa soo horjoogsadeen Alle ka warramay waxa la isku haysto,ee yidhi:{Labadaani waa labo qolo oo colloowday,kuna colloobay rabbigood dartii…}Alxaj (19).Aayaduna waxay tilmaamaysaa in aan la isku haysan wax aan ka ahayn in Alle keligii xukunka nolosha yeesho oo sharcigiisa iyo diintiisa la isku dhaqo,mu'miniintuna waxay doonayaan inay arrintaa xaqiijiyaan,gaaladuna waxay rabaan intii karaankood ah inay qadiyadaas hor istaagaan

Maantana dagaalka taagan waa uun caynkaas,innaguna waxay innaga taagan tahay: Nolol aanay diinta Alle u talinnin geyigaan ku noolnahay sinaba loogama aqbalayo.

Gaaladuna waxay la soo taagan yihiin:Maya,cidii arrintaa la soo banbaxda waan cidhib tiraynnaa.Halkaana waxaa ka cad in cida ay la dagaalsan yihiin uu Alle yahay.

Bal u fiirso dadyawga aynu isku degaanka nahay ee aan diinta nala wadaagin,colaada naloo hayo looma qabo,dagaalka nalugu hayona laguma hayo. xataa muslimiinta la dullaystay ee isdhiibay isir-suulin iyo cidhib tiridtoona laguma hayo. Waxa hadaba naloo colaadin waa Alle dartii,isagana taa ma mooggana.

Sidaa darted,waa in mu'miniintu ka dhabeeyaan oo noloshooda laga helo sifooyinkii loogu ballan qaaday in nasriga lagu siinayo,kuwaas oo ay ugu muhiimsan yihiin:

1-Iimaan shuruuduhiisa kulansaday.

2-In niyada la saafi yeelo oo jihaadka Alle dartii loo galo

3-In si buuxda Alle loo talo saarto oo la isugu halleeyo.

4- In Alle ka cabsi dhab ah lagu sifoobo..

5-In la sabro ilaa halka u dambaysa, cadawgana lala sabartamo.

6-In si joogto ah Alle loogu jihaysto,loo tuugo, oo loogu tadarruco.

7- Inaan la niyad jabin oo aan la isdhiibin hadii la guul-darraysto ama la jabo.
8-In marka cadawga la is-helo jilbaha la dhigto oo aan la baqan,se sutida loo qabto.
9-In baraarug iyo foojignaan badan lala yimaado.
10-In la iska jiro lagana fogaado khilaaf iyo is-qabqabsi.
11-In hoggaanka lagu hubsado gacan aammin ah oo libta soo hoyin karta.
12) In marka nasri la heloba aan la is mahadinnin,oo qab iyo is cajabin lala iman.

Marka tilmaamahaas la helo nasriga Alle iyo hiilkiisa kaabiga ayuu soo jiraa,sida Alle u ballan qaaday,ballankiisuna waa ku xaq ah oo siduu u sheegay u imanaya.

Waa in aan isu aragno in aynnu nahay dad nasiib leh oo Alle ku sharfay inay diintiisa u khidmeeyaan,gacmahoodana lagu fulinayo qadaryo dahsoon,iyo qorsheyaal khayr ah oo Alle ugu talo galay inuu nolosha insaanka ka hirgeliyo,aynnuna nahay dad la ijaartay oo jannadii carfoonayd ee loo ballan qaaday ay meel la hubo u taallo,iyadoo weliba siinta jannada qaaligaah aan shardi nalooga dhigin in diintu ay gacanteenna ku hirgasho,se ama
diintu gacmaheenna ha hirgasho ama dedaalka jiilalka dambe,Alle isagu beecii wuu ka dhacay,dhankiisana ballan fur loogama baqayo.Marka in naloo dirsado shaqadii nebiyadii Alle-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee- loo soo diri jiray ee ay nolosha ka qaban jireen waa sharaf iyo doorasho iyadoo kale aan la heli karin,oo Alle si gaar ah innogu mannaystay.Waxa keliya ee nalaga doonayo waa in inta adkaysanno iyadoon bidix iyo midigtoona loo leexanayn aan raacno dariiqa Alle u jideeyay koryeelidda diintiisa,kaas oo marka dusha laga eego dhib badan,laakiin kolka hoos loo eego fudud oo barako badan.

Waa in si ficil ah looga dhabeeyo arrinta aan markasta sheeganno in aan rumaysan nahay,ee ah in adduunka dhami ku socdo qorshe iyo jaangooyo Alle dejiyay,cid kalena aanay waxba ku lahayn,waxa meel marina ay taladiisa uun tahay, awoodda dhanna ay gacantiisa ku urursan tahay.Sida darted,ma noqon karro dad loo caga jugleeyo,dhoolla tus iyo muruq muujis horatayada lagu sameeyo, maraakiibta diyaaradaha xambaarta oo tvda lagu soo bandhigo,gujisyada meelaha fog wax ka duqeeya,diyaarado dagaal oo noockasta leh, ciidamo marines ah oo sida raha u booda iyo waxyaalo la mid ah,ee dadyoga ducafada ah lagu harowsado,marnaba ma dhici karto,inay na cabsi geliyaan oo hadafkeenna innaga waabiyaan,si kasta oo arrini tahayna,awoodda Alle ayaa leh,tiisaana hirgeli oo meel mari,wixii rabbi noo qoray maahee wax kalena na qabsan mahayaan.

Waxaanna ku kalsoonnahay rabbiga aan dartii gaalo isu hayno,inuu khayr nala maaggan yahay,oo mar hadaan isaga ku tiirsan nahay aanay cidina wax naga qaadi karin, Arrankayaguna wuxuu ku uruursan yahay ama guul oo ay diintiia

Alle hirgasho, muslimiintuna cisi iyo sharaf ku noolaadaan,ama geeri , Alle shahaado noogu deeqo.
Allena waa kii qawllkiisa xaqa ah ku lahaa :{Hadduu Alle idiin hiiliyo cid idinka lib heli karta ma jirto,haduuse garabkiina ka boxo,waa tuma cida Alle ka dambaysa ee idiin hiilin karta,ee mu'miniintu Alle keligii ha talo saarteen…}Aala-cimraan(160).
Bal fiiri sida amarka rabbi iyo barnaamijkiisu uun u hirgelo,markuu Alle qorsheeyay in Reer-bani-israil la sabato bixiyo nebi Muuse-naxariis iyo nabad gelyo Allaha siiyee-loo soo bixiyo lagana bedbaadiyo silicii iyo gumaysigii Fircoon iyo madaxdiisii ku hayeen,waa tii Fircoon waddao kasta u maray inuu arrintaa horjoogsado,heer ay gaadhay in wixii wiil dhasha gawrac lagu xukumay,siduu ahaana loo fuliyay, haddana,wiilkii dartii intaas oo carruur ah loo bireeyay, gurigii Fircoon laftiisa ayaa lagu soo korshay.!!
Miskiin ! Aadane tabar xumaa!! Waxaas baa Alle isku taagaya?!!
Sidoo kale,waa in aan ku seexanno kuna soo toosno in waxa aan xambaarsan nahay ay diin Alle tahay, si kasta oo cadawgeedu isugu dhabar jebiyo inuu u horjoogsado ay hubaal tahay inay hirgelayso,ee arrintu waxay taagan tahay; War yaa hoodo iyo nasiib leh oo xambaarista ammanadan loo hibeeyaa.? Yaa ayaan leh oo jannada Alle loogu deeqaa oo u badheedha jiidhidda caqabadaha gaalo ku gudubtay gaadhista hadafka weyn ee Alle umada ka hor qotonshay ?!! Ciddaa jannada Alle ee qaaliga ah laga iibshay ee loo diyaarshay,waa inay ku talo gasho inay dusha u ridato culysayada iyo takaaliifta ay hawshani wadato,waa in naf,maal iyo waxkastoo qaali ah Alle miiska loo saaro oo lagu wareejiyo,loogana daba hadlin, markaana siduu doono ugu tashado,oo qofkuu doono shahaado siiyo,kuu rabona gacantiisa diinta ku hirgeliyo, waana hawl Alle u taalla.
Waana in u halgamidda diinta aan innaba mansab,iyo dheef adduun lagu doonin,qof walbana diyaar u noqdo inuu nolosha adduunka isaga amba boxo isagoon magaca diinta manfac adduun ku helin,taasoo ah sida lagu aqoon jiray dadka naftooda iyo maalkooda Alle ka jannadiisa kaga gata
Waxaana mawduucan aad munaasab ugu ah oon ku soo gunaanadayaa tuducdan uu hal-abuurka Dhoodaan ku dhiirrinaya ciidan dagaal u qalab qaatay,kuna tusayay dhibka ka horreya ee sugaya iyo sidaan dheef adduun looga helayn. wuxuuna yidhi:
1) Hayaanka aan raraynana -----------waa geeddi hawl badane.
2) Dhexda inuu hadhsado kii---------- rabow waa ban hoolane e
3) War kii haro biyo leh mood-------- iyow waa harraad kulule
4) Kii hoyasho maagganaow ---------waa cidlo u hadafe
5) Oo kii hadimo diidiyow ---------waa naftaa huride
6) War kii xoolo haahaa -------------- banow kama hodmaysaane

7) Kii hadaf xarrago maagga---------- now haaruftaad bixine

Marka inta rabbi la talo saarto sidaa ha lagu talo galo,Allaana ka tuugi inuu naga dhigo kuwa uu xilkaa u xushay ee siduu doonayayna uga soo dhalaala.

.

## GEBO-GEBADA QORAALKA

Qoraalkan oo jawaab u ahaa su'aashii aan maqaalkii {Dhagarta Gaalada} isku waydiinnay ee ahaa sidee dhibka looga baxaa.Waxaanan ku soo bandhigay arrimahan:

1) Dhibka nagu dhacay waxaa gundhig u ah dayacii aan ku samaynnay diinta Alle,taana waxay dhalisay inaan cadawgeenna u jabno,xalkuna waa xadhigga Alle oo la qabsado.

2) Cida qudheeta ee bedbaadinta umada u qumi karta waa culimada,maxaa yeelay iyaga ayaa taagan halkii rususha Alle ee loo so bixin jiray sabato bixinta umadaha.

3) Si culimadu wax uga qabato mushkilada taagan, waa inay u cadahay mabaadii'da ay ku hawl gelayaan,waana inay ka dheregsan yihiin in asalka diintu tahay in xukunka nolosha gacanta aadenaha laga bixiyo oo Alle keliya la siiyo,taasina waxay muslimiinta ku khasbi inaan marnaba xukun gaalo lagu hoos noolaan .

4) Waxaan faahfaahiyay sida xukunka kufaartu u yahay mid sal iyo baarba baadhil iyo xaq darro ku dhisan,intay talada aduunka hayaanna aanay bashariyadu liibaan iyo sacaado ku naalloonayn ,se ay hoog iyo ayaan darro mudanayso,saa darteed,waajib ku tahay muslimiinta inay gaaladaa daalimiinta ah xukunka ka fara maroojiyaan.

5) Waxaan ku dheeraday falanqaynta xaqiiqada cilmaaniyiinta ee gaalada Reer-galbeedku inta wakiilka ka dhigteen xukunka naloogu dhiibay.Waxaanan cadeeyay inay murtadiin yihiin, gaalada kalena aysan waxba ka sokaynnin,ayna

tahay in culimadu ku baraarugaan in haday gaalo cad-cad jihaad la geli lahaayeen kuwanina inay khasab tahay in lala jihaado,aysanna jirin sharci ahaan wax lagu kala sooco.,

6) Waxaan sheegay baahida loo qabo in culimada iyo dadkeedaba ay qaadaan Waxaan soo bandhigay inay tahay waajib sharci ah in culimadu ay hogaanka nolosha qabtaan,waxaa kale oo aan ka warramay duruufihii keenay in culimada hogaaminta umada aysan waxba ku yeelan xilligii gumaysiga ka hor iyo kadibba,iyo inay tahay in culimadu la yimaadaan sifooyinkii ay ehelka ugu noqon lahaayeen inay awooda xukun gacanta ku dhigaan, umadana diinta ugu hagi lahaayeen.

7) Waxaan soo bandhigay talooyin lagama maar maan u ah gaadhista hadafka lagu duulayo,ayna ugu muhiimsan yihiin:

a) Si dedaalka culimada iyo xarakooyinku wadaan midho dhal u noqdaan waa in laga shaqeeyo midaynta culimada,ileen isku duubnida culimada ayay ku xidhan tahay isu keenida xarakooyinka iyo wadajirka muslimiinta guud ahaan.

b) In culimadu aqoon mugweyn u yeelato diinta,lagana boxo ihtimaamka la siiyo madaahirta kore, barashada culuum ay dhici karto in baahideeda aan weli la gaadhin,
iyo barasho fiqi aan awood fulisa loo hayn ,iyadoo asaasyadii diintu maqan yihiin.

c) In dedaal la saaro sidii aqoon qoto dheer loogu yeelan lahaa waaqaca taagan,si xaaladkasta loogula abbaaro waxa mudankeedu yahay,dhacdokastana sida ku habboon loogu dabiibo,aysanna u dhicin in inta caqliga nalaga xado mabaadii’deenni i iyo ahdaafteennii nalaga marin habaabiyo.

d) In hawlaha dacwada iyo gaadhista ahdaafta lagu duulayo loo sameeyo hoggaan ah guurti laga soo xulay culimada oo leh sifooyinkii nasriga lagu mudan lahaa, isla markaana u madax bannaan qararradeeda ay dacwada iyo umada ku hagayso, xorna ka ah cadaadis kasta oo kaga imanaya cid wadata dano gaar iyo ujeeddooyin gurracan,

e) Waa in guluf rogaal celis ah la qaado oo dhulkii gaaladu dhaxal wareejisay la soo dhiciyo, dib u dejinna lagu sameeyo umada dalalka deriska ah lagu bahdilay ee dagaagga ku ah,kuwa debedaha loo daabulay ee la bililiqaystayna inta laga daba tago la soo raro,cidii falkaa ka dambaysayna goor ay noqotoba lala xisaabtamo.

f) In culimadu dareento qiimaha uu cunsurka somaliga ahi leeyahay,dabeedna laga faa-iidaysto, loona tarbiyeeyo siduu diinta Alle garab iyo cudud ugu noqon lahaa.

g) In lagu xisaabtamo halka xaaladdu maanta marayso oo ah in gaaladu kadib markay aragtay inaysan soconayn maaweeladii hore iyo been-beentii ay

muslimiintu mudo ku soo waday.inay wejigeedii runta ahaa la soo baxday, kaasoo ah cidhib tirkay  muslimiinta ku hayso,waxaa marka khasab ah in la taago calanka jihadka,gaaladana la iska dhiciyo.
h) waxaan aad ugu dheeraaday sida nasriga Alle uu xaq u yahay, keliya loo baahan yahay in nalaga helo sababihii aan guusha ku heli lahayn iyo sida aysan marnaba u habboonayn in la niyad jabo oo la is dhiibo,lana ogaado in gaaladu aysan jirin wax ka daciifsan.
Waxaana Alle ka baryayaa inuu naga dhigo kuwa ammaanada uu guudka ka saaray
dareensan  uuna na waafajiyo oo noo fududeeyo gudashada xilkaas.
Sidoo kale waxaan Alle ka tuugi inuu wixii khalad ah ee qoraalkan ku soo arooray iga cafiyo wixii wanaag ah ee aan adoomadiisa u cadeeyayna uu iigu daro xasanaadkayga aakhiro, Isla markaana uu ku anfaco oo ku baraarujiyo dad badan oo muslimiinta ka tirsan  oo aan si fiican ula soconnin  inta uu la'eg yahay belaayada nalala maagay..

Wa billaahi-tawfiiq.

Waxaa diyaariyay:Warsame Naalleeye Xassan
cirsankayeer@hotmail.com

---

Faafin: SomaliTalk.com | June 2, 2008